BAXSAD IYO BAADIGOOB



ENG ABDIRIZAK ABYAD

TUSMADDA BUUGGA

©Abdirizak Abyad 2014

Qoraaga

Afeeef

Mahadnaq

Habsami u Adeegsiga Buugga

Gogoldhig

CUTUBKA 1AAD

1. KA HOR WADIIQADDA DHIMASHADDA

1.1. TAHRIIBKA IYO MICNIHIISA

1.2. Haddaba Hijradda Cusub(Tahriib)

1.2.1. Maxaa ka badalan Tahriibka qarniga 21aad

1.3. Faham darradda xagga tahriibka iyo qeybahiisa

1.4. Noocyadda Tahriibka

1.5. Maxaase Keena

1.5.1. Qarniyadii hore

1.5.2. qarniga 21aad

1.5.3. Xagee ka bilowday tahriibku?

1.5.4. Aqoon la'aantu ma tahlukaa?

1.5.5. Wadankase ka waran?

1.5.6. Dhibku ma khadkaa?Waalid ku xanaaq iyo macnaha nolosha masuliyadeeda!!!

1.5.7. Xageese dhibku ka aloolsanyahay

CUTUBKA 2AAD

2. Lama-Dagaanka iyo Tayuubkii Laashka:

2.1. Xagee la sii marraa. Maxaa ugu yar oo la dhumiyaa?

2.2. Xaawo iyo wadiiqadda maxaa kale qabsaday

2.3. Xasan iyo Warfaa xageee ku danbeeeyeen

2.4. Markii aan taag hayay tallo ma heyn!

2.5. Waxa aadan ka ogeyn

2.6. Yaa fududeeya

CUTUBKA 3AAD

3. Haddaba maxaa laga helaa Xeeradda salkeeda

3.1. Maxaa lagala kulamay

3.2. Midhihii guntiga ku jidhay oo la daadsahay

3.3. Maxayse Barteen?

3.4. Shaqooyinkase ay qabtaan

3.5. Waxa Laga Dhaxlay iyo Hormuudyadda Soomaalida.

3.6. Qolyihii hingoobay iyo wax kale qabsaday Galbeed

3.7. Yaa Eeda leh

3.8. Qaran burburray!!!!

3.8.1. Saameynta Tahriibka

3.8.2. taariikhaha ku soo arooray ummada aanan dhalinteeddu u kicin,

3.8.3. Taariikhdii waa la kheyrin

Gabo- Gabo

Tixraac

BAXSAD IYO BAADIGOOB

Copy right ©2014 by Abdirizak Ali-AbdulKadar Hersi (Abyad)

Al rights reserved. No part of this publication may be reproduced, stored in a database or retrieval system, or transmitted in any form or by any means, electronic, mechanical, photocopying, recording, or otherwise without the prior written permission of the writer.

©Abdirizak Abyad 2014

Xuquuqda kutubkan waa ay dhowrantahay, guud ahaan ama qeyb ka mid ah buuggan lama daabacan karo, lagumana keydsan karo barnaamijyadda wax lagu keydsado ee korontada ku shaqeeya, lama sawiran karo, lamana duuban karo, siyaabo kalena loogama faa'idaysan karo iyadoona ogolaansho laga heysan qoraaga buugga.

Qoraaga Kutubka

Cabdirisaaq Cali Cabdulqaadir Xirsi oo ku magic dheer Abyad waa qoraaga buuggan, qoraagu waxaa uu soo qaatay Post-Graduate Diploman in IT, Bsc in Computer-Science, BA in Leadership and Management iyo Diploma in Accounting and Management. Sidaas si la mid waxaa uu qoraagu ka heystaa shahaadooyino caalami ah oo kale duwan sida CCNA & CCNB in Routing and Swtiching, International Relations and Diplomacy;New Generation University, Developing innovative ideas for new companies;Maryland University, USA, Changing global order ;Leidin University , Natherland.

Qoraagu muddooyinkii ugu danbeeyay waxaa uu ku mashquulsanaa arimaha bulshadda ee kale duwan. Waxaa muddo toddobba sano ah uu wax ka dhagiyay iskuulo iyo machadyo kale duwan isagoo ka soo qabtay xilal kale duwan marka laga bilaabo macalin ilaa iyo heer maammule. Sidaas si la mid ah waxaa uu qoraagu shirkaddo kale duwan kale shaqeeyay Addis Ababa arimaha la xariira Computerka.

Waxaa qoraaga ku dhaliyay inuu qoro buuggan ka dib markii uu arkay bulshaddii oo barakacday, ka dib markii uu arkay bulshaddii oo waayadii hore amaanaysa, waaga soo socdana hididiile ka muujinaya hase ahaata waaga la joogo iloobay. Waxaa ku ka lifay markuu u taagnaa shaahutuna u yiri dhamaan bulshaddii Soomaalida oo maalinbo iyagoo magaalo magaala u socda Addis Ababa ugu timid.

Waxaase la yaab ahayd iyagoona garaynayn meel ay u socdaan, meel ay ka socdaan iyo waxa cayrsanaya toona.Maadaama arimahaas oo dhan ay dhiiri galiyeen qoraagu waxaa uu gartay iney maanta maalintii ugu muhiimsanayd ee bulshadda Soomaalida ee kale duwan oo kale dayacan, mid meel bahalku ku goobtay oo hilbahoodii haad ku faytaamayo meel kaste oo ay joogaanbo inuu ugu deeqo buug ama kutub, kaas oo ah waxa ugu yar ee uu is yidhih bal bulshadda Soomaalida adiguna wax ugu deeq, taas oo dhiiri gelinaysa in dhamaan aqoonyahanka Soomaaliyeed ee kale duwan ay iyaguna bal soo diyaariyaan lana yimaadaan wixii ay bulshadda ugu deeqi lahaayeen.

Afeef

Ummadda Soomaalidu waxay ahaan jirtay mid waligeed aad u feejigan, waana sababta keentay inay yidhaahdaan “ama afeef hore lahow ama adkeysi danbe”, waxaan taaas ka soo wataa inaan anna dhabahoodii marayo. Maadama aan ka hadleyno xaalado cakiran, maadama aan ka hadleyno xaalado macnayaaal kale duwan leh, kuwaas oo la iskaga gooshayo qariidado kale duwan oo aan dalkaba laheyn, waxaa marka laga yaabaa inaan mararka qaarkood u cabirno si ka duwan habkii aad rabtay, waxaase hubaal ah haddii aad Buugga si hab sami ah u raacdid, shaki kaste oo aad qabtid in aad ugu danbeyn uga bixi doontid yaqiin.

Waxaa kale oo aad ogaataa in warsidaha aan isticmaali doono uu u badnaan doona xagga “Erayga” mar haddii ummaddeenu ay ahayd mid waligeedba ka-ab ka-ab taariikhda isugu gudbisa maahmaahyo, murtiyo, maansooyin, dhaanto ama gabay. Sidaasna waxay kuu muujineysaa in qoritaanka fartu ay wali tahay ugub marba haddii dhidibadda loo taagay 1972. Sidaas daraadeedna isagoo ha dhacin ha jabin lagu hayo uu la dhacay dowladii guul-wadayaashaa, halkaas oo guushii Af-Soomaaliga iyadoon si wanaagsan loo carbin uu qalbi burbur ku yimid. Sidaas li ajligeed qoraallo badan ma xigan doono xagga qisooyinka laakiinse waxay u badnaan doonaan: waxaannu wareysi, u kuuur gelid, u soo joogid iyo ka taariikheyn aannu ku keenay.

Inta aad aqrineysid Buuggaaan waxaan soo qaadan doonaa qisooyin dhab ah oo ka turjumaya xaqiiqda saxda ah ee ka jirta meelaha aannu diirada saari doona, waxaan soo gudbin doonaa qisooyin ay ka waramayaan dadkii iyagu ay ku dhacday, waxaa meesha aan ka maqnaan doonin qisooyin dadka kale aan ka soo tabineyno, hase ahaatee waxaannu ka cududaaraneynaah inaanan mararka qaarkood adeegsan magacyadda saxda ah ee dadkii ay ku dhacday, arrimo jira awgood oo ay ugu horeeyaan saameynta xagga aaayatiinka dadkaas, maadama sheekooyinka qaarkood ay yihiin qeyb dhafooradda la qabsaddo, qeyb silic-diryo tii ugu xumeyd la marayo iyo shaleyto tii ugu danbeysay lagu cataabayo. Waxaadse Akhristaha sharafta lahow maanka aad ku heysaa oo aadan marnaba iloobin in xigmadda ku dheehan qisa kaste oo dhacday ay tahay inaan ku cibaara qaadano, nafteena ka waanino waxa dhacay hadday xumaayeen iyo nafafka kaleba, mar kalena isku waanino nafteena anakoo nafteena iyo qoyskeena ka bilaabayna, mar haddii dhaxalka sheekadaasi ay wanaagsanayd.

Waxaa laga yaabaa inaan isticmaalo eray nin i.w.m anigoo markaas ka wata lab iyo dhadigba, waxaana kuu cadeyn kara in nin loo isticmaali karo lab iyo dhadigaba, erayga Ingiriisiga ah ee “man” in loo isticmaalo nin sida marka la leeyahay “in order to live man used to hunt” : ragu si uu noolaadu wuu ugaarsan jidhay, iyadoo laga waddo in ragaas(bini’aadanka). Tusaala kama dambeys ahna waxaa kuugu filan maahmaahda ah “nin walba qumanihiisaa qoorta ugu jira”, taas oo laga wada nin walba=qof walba.

Ugu danbeyn waxkaste oo wanaag ah, oo jidka toosan ku beegan oo aan qoray waxay ka ahaadeen xagga Eebbe, wixii khalad ah, shaki iyo mugdi gelin ahna waxay ka ahaadeen nafteyda iyo Sheydaan.

Fadlan dhamaan wixii cabasho, tallo, dhaliil, wax ku darid iyo wax ka dhimis ba ah igala soo xariiri:

Email: abyadauthor@gmail.com Cellphone:+252907374819

Mahadnaq

Marka koobaad iyo mar labaadba waxaa mahad iska leh Eebbe oo ii sahlay inaan dhamaystiro qorida kutubkan, waxaa mahad iska leh waalidiintay maadaama ay iyagu yihiin kuwa heer aan wax ku qoro isoo gaarsiiyay iyagoo iga soo qaaday heer bahaahinta waxba aan dhaamin waa hooyo Jamaad Maxamed Aadan Tafey iyo Aabbe Cali Khaddar Cabdulqadir Xirsi Dheere(Eebbe ha u naxariistee). Inta aan ku guda jidhay qorida Buugga, tabaabushaysigii, qorida iyo dhamaystirkaba waxaa aad ii caawiyay dad kale duwan dadkaas oo aan mar ku tilmaamo qaraabadayda, marna saaxiibaday, markalena walaalahay. Waxaana igu waajib ah inaan si gaar ah u xuso tifaf tiraha Buugga marna adeerkay aan jeclahay Suldaan Cabdisalaan Xaaji Maxamuud oo qeyb lixaad leh ka qaatay sidii loo soo gudbin lahaa midhihii kutubka tallooyin aan la soo koobi karrina ka bixiyay isagoo markalena u taagnaa inuu tifaf tiro Buugga iyo saaxiibkayga aduunka ugu qaalisan ee Cabdirishiid Cabdulaahi Saciid (Wagas) kaasoo ka qeyb qaatay talada samaynta Buugga kolkii ugu horeysay iguna dhiiri galiyay qoridda buuggan garab wacana aan ka helay.

Iyadoo dadka iga caawiyay qorida buuggan aanan ku soo koobi Karrin halkan, anigoo guud ahaan mahadnaq ballaaran hawada u marrinaya, ayaan misana si gaar ah jeclahay inaan xuso: Bashiir Cumar Warsame oo ahaa dadkii ugu horreeyay ee arimaha Buugga iga caawiya kaas oo lahaa fakradii magic bixinta Buugga, Axmed Ibraahim (Ahmed Kayd) oo qeyb weyn ka qaatay qaab-dhismeedka Buugga waxaana leeyahay aad baad u mahadsantahay, waxaana sidaas si lamid ah u mahadcelinayaa Cirguje, Xasan bille iyo Maxamed Qaali tallooyinkoodii lama ilaawaanka ahaa .

Waxaan sidoo kale mahadnaq u jeedinayaa dhamaan asxaabtii kale duwanayd ee ka qeyb qaadatay hormarrinta iyo tala siinta qorida buuggan ee reer Addis Ababa.

Waxaan mahad balaadhan u diriyaa dhamaan asxaabtaydii reer Hargeysa ee iga caawiyay hawlihii meel marrinta Buugga.

Fii-amaani Laah

Abdirizak Ali-Kadar Abdulkadir (Abyad)

Addis Ababa, Itoobiya , Bishii lixaad 2014

Habsami u Adeegsiga Buugga

Buuggaan waa mid loogu tala galay inuu ku haggo, waa mid loogu talagalay inuu soo faago waxyaabo aan horey loo maqal, waa mid ka caawinaya bulshadda iney dareemaan dhibka ugu badan ee ay qaafilka ka yihiin. Si aad haddaba uga faa'idid danta guud iyo midda gaar ahaaneed ee loo qoray buuggan, waxaan kugu la talinayaa inaad si habsami u socod ah u dhamaystirid aqrinta Buugga, si ay maankaaga ugu dhaadhacdo waxa looga gol-leeyahay.

Waxaa kale oo muhiim ah inaad fahantid in hoga tusaale kaste oo ku xusan buuggan loogu talagalay in arimaha bulshadda dhibaatooyinka haysta wax un looga yareeyo ee uusan dano siyaasadeed la hayn. Ujeedada ugu weyna ay tahay; mar inaad baratid khatarta meeshaad u cararaysid, faa'idada meeshaad ka cararaysid iyo hilmaamsanaanta waxaad awoodid ama aad horey u mulkiday iyo muhiimada ay leedahay AWOODAADA AAMIN KA DIBNA TIJAABI, WAXAAD HAYSATIDNA KU CALOOL FIYOOW.

Anoo toonta Sola-yarey mirmircood ka guranaya, dib u soo noqoshaddaan maagay waxaan la kowsaday arrin gilgishay ilayaasha wadnahayga naxdin awgeed, waxay ahayd maalin isniin ah sanaddii 2008 markii aan maqlay in 135 qof dhimatay, misana konton kale, waase dhaga faro gashi markii 1000 qof ay dhinteen, mar aan sidaas u sii fogeyna 350 qof oo tacsi loo dhigayo. Waa yaab iyo amakaage cudurka bulshadda aafeeyay maxuu ahaa? Tolow ma cudurka geela galla ee fardaha laga gubaa? Maxaase kalifay ayaamo qurra ah oo aan saasbo usii kale durugsanayn in ummadda intaas le'eg uu halaago? Aafadase uu reebay maxay ahayd? Maxay culimaddu ka dhaheen? Dawo ma loo helay? Mase la dabar jaray? . Waxaa la yari Arrin aan sidii futo riyaad la faydin, ma fayoobaatee oo macnaheedu tahay hadday fooli imaato gudda qarsiiye harre. Bal si uu warku waaadax noogu gallo waxaan u baahan doonaa inaan quluubteena furno, maadama dhallo(quraarad) ham baroorta ay adagtahay in biyo lagu shubo, waxaan kale oo ubaahan doonaa inaan u fiirsano sida xaajo isku daba taal, halkaas oo ay nooga soo bixi doonto sida aduun u qasanyahay iyo halka sartu ay ka quransantahay, taasoo miraheedda noqon doono inaan fahano in Hashayadda Teeri ay caana macaantahay.

Waxaadse maqashid, maskaxdada ku soo dhaca meelkaste iyo markaste oo aadan micnihiisa muudmuudsan aan mawduuciisa bayaanshee, maadeysi tuurtidoo, macnihiisa sharaxee bal u fiirso sida xaajo isku daba taal.

Waxaa laga yaabaa inaad moodid inaad fahansantahay Jidka-Siraadka, haddabo su'aal, sigaarka ma daroogga khatar ah baa?. Haddaba hadday jawaabtu tahay haaa, shantii qof ee dunidda joogta hal ka mid ah baa dhinta cabidda sigaarka awgeed muddo kasta oo **8** sekan ah, taas oo caqliyan ku tusi karta in halkii daqiiqo ay dhiman karaan **8** qof cel-celis ahaan kuna sii tuseysa in halkii saac ay dhiman karaan **480** qof oo dunidda cirifyadeeda ku nool. Waa su'aale haduu sidaas u khatar u leeyahay, sigaarka maa la iska daayo? maxaase keenay in dadkii cilmigga u lahaa ama dhakhaatiirta qaarkood ay u cabaan??. Waxa aanan kale saarrin erayadda fahan iyo aqoon ama garasho. Dhakhtarka cabaya sigaarka wuu yaqaanaa waxyeeladiisee mase fahmin. Haddabbo adigu haddii aad tahriibka khatartiisa fahantid, misana doonaysid inaad wali tahriibtid waad garataye maadan fahmin.

Si aan labadaas eray ukale saarno, waxa lagama maarmaan ah inaan faahfaahino; waxaa jirta waxaad taqaan oo aadan fahansaneyn, waxaana lagu kale sooci karaa qofku waxa uu fahnsanyahay kuma khaldamo sida caadada ah , laakiinse kolka ay garasha ku egtahay kaliya waa lagu khaldamaa.

Haddii laguu sheego laguna tuso shey khaas ah inuuu dhib leeyahay oo lagu dhaho ha taaban waa lagu gubtaaye, waligeed qof isku daya lama waayo, waxaa la helaa mid is dhaha kasoo meel gaar, waana sababta ilmahu ay dabka ugu gubtaan qeybtood iyagoo badankood garanaya, waayo waxa garashadda la yiraahdo xayawaan kaste wuu leeyahay marka xoolaha lagu darro, laakiinse bini aadanka waxa gaar ka dhiga waa fahanka, fahankuna waa mid si weyn uga xeel dheer garashadda. Waxuunna kuu muujinayaaa eraygaasi; in qofku haduu si dhamaystiran wax kaste u fiiriyo u falanqeeyo kheyr iyo shartoodba, u soo joogay ama taariikha hore wax ku qaatay uusan gaf badnaan. Waaana wali sababta dadka maanka leh misana iyagoo garowsan ay balo u doontaan iyagoo taas hilmaamsan. Haddaba waxa uu qofku wax fahmaa markay xaqiiqda tagto iyadoo sida wax loo fahmo lagu kale duwan yahay, oo ay dhoobanyihiin, dad tusmeynta iyo hogga tusaalaha wax ku qaata.

Dood kalea tidhih; dadka wax dila waa kuwa wax sii dillee ma fahmaan miyaa?. Haa waa fahmaan laakiinse markale sida wax loo fahmo ayaa kale duwan iyadoo meelaha qaarna kusii kale duwan, waana marka walaalkiis ama ehelkiisa dhow qof ah ama qof uu aad u jecelyahay la dillo markaas buu garwaaqsadaa dhibaataduu geysan jidhay inay dhanaantahay. Waxaana kuu cadeyn kaara ninka dagaalyahan ka ah colna waa yaqaan nabadna waa yaqaan, waayo daah kama saarno siduu dhadhanku noqon doonaa marka xaajo gacan tagto.

Mar kale waxaa cadeyn kuugu filan in erayga **fahan** uu ka duwanyahay erayga garasho/aqoonsho i.w.m diinteena suuban ayaa taas ku cadeysay xadiiskii ahaa **“Qofkuu Eebbe kheyr la doono, waxuu fahansiiyaa diinta”.** Waxaa mar saddexaad kuu cibaari karnaa Quraanka Kariimka ah; oo waa tan la yiraahdo hebel waa xaafid oo macnaheeddu tahay quraanka wuu garanayaa, garashadu macno taas ka sii yar bey leedahoo waxay noqon kartaa; inuu garanayo waxyar sida;Quranka inuu yahay kitaab Eebbe, waxbadan: inuu aqrin karo ugu badnaan lafdigiisa. Haddabo culumadda islaanku way ka duwaan inuu qofku Fahasanyahay xitaa haduu micnihiisa garanayo; waxaa tusaale kama danbeys ah kuu ah markiii asxaabta la waydiiyay inay fasiraan suuradda NASAR; oo asxaabta inta kale midba meel u qaaday fahanka, waxaana fahmay wiil yar oo la dhaho Cabdullahi Binu Cabaas(Eebbe Haka Raali Noqdee) oo ku tilmaamay iney muujineyso dhimashadda nabigga oo soo dhawaatay , nabiggeenuna (N.N.K.H) in badanbo ma sii nagaan fasiraada suuradaas ka dib.

Waxaana halkaas kaaga cadaatay in ay adagtahay in la fahmo Tahriibka, waxaadse xusuusanaataa waxa ugu horeeya ee aad maqasho iney noqon doonaan waxyaabo dhagahaadda aan horey ugu soo dhicin ama aadanba dhab ugu soo joogin dhalanteed ma ahane. Buuggaanni mar waa taariikh, mar waa tallo, marna waa turxaan bixis. Kuma barayo tahriibka iyo khatartiisa kaliya ee waxaa uu ku siinayaa aqoon guud iyo ififaalooyin kale duwan oo mar waa habraacyo iyo aduunka kale akhbaartiisa, marna waa diinteena suuban iyo waxay na fareyso, marna waa fahanka waxa naga maqan, marna waa cibaaro iyo wax ku qaadasho.

Haddaba buuggan looguma tala gelin qofka aan waanaba qaadan haba yaraatee, waxayna taaasi muujisaa Qalbi-Adayga cudurka la yiraahdo, Haddaba Eebbe(C.W) waxuu uu yiri”waxaan ka yeelnay Qaluubtoodii Adayg” waxaana taas loo sameeyay ciqaab lagu ciqaabayo waxay sameeyaan. Arrinta qalbi adaygu waa shey daran waxyaabo badan baana keena oo ay ka mid

tahay; adkaarta oo laga taggo, diinta oo la dhayalsaddo, digrigga Eebbe oo la iloobbo, Quraanka oo aan la aqrin, xumaha oo la xalaalaysto I.W.M.

Haddaba akhristaha sharafta lahow buuggaan waxaa loogu talagalay adiga, waxaa loogu talagalay dadka taariikhda wax ku qaata, waxaa loogu talagalay dadka u nugul waanadda. Waxaana aan aaminsanahay inaad tahay qofka saxda ah oo loogu talagalay buuggan kooban, waxaan aaminsanahay inaad ku tusmo iyo tallo qaadan doontid, waxaan kale oo aan aaminsanahay inaad noqon doontid kuwa iyagu dadka waaniya, samaanta fara xumahana ka reeba.

CUTUBKA 1AAD

4. KA HOR WADIIQADDA DHIMASHADDA

4.1.Tahriibka iyo Micnihiisa

Haddaba si aannu u lafa gurno waxa uu yahay Tahriibka iyo macnihiisa, sidoo kalena shaac-bixiisa waxaannu u baahanaynaa inaan dib ugu laabano taariikhiii hore, waayadii loo yaqaan erayga Tahriib Haajirid ama Socdaalid.

Sagaashan kun oo sanno ka hor waxaa la yidhaahdaa bini aadanku waxuu ka soo socdaalay Afrika. Maanta bini aadanku waxa uu dagaa cirifkaste oo dhulka ka mid ah. Markaad sii fiirisid bini'aadanku way safreen iyagoo jaraaya badaha waaweyn iyo waxyaabaha aduunka casriga ah aan qaaradaha u naqaaano. Waxaa la sheeegaa in bini'aadanku sababta ugu weyn ee hijrooyinka ku kalifeysay ay ahayd in un ay islahaayeen meel ka fiican meeshaan(oo ah meeshay horey u dagnaayeen) dagga kana kheyraad wanaagsan, maadama nolosha bini aadankii hore ay u badneyd Ugaarsato iyo Qaraabato.

Waxaaa la is weydiiyaa meesha ay ku noolaayeen Homo Sapiens(xayawaan bini'aadanka u eg oo si khaldan loo aaminsanyahay) kii ugu horreeyay!. Sida dadku ay ugu kale goosheen badaha waaweyn! Goormayse ahayd markii ugu horeysay ee waqooyigga Maraykanka la dago? Su'aalaha noocaan ahi waxay laf dhabar u ahaayeen cilmiga Barashadda **Dadka iyo Dhaqamadood.**

Haddaba waxay culumadda ku xeel dheer taarikhda ay sheegaan in markii ugu horeysay oo bini aadanku ay ka soo haajiraan Afrika ay ahayd abaaraha 85,000 oo sanno ka hor, iyagoo soo raacay xeebaha barriga Africa, ka dibna Aasiyadda Bari oo ku dherersan Sri Lanka, ugu danbeyn agagaarka Indunuusiya ka dibna Ustureeliya. Waxaa kale oo la odorasaa inta u dhexeysa 40,000 ilaayo 12,000 oo sanno ka hor in bini-aadanku ay ka soo gallen Yurub xagga waqooyiga. Taasina waxa ay ku tusineysaa sida nolosha bini aadanku ay u ahayd mid sida kuba xusan diinta suuban oo ruux walbe rumeysanyahay oo dunidda ku nool in dadku Aadan iyo Xaawo kasoo askumeeen iyo in dadku markii hore Afrikaba ha noqotee hal meel ku noolaayeen. Waxey kale oo kutusineyssaa taariikhda tanni in bini'aadanku waligiisbo uu socon jidhay iyada oo waxyaabaha keeena ay kow ka ahaayeen; colaadda, baraf iyo gabaad la'aan, cudur iyo daaqsiimo la'aan, beero iyo kheyraad la'aan, abaarta daran, musiibooyinka dabiiciga ah iyo waxyaabo kale oo la halmaama.

Saynisyahanaddu waxaa ay isku dayeen tilaabooyin baddan si dib u habeyn ay ugu sameeyaan bini aadanka iyo meesha uu ka kale yimid iyagoo ka ka faa'ideysanaya Cilmiga Hab Nololeedka Dadkii Hore iyo dhawaanahan fikradda cusub ee la soo saaray ee loo yaqaano"**DNA**".

Haddaba Hijradda Cusub(Tahriib)

Inkaste oo uu sare u kacay tahriibinta dadka marka laga soo bilaabo qarnigii 18aad oo caanka ku ahaa adoonsiga, Haddana qorshahaan waa mid soo jireen ah, waxaana la sheegaa in Boqortooyadda Ingiriiska uu si caadi ah ugu bilowday qarrinigii 18aad (waa baryahii gumeysiggee). Wax yaabaha kale oo iyagunna la sababeeyaa waa nidaamkii shirkadeynta oo si dardar leh ugu muuqday wadamada reer galbeed oo uu qof walbe ku taamayay inuu ka faraqabsado.

iyadana waxaad moodaa inay wadada u sii xaartay qarnigi kan hal qarni ka horreeyay ee 19aad, waana sababta keentay in markii ay dowladdi Kacaanka ahayd ee Maxamed Siyad Barre Burburtay 1991 ay Soomaalidu si xoog ah u bartaan iney iska dhiibaan safaaradaha kale duwan. Waxaana in badan lagu qaaday magangalyo doon, intaas in ka sii bandanna **isxanbaar(**nidaaam la isku dhoofiyo), waxaase xitaa dhacday dadkii iyagu ka fiyoobaa aafadii dhacday xitaa inay Sponsor wax loogu yeeray saf u soo galeen. Haddaba marka laga fiiriyo dhanka Soomaalida waxay u badneed carar un, dadka badankood waxay ku haddaaqayeen in hawshu ay yara cakirantahoo maalin aan fogeyn la noqon doona, waxayse ku qaadatay 23 sanno oo aan soo noqod laheyn, halka qeyb kalena ay wadanka horeyba uga maqanaayeen iyagoo iyana sugayay in dowladii kacaanku ay dhacdo taasoo ka dhigaysa taarikhda muddo 23 sanno ka badan.Wali dadkii tagey maalintaas ilaayo maata oo aan joogno qarnigii 21 aad waa ay soo noqonayaan, wax ka soo laabteyn ma heyno.

Haddaba su'aasha waa ma Soomaalida unbaa keentay in ay socdaaasho kaliya?Jawaabtu waa maya Afrika badankeeda dagaallo baa ka socday ummaduhu waxay ku kacsanaayeen dowladdo kaligii talisyo ah. Dadka u tahriibaya qurbaha waxaa ay la haayeen laba u jeedo:

a) Nin xamaal tag ah oo is leh bal mar aad gacmahaadda si wanaagsan u soo dhunkatid
b) Iyo nin qaxooti ah oo is leh nolol ka wanaaagsan hel oo ballo iyo baas ka carar ah

Maxaa ka badalan Tahriibka qarniga 21aad

Ummadihii aduunka ku noolaa oo dhan waxay la waa bariisteeen qarni cusub, qolle walbana barwaaqo iyo bashbash un baa wax loogu sii daray, hase ahaatee waxaa dhacday in Soomaalidu iyagu ay bartii qarnigii hore aysanba ka dhaqaaqin, balse sannadihii danbe waxaa is bedelay erayga haajirnimadda oo sababtoo ah waagii hore wax baa loo aaneynayay aad u muuqday, haddase waxaa badalay jidkii hooga, jidkii halaagga , jidkii burburiyaha qoyska, jidka waxa kaa galaya iyo waxa ka soo go'aya aysan isku dhaweyn , jidkaas oo aan ku tilmaano; Tahrib(u taagan: **T**aladii xumayd, **H**agardaamada lahayd, **R**aasamaalka u darnayd, **B**aladkana burburisay); oo marka la macneeyo ah taladdii xumeyd, dadkana turuntureysa tahluukana ku tuurta.

4.2.Faham darradda xagga tahriibka iyo qeybahiisa

Doqontu way taahaysaa meesha laga hayana ma ogga, dhibaatadda ugu weyn oo na heysata ayaa waxay tahay: cilmi nafsiyan ahaan baan ooga boodeynaa khatar iyo dhib geeri leh oo nasoo hor food leh, waxaaan maskaxdayadda u sheegaynaah, "*Walaahi heblaba tegtey*, *waryaa Hebelna tag*" anna aan taggo baa ku xigta. Hadhowna markaan xaaladdii dhabta ahayd la kulano ban indhaha kor u majiirnaa , markaasaan isku maansheynaa "*Ilaahow maxaa isoo waday!!".* Xaqiiqdu waxay tahay ama afeef hore lahow ama adkeysi danbe lahow. Haddabo talladda wanaagsani waa inaad markaste aad ku fakartaa sidaad iskaga reebi lahayd afeef.

Waxyaabaha midaas kasii daran; nagama dhaadhacsano waxa si dhab ah kuu soo geli kara haddaad raacdid jidka-Naxariis daradda? Maxaad keydin kartaaa marka aad gaartid hadeybo dhacdo makaankaadii inaad gaartid? Maxayse tahay xaqiiq ahaan adoo naftaadda aan u beensheegayn waxa kugu kalifay oo aadan u dulqaadan Karrin oo ku wadaya? Maadaama

Eebbe ha ka raali ahaadee Cumar Ibnu Yasit Sacid uu ka soo wariyay rasuulkeena Muxamed(N.N.K.H) inuu saddex wax ka dardaarmay oo kale ah:-

- U cadaalad samee naftaada
- Aduunka nabad gaarsii
- Iyo isticmaal in yar xaga kharashaadka

Haddaba waxaan kasoo wadanaa adigoo naftaadda u cadaalad sameynaya su'aalahaas kore si waadax ah ugu jawaab walaalkeyga/shayda Muslimka/da ahow/aheey. Mase dooran lahayd inaad aadid dal aan dalkaadii ahayn oo dareen ku joog ah adigoo reer iyo hanta tira badan heysta, isla markaana awooda wadankuu rabbo aduunka inuu taggo? Mar labaad jawaabta waa maya ninna ma tageen; Haddaba Akhristow maxaa kaa indha saabay waanaaga dhulkaada, maxaase maan kaadda gaabiyay soo ma ogid meesha aad u socotid iney rag dhisteen, Maxaad ugu fakari la'adahay adna inaad kaada dhisatid?Haddaba Ma waxaad garawsaneyn in haadka samada duuliyu diinkuba u simanyihiin calaf?Mase nin baa hella ceesh uusan u dhididin?Maxaadse aadan u aaminseneyn sidey diintu nagu tir; Dayaxana ha dhaaftee, qeyrkaa darajaduu helay rabbi kaami daahin, Maad daadashid walaalow? Gaari doontide. Waxaadna ogsoonaan doontaa in jawaabta kuu soo baxda ay noqon doonto ineysan jidhin sabab sax ah oo aad uga hayaantid dhulkaada hooyo, asbaab kaste oo aad sameysid, haddii aad jawaab ka bixisid adigoo maskaxdaadda la tashanaya mid aad waafi u ah baad u helaysaa. Risiqse Eebbe kuu diiday walaal kaa durug sanaa, nimuu Eebbe duunyase siinaayo deeqi u dhawaa; Akhristow markad fiirisid diinteena suuban waxaa xaqiiq ah ineysan meelna kaga soo aroorin in dhul gaalo loo haajiro iyadoo la helo dhul Muslim, oo loo haajiro karo haddii la doorbido, iyadoo dhulkaadii qudhigiisii la joogi karo haddii iyana loo baahdo.

Waxay haddaba wararka naxdin leh bilowdeen si aad ah, wixii ka danbeeyay sannaddii 2005ta, maalinba maalinta ka danbeysa waa la tahriibayay, Haddaba Akhristow haddaad ogtahay waayahaas wadada Yemen ayaa caan ahayd waxayna iigu darneyd markii qoyskayga qof ka mid ah uu jidka cabbey, ka dib markaan weysaneyn in ka badan 5 sanno, isagoo dhib iyo dhaawac un kale soo kulmay ka dibna ay dantu bidday in bal meel somaali joogtu uu ka bidhaansado ayaannu dib u helnay. Maalinba war xun baa la soo sheegaa, waxeysa isa soo tartabo maalin ay aheyd 22/12/2012 ayaa hal mar kaliya la soo sheegay 55 qof oo ay la qalibantay doonni, waxaase wax laga naxo ah meesha ay mashaqadu ku helayso waa soomaliya iyo Yemen badda u dhaxeysa haddayba meel badda Mediternium ka ku dhiman lahaayeen waxbayba ahaan lahayd sida lagu soo daabacay: Somalitalk.com.

Waxbadan kama soo wareegin marka ay magaalooyinkii soomaaliya oo dhan oo Bil-ba midu tahriib tahay ay imaatay magaalada Addis Ababa, iyagoo kuligood ku sii boqoolay jidkii darxamu.

Noocyadda Tahriibka

Haddaba si aan si balaadhan ugu fahano Tahriibka waxaan u baahnaaneynaa inaan barrano noocyadiisa:Waxaa dadka badankooda ku soo dhacaya isla markiibo markaan erayga tahriib aan ka haddalno, wiilkii Cabdulaahi ahaa iyo wadadii horseedka dhibaato. Hase ahaatee waxaad moodaa fikraddaas iney aad u koobantahay. Sidaas li ajligeed markaan rabno inaan ka haddalno tahriib waa **saddex nooc,** oo kale ah sidatan**:**

i. Nooca sharciyeysan
ii. Nooca aan sharciyeysneyn
iii. Nooca banana

i. Nooca sharciyeysan

waa kan dadkii xaalufiyay , waa midka sababay in intii joogtay la hami kiciyo, waana midka horseeday magaalooyinka maran, waa midka dadka waalay, waana kan keenay in saan qaadka aan lagu dheefin maadama hasha danbe ay tan hore saan qaadkeeda leedahay.Waa siday diiye waxaa la yidhaahdaa doqontu waa oo yaysaaa meel laga heystana ma ogga; waa sababta keentay inaan la yaabno dadkaan sii socda un.

Mar aanse milicsadday khatarta balaadhan ee ay keento wadiiqada mawdka sharciyeysan, waxay illa noqotay in wax un dhibaatooyinkiisa ka mid ahaa aan idiin soo gudbiyo. Haddaba waqti aan sidaas u dheerayn waxaa dhacday qiso lala ama-kaago: waxaa jidhay inan joogay magaaladan Addis Ababa, waxaana keenay qoyskiisa si ay ugu xareeyaan Tahriibka sharciyeysan ee ka khatarta yar midka aan sharciyeysneyn. Waxaase intaas u dheerayd isaga inuu ahaa nin balwaddi arkootay oo waalidii aan la garwaaqsan ee caadada u ah Soomaalida uu isticmaali jidhay marka si kale loo dhigana loogu yeero “daroogadda ama qaadka”. Haddaba dhibka labaad oo taas u dheerayd oo uguba darnaa waa inuu ku dhacay “Interview” gii ama wareysigii lala lahaa , waxaana uu gabaadsi ka dhiganayay qaraabadii kale ee iyagana laynku u xaraysnaa, balse iyadana waxay waji gabax ku noqotay markii uu kaligiis oo maqiiqan jaraha isa soo taagay, waxase ugu weynaa oo meesha ku hayay waxay ahayd hooyo oo iyadu mar walbe beer jilicsan, hase ahaatee waxay xaajo ku yuurarsatay markii qoyskii ay go’aaan ku soo gaareen in ay lacag u soo dirayaan uu wax ku qabsan karo, hadday tahay inuu layn ku gato iyo hadday tahay inuu ganacsi ku furto, maadama ay adkeyd in la biilo oo reerku laftirkood ay la daalo-dhacayeen qurbaha maadama ay ahaayeen kuwo dhawaan galay.

Waxayse arrinba badalmatay markii ay is barteen inan gashaanti ah, gabadhu way qurux badneyd, weyna dabeecad wanaagsan, weyna soo jiidasho wacneyd, codkar na wey ahayd hase ahaatee waxay u socotay tahriib, waxeyse intaas oo dhan masuul ka noqdeen inuu fakarkiisii badalo oo uuba is yari “ waryaa hee doqon baan wax garrane lacagna waad heysataa, maalintaad wax heysataana wax la qabsadaaye, oo tallo iskuma kaa sheegtee maadba guursatid”, sidaas iyo waxyaalo la halmaamo misana iskula faqay dhowr jeeer, hase ahaatee gabadhu faq kaa ka gedisan ayay wadatay oo iyana is tiri “Hali maalin bey ceel joogtaaye, maad adna ninka lacagta la ordaya ka fara qabsatid?”. Sheeko farxadeed iyo haasaawayaal kale duwan, waxaa la noqdey cayshow milix, in badanna la isku sir waramay lana is caashaqay , reyn reynta iyo farxaddana aad loo wada qeybsadday. Maadama uu wiilku dhowr jeer wareysigii safaaradda uu ku dhacay, gabadhii waxay keentay fakar ah in iyadu lacagta ku

dhoofto , inan kuna uusanba waxba saas ah ka danbeyn, maadama uu isna inanta la cajabay waxa kaliya ee qalbigiisa ku weynaana ay ahayd guurkeeda, xaaladdaas la marayayna ay ahaayeen laba qof oo si walbe isku yaqaan wanaaag mooyee war xunba aan isku sheegin isna heybsaday oo is tol gartay, intaas iyo in kalena ay ka dhaxeysay, waxuu go'aan hoosta ka xariiqday in warkaasi muwaafiqo yahay. Kolkeyse xaajo halkaas mareyso waxyaalihii ugu waaweynaa ee lagu balamay si aysan waxba uga soo noqon mustaqbal dhow iyo kan fogna waxay ahaayeen sida tan; waxay ku balameen waa mark hore ee inaan midba kan kale waxba ka danbeyn, waa marka labaade in inantu ay qaabileyso; biilkiisa, noloshiisa iyo lacagta kaftanka ah ee suuq ku galka marka lagu daro qaadkiisa.

Nasiib wanaag waxaa dhacday in gabadhii Ingiriiska ka dagtay markii la gatay layn laga helay nin isagu markaas halkaas ku sugnaa. Hase ahaatee inanka qorshaa dhaafay oo inantu uma mehersaneyn, waa la is jeclaa, waana la isku sir qarsan jidhay. Inkastoo qofba qorshihiisu gooni u lahaa, haddana quluubtu waa ballee inuu aqristo inanta keeda waa u suuroobi weyday. Maadaama ay aaminsanayd inantu in dantaadda maqaar ey loogu seexdo waxay samaysay wax kaste oo macquul noqon karay, waana halka khibrad oo ay aadka u isticmaashay, waana halka khibrad oo u suura gelisay inay halkaas tagto. Wali waxbo ma xumeyn gabadhii markii ay dagtay ka dib, waxaa ay u qortay inankii biil waxna ma xumeyn ilaayo billo ka dib markii ay tidhih " waar heedhe waxa markii horeba reerkiinii ay kaaga tageen baad qabtaaye anna afar iyo labaatanka saac kuma daba joogi karee, ee badda gal adeer".

Waxay ahayd arrin aad u foolxun, waxay ahayd arrin laga naxo, waxay sidoo kale ahay arrin arxan daro ah oo hurgun iyo hagardaamabo leh, wiilkii jiif iyo joog ba waa daayay, jadiinkiisaas wax ka daga haba sheegin, waxa uu noqday mid noloshii ka harey wax kastena qaraarbey u noqdeen, Markuu reystay ka dib gar salaax badan waxuu hoosta ka xariiqay inuu cagta ugu jiido jidkaas meeshay rabtabo hakale dhacdee.

Haddaba anaga oona jeclayn inan isticmaalo magacyadda dadkii ay arrintaan dhex martay arrimo mustaqbalka danbe saameyn ku yeelan kara owgeed. Waxaa Akhristaha sharafta badanow kuu cadaatay in **nooca sharciyeysani** uu sababi karo nooc aan sharciyeysneyn oo ay labadu(nooc ee hore tahriibka) si kale madax banaan oo misana isla shaqeysa isku feer ordaaan. Waxaanse hubaa inaysan shaki kaaga jidhin in layn la gato, ama erayga aadka loo isticmaalo ee "Process" aysan wax badan ka duweneyn **nooca aan sharciyeysneyn,** waxaana kuu cadeyn kara rasuulkeena suuban(N.N.K.H) waa tii la weydiiyay: ummaddaada mid wax xadda ma ku jiraah, waxuu yiri Haa, waxaa la weydiiyay misana, umaddaada mid wax dilla ma ku jiraa, waxaa uu yiri haa, ugu danbeyna waxaa la weydiiyay umaddaada mid been sheega ma ku jiraa, waxuuna ku jawaabay:**Maya**.Haddaba Tahriibka nooca aan sharciyeysneyn waxaa **la haligayaa nafta** oo iyadana aan diinta sida lagu cadeeyay mamnuuc ah, midkaste waa Tahriib Nooca sharciyeysana waxaa la haligayaa nafta iyadoo been la sheegayo fara weyn, mararka qaarkoodna diinta meel looga dhaco iyadoo laga yeelo wax lagu khiyaano reer galbeed sida: guurka been beenta , inkastoo aad moodid in dadku ay ilowsanyihiin xadiiskii laga soo wariyay rasuulkana suuban(N.N.K.H) markuu yiri: saddex dhabtooduna waa dhab, dheeshooduna waa dhab. Waxaana ka mid ah saddexdaas Guurka. Adigoo maskaxda ku heynaya in diintu ay xukunto; wixii muuqda sida afcaasha ee qaluubta daalacashadooda ay tahay wax Eebbe un ku

gooni ah. Nooca aan sharciyeysnayn sidoo kale waxaa **la halaagayaa nafta** iyadoo la tahlukeynayo.

Hase ahaatee waxaan diiradda saari doonaan Cutubkaan koobaad; Nooca aan Sharciyeyesneyn. Waxaana si faahfaahsan ugu arki doonaa Cutubka Labaad ee Buugga.

ii. **Nooca aan Sharciyeysneyn** waxaadba moodaa in idaacad kaste laga dhageysto, maantana qof kaste uu ka dharagsanyahay waxa uu yahay cudurkaan cusub oo ka yimaadda waxa lagu magacaabo "Stress" ka , iyadoo aad loo isticmaalay jumladda ah "bal hadda anna aan soo tijaabsho". Waxa uuba noqday waqti-iyo-nasiib, hase ahaatee magaca cusub uu la baxay waa "waqti-iyo-nasiibkii mowdka" iyadoo ka dhigan qof looga digayo cadaabta oo misana rabba inuu gallo.

Sannaddii 2000 kaliya waxaa ay dowladda Maraykanku siisay degaan dad tiradooda lagu qiyaaaso 12,000 iyadoo la sheego in dhamaan dadkaasi ay ahaayeen Somali-bantu, sababtuna ay ahayd in dowladda Mareykanku ay siineysa tixgelin gaar ah. Meelaha la dejiyay waxay kale ahaayeen sida tan: Clarkston, Georgia iyo magaalo ku dhagan Atlanta. Haddaba waxaa aan muran ku jidhin haddiibo hal qowmiyad oo Soomaalida ka mid ah ay intaas ka tagtay walibo siyaaabo kale duwan, in aafaddu saameysay dhaamaan Soomaalida.

iii. **Nooca banaan**: Nabigeena suuban ee Maxamed ahaa(N.N.K.H) waxaa uu yiri"**Acmaashu waa niyo, ruuxkastena waxaa uu leeyahay waxuu niyoodo, ninkiiise hijradiisu ay ahaatay Ilaahay iyo Rasuulka dartiis, hijradiisu waxay ahaatay Ilaah iyo rasuulkiis. Ninkase hijradiisu ay ahaatay aduunyo, si uu u guursodo haweenay, hijradiisu waxay ahaatay waxa uu u soo haajidhay**". Halkaasna waxaa kaaga cad in dhamaan dadka haajiraaya(tahriibaya) ay arrin aduunyo, darteed u tahriibayaan, sidaas darteedna aysan diinta islaamka waxba ku lahayn. Sababta aan midaas u tilmaamayna ay tahay in diinta Islaamka aysan baneyn in loo tahriibo dal gaalo haddii la heli Karrin dal Islam ah, taas oo aad moodid iney dadku moogyihiin, halka ay ku leeyihiin dalka nabad baan ku heysanaa.Sideese haddaadan dhaqankaadda hormarrin Karrin nabad u heysataa? Sideese nabad u heysataa haddii Allahu-Akbar inaad kor u tiraahdo ay danbi tahay?. Mise waxaad u aadaysaa xoolo?

Mase ogtahay in dad iyagu xoola heystay, reero iyo hanta tira badanba ay uga soo qaxeen intaas oo dhan dhul gaalo(waa asxaabul kaafe) halka adigu aad ku qaxeysid waxaan kuu cadeyn ah, Eebbe waa tuu Quraanka Kariimka ah noogu sheegay **"Anagaa kaaga qisoon warkooda si xaq ah, waxay ahaayeen dhalinyaro rumeeyey Eebbehood, waxaana u siyaadinay hanuun. Waxaan xoojinay quluubtooda, oyna dhaheen Eebbe-hanna waa Eebaha samaawaaadka iyo dhulka, baryina mayno(caabudi mayno) Ilaah ka soo hadhay, waxaan ku haddalnay markaas**(haddii aan barrino cidaan Eebbe ahayn**) haddal xun. Kuwaasu waa qoomkanagii waxay yeesheen Eebbe ka sokow Ilaahyo, may u keenaan korkooda wax xujo cad ah, yaase ka dulmi badan ruux ku abuurtay Eebbe dushiisa been. Al-kahf(13-16)."** Nimankan waxay ahaayeen dhalin, dhalintaas oo ka soo haajirtay(tahriibtay) reerahoodii

ehelkoodii, maalkoodii iyagoo markaas kuba ladnaa, waxayna uga soo haajiraan halkaas sababta aayaadku ay inoo cadeysay oo ahayd in dadkoodii ay ahaayeen kuwo gaallo ah. Anakuna maanta waxaanba u haajidhaynaa wadamo gaallo, **sidee quraanka u waafaqeynaa?**

Sidaas daraadeed walaal waxaa halkaas kaaga muuqata in **Tahriibka nooca la ogolyahay uu yahay midka dar Eebbe oo kaliya ah**, aysana banaaneyn in loo haajiro dhul gaallo adigoo helli kara inaad dhul Muslim u hijrootid haddii kalena awrkaada boorka ka jafjafatid.

4.3.Maxaase Keena

Haddaba sababaha keena waxaannu u kale qeybineynaah labbo:

4.3.1. **Qarniyadii hore**

Waayaddii hore: maadaama tahriibku aanan ugu horeyn Soomaali ahaan, waxaa muhiim ah inaan soo fahano sababaha ugu waaweynaa ee waaayadii hore dadka ku kalifi jidhay in ay tahriibaan khaasatanTahriibayaashii cusbaa ee Qarnigii 19aaad. Sida caadada inoo ahayd inaan ka haddalno waxyaabaha ku kalifay si aan u qaadaa dhigno waxaan u baahanahay inaan wax yar aan taariikhda dib u jaleecno. Sida Eebbe bayaanshay taariikh kaste oo horeysay , cimri qaadsho ayaa ku jirta:

Sida hubaasha ah tahriibayaasha kale duwan waxay bilowdeen ka dib waqtigii Warshadeynta aduunka, oo ku caanbaxay “Gilded Age” oo marka la soomaaliyeeyo ah waqtigii dahabiga ahaa. Waqtigaas wixii ka danbeeyay waxaa hareeyay dagaal wadan wadan iyo dagaalo-sokeeye inkaste oo lagu kale duwanaa sida loogu jabay, sida looga faa’ideystay, laguna kale danbeeyay.

Haddaba yey ahaayeen qaxootiyaasha cusub maadama waqtiga aan ku gudda jirnaa markaas uu yahay qarnigii 19aad, haddaba dadkaas waqtigaas tahriibayay waxay ka kale imaanayee yurubta barri, yurubta koonfureed, Italy, Russia, Poland , Greece iyo waliba China.Ileen geel laba jir soo wadda marre aduunka qolabbo marbey dhaqaaqday, hase ahaatee waxaa ciil ah boqol sanno muddo ku dhow arrin la soo maray inaan anaku hadda mareyno, waxayse tahay su’aashu dadkaani xagee u socdeen ; jawaab: Mareykanka.



Ujeedada ugu weyn ee dhamaan dadkan kale duwan ugu soo qulqulayeen Ameerika waxay la xariirtay fursad dhaqaale. Maadama Mareykanku uu helay sare u kac dhaqaale aan horey loo arag iyadoo ay ku xigtay dagaal sokeeye, kadibna waxaa raacday in loo baahdo shaqaalo aan horey loo arag baahnaashahoodda. Hasse ahaatee u jeedooyinku waxay ahaayeen ay u soo tahriibeen guud ahaan sidan:

- **Sababo Siyaasadeed –** ummadda ka soo dhalandhoolaysay waddama Ruushka, Yukreyn, iyo Yahuudaba waxay sida caadada ah raaadinayeen qaxooti iyagoo kasoo hayaamayay dulmi diin la xariira oo kaga imaanayay wadamadey ku noolaayeen. Iyo magangalyo doono sidoo kale aan iska war heyn. Waxeyn ahayd sababta ugu weyn ee ay u soo qaxayeen wax un siyaasad la xariira.
- **Arrimo Bulsho –** fakar siiyay qaxootiyaashii kale duwanaa ee wadanka imaanayay iney go'aankooda ku dhagaanaaadaan waxuu ahaa iyadoo ay muuqatay in qofkii yimaadda, si adag uu shaqeyn karo, kadibna hanti tabcan karo noqona karro taajir dhameystiran, arimahaasna waxaa xiiso geliyay sheekooyin taariikhi ah oo kale duwanaa. Isagoo maskaxdiisa qofkaste gashtay meel aan la kale xigin oo uu dhulkiisii ka dhigan karo kuna dhiman karo.
- **Arrin Dhaqaale –** waxa ugu muhiimsan ee qaxootiyaasha cusub waxay ahayd shaqaaleysiin ama shaqo helid waana sababta ugu weyneed ee dadku u soo tahriibayeen. Walibo yurubta koonfureed iyo midda bari waxay ku silicsanayaa shaqa la'aan ballaaran iyo fursaddo xadidan. Maadama dhaqaale uu lahaa wadankaas(Maraykanka) uu koray nidaamka warshaddayntana uu circa ku shareernaa, waxaa lagama maarmaan ahayd in la hello shaqaale cusub.

1.3.1. qarniga 21aad

Ummad kaste oo caqli leh waxa ay wax ku qaataan oo ugu macquulsan waxaa ka mid ah ku cibra qaadashadda taariikhii hore, waana tiirarka ugu horeeya ee diinta suubani inna bareyso. Haddaba qeybta hore waxaan kaga soo haddalney waxyaabaha keenayay waayaddii hore ee ugu waaweynaa, ee duul keeni jirey inay ka hayaamaan wadankoodii hooyo , qaxootinna ku noqdaan mid kale.

Haddaba waxaa la yaab leh in Soomalidda taaariikhdeeda qarnigaan cusub(21aad) ay ka duwantahay midaas hore, haddaba waa inaan fahano iney wali jiri karaan dad sababahaas aan kor ku soo xusney wali u aadi kara. Laakiinse sidoo kale waa arrin wax ku ool ah inaan isla meel dhigno in dadkaas badankooddu aysan heysan jaanis labaad waayahaas, maadama anaga hadda aysan jidhin dowladda kaligeed talis ah, qof kastenna uu ku noolaan karro gobolkii la haboon, qof kastena maanta uu heli karro sida qaalibka ah waxuu cunno, haddu waxbartanna shaqeysan karo iyadoo shaqadda helitaankeedu markaste ay ku xirantahay dadnimadda qofka. Waxaana cadeyn kuugu filan sida loo kale firfircoonyahay baa aduunka mar walbe shaqo loo kale helaa, meelkastoo la joogabo.Sidaas daraadeed waxaa mamnuuc inaga noqoneysa inaan dadkaas isla meel dhigno anakoo og taariikhaha mugdiga ah ee ay waayadaas ku sugnaayeen.

Xagee ka bilowday tahriibku:

Waa taariikh dahsoon oo aan nina daboolka ka qaadin, waxaana kuu cadeyn kara inaan dhamaantayadaa aan aamisanahay in 2000 ay bilaabmatay hawshaan, hase ahaatee waxa aanan garan waa sida dadkaani ay u tageen tiradda badan wadamadda galbeedka, iyo wixii suura geliyay iney horta shaqeyn karto in la tago wadamadaas(reer galbeedka) . Si aannu daboolka uga qaadno waxaa jirtay: dad kale duwan oo waayaddi dowladdu ay shaqeynaysay jidhay dibadaha , lahaa: ganacsato, lahaa siyaasiyiin iyo saraakiil hawlo tababar u maqnaa sidoo kale dad iyagu u jidhay hawlo dalxiis, caafimaad ama waxbaraasho. Kolkaas ayaa waxaa dhacay

inay xukuumadii burburto, waxaana dhacday in dadkii qurbaha ku sugnaa ay soo daabulaan xigtadoodii, waana sida uu u bilowday **Tahriibka nooca sharciyeysan.**

Haddaba **dadka baxa maanta** ee Soomaalida ah waxay u badanyihiin da'da 18 ilaayo 35 jir, waxaana ku gaba-gabeyn karnaa haddalkeena iney dhalin u badanyihiin. Waxaase cajaa'ib noqotay cilmi baaris la sameeyay ka dib in aan ogaanay in 8 kaste oo ka mid ah 10kii qof ee tahriibta, waa sababaha ku keenay(tahriibka) ee dhabta ah, waxay ku soo gabagabowday arrin aan la fileyn. Haddaba sababaha Tahriibka ee qariga 21 aad waa sida tan soo socota ee ha u deymo la'aan:

1.3.1.2.Aqoon la'aantu ma tahlukaa?

Bulshadda inta waxqorta/aqrisa waa 37.8 boqolkiiba.Wixii ka danbeeyay waqtigii loogu magac daray qaxii, hase ahaatee aan ugu yeero qaxii kama danbeys ,ee abbaarahii 1991 ahaa waxaa la wareegay nidaamkii waxbarasho bulsho iyagu is aruursatay iyo taakuleeyaan ha'addo arimaha bulshadda kuwaas oo qeybtood dano shisheeye ay hoosta ku wataan, sidaasbaana lagu abuuray 94% iskuuladda degmooyinka kale gadisan. Waxaase aad u dhib badneyd in waxbarashadda la gaarsiiyo meelaha miyagga ah, halkaasoo ilaayo maantadan aan in yar ma ahee waxbararsho waxey tahay aan laga aqoon, halka kuwa magaaladda joogo qeyb ka mid ah aysan fahansanyn macnaha waxbarashadda, waxaanse u soo joogay iyadoo la leeyahay iskuuladda "haku dhiman, ka joog, waa xero gaalleed" oo ilmahiibo laga niyad jabinayo inay wax bartaan iyadoo aan ogsoonahay inay tahay waxbarashaddu waxa ummaddaha kale reeba si xaqiiqda ahna ummadii mar walbaa waxbarashadeedu ay sareyso ay aduunka u taliso.

Waxaase ilaayo hadda aan lagu guuleysan in waxbarashadda isku fursad loo siiyo lab iyo dhedig iyadoo waalidiinta qaarkood ka dhaadhacsantahay in gabdhaha shaqadoodu ayba tahay iney gurigga dhaqaan oo qurra sidaas daraadeedna aan wax fursad ah looba siin hablihii iney waxbarasho isku soo taagaan, in la hello waxbarasho tayaysan, in la hello manaahij mideysan, in la helo heer wax lagu cabirto ama waxa afka qalaad lagu yiraahdo **"educational Standard",** in sidoo kale la helo maammul iyo awood iyo walibo la hello dhaqaale si waxbarasho agabkeedii u dhanyahay loo helo. Haddaba waxaa jirtay tilaabooyin horumar leh oo ay ku tilaabsadeen maammuladda soomaalida qaarkood si un baahiyaha aan soo sheegnay bal wax un looga badalo, waxaa la fuliyay mashruucyo kale duwan sida: **Convention on the Rights of the Child** oo marka la soo gaabiyo loo yaqaan (CRC), **Convention othe Elimination of All Forms of Discrimination against Women**(CEDAW) iyo walibo **Early Childhod Development(ECD)**. Oo dhamaan ah barnaamijyo iyo siyaasaddo xagga waxbarashadda oo leh awood heer caalami ah, oo ka turjumeysa si un mar ilamaha xuquuqdiisa waxbarsho loo siiyo, marna si loo yareeyo noocyadda midab takoor ee dumarka ka dhanka ah, markalena Hormarrinta Ilmaha ee waqtigga hore waana qorshe loogu talagalay in waalidka iyo ilmahoodaba loogu tago xaafadahooda lana gaarsiiyo daryeelkii ay u baahnaayeen, ilmahaas aan ka hadleyno waa kuwa u dhaxeeya 0-5 sanno , waxay kaloo sameeyeen in macalimiinta la siiyo lacag dheeri ah si ay ooga soo shaqeeyaan meelaha ka baxsan magaalooyinka. Waxaa loo isticmaalay barnaamijyadaas kale duwan si un waxbarashadda heerkeeda wax un kor loogu qaado, hase ahaatee wali waa faanoole fari kama qodno oo barnaamijyadaas waa kuwa wali curdan ah. Hase ahaatee waxaan indhaha laga laaban karrin in ay isticmaaleen barnaamijyadaas maammulo dhowr ah.

Markii ay ka baxday wasaaradii waxbarashadda ee dowladii dhexe, oo masuulka ka ahayd dhamaan hawlaha waxbarasho ee wadanka sida: waxbarashadda hoose, dhexe, sare, tan

tababaradda iyo xili fasaxeedka, sidaas si la mid ah taba-barida macalimiinta iyo waxbarashadda aan Formalka ahayn. Waxaa meesha soo gallay hadda wasaaradaan liicliicaysa inkaste oo 15% dhaqaalaha wadanka loo qorsheeyo waxbarashadda iyo dhismayaasheeda. Haddana wali cabashaa cirka ku shareeran waxayna ku guul dareysteen inay sameeyaan hal shaahaado oo qura lagana isticmaalo wadanka oo idil aduunkana laga aqoonsanyahay.

Si kasteba ha ahaatee manta waxbarashadda soomaaliya waxaa la sheegay inay tahay midda ugu hooseysa marka la fiirsho aduun weynaha. Sahmin laga sameeyay xagga dugsiyadda hoose sannadadihii 1998 ilaayo 99, waxaa la ogaaday in 651 iskuul ay u diiwaan gashneyd wax ka yar 150, 000 arday, sidaas daraadeed waxaa halkaas kaaga muuqanaya in haddalka hore ee dhahaaya in waxbarashadda Soomaalidu aad u hooseyso, haddaba waxaad maskaxda ku heysaa in sidoo kale in ay hooseyso waxbarashadda soomaalida ku nool gobolodda waqooyi barri ee Kenya iyo Soomaalida killilka shanaad. Waxaana cadeyn fudud kuugu filan ineysan heysan cid u jajaban iyo agab dhamaystiran, waxaan xaqiiq ah in waxbarashadu ay tahay mid joogta heerka dhalaan nimo.Si doo kale sanaddii 2012ka ayaa qolya Addis Ababa ka wada shaqeynaynay kuwaas oo aan ahayn Soomaali itoobiyaan, waan sheekaysanay , waxaana u sheegay inaan ka immid gobolka Soomaalida. Waxaan la yaabay markii ay igu dhaheen haa laakiinse dadkaasi waa jaahiliiin, waxaan ku iri sabab: waxayna iigu jawaabeen waxba ma yaqaanaan. Tanina waxay kuu cadeynaysaa in reer Somali Killil aqoontoodu ay tahay mid aan Itoobiya ka muuqan oo macnaheedu tahay jaamacadda Jigjigga wax dhaafsan aan la heyn sidaas oo kalena dhamaan Killilka dugsiyadiisa oo dhanna ay tahay waxbarashadoodu mid hooseysa marka lala barbardhigo tan gobolladda kale.

Markii aad si dagan u eegtid qoraalka sare waxaa kuu soo baxeysa in aqoon la'aan tira badan ay jirto, waxaase aqoon la'aanta ka sii daran aqoonta sida khaldan loo fahmay, waxaana cadeyn kuugu filan in badanaa macalimiinta wax ka dhigta gudaha dalkoo dhan marka laga hadlayo ilaayo dugsiga sare aysan si cilmiyan ah u aqoon waxa ay dhigayaan ee ay minguuriyaan waxa ku qoran jaantuusyadda buugta reer galbeedka. Waana sababta keenaysa in ardaygii uu arko iney tahay meeshaani meel lagu baa'ba'ay maadama uu garanayo macalinkiisi toban sano ka hor oo wax uu kororsaday daayee maal iyo magacba uu isagu kaba sareeyo ama kaba aqoon badanyahay. Waxaa sidoo kale u muuqanaysa inay tahay 12 sanno oo khasaartay, waxaa u muuqanaysa in bal caanaha daatay dabadood la qabto oo is hami geliyo talana kusoo alooso inuu tahriibo bal si uu u taggo meel martabad dhaanta meesha uu markaas ku suganyahay.

Waxaase mar labaad cadeyn kuugu filan in waxbarashadu hooseyso, marbo haddii dadka inta wax qorta ama aqrisa ay tahay mid yar marka loo fiirsho dadka intiisa kale. Cilmi baaris ay samaysay ha'adda UNESCO waxaa ay soo bandhigtay sidatan oo ku saabsanayd dadka wax qora aqriyana sidan: Labka: 49.7%, Dhediga: 25.8%, waxaase aad cajaa'ib u ah in bulshadda guud ee wax qorta ama aqrisa ay tahay: 37.8% . waxaana halkaas kaaga muuqda in aqoontu yartahay jahliguna badanyahay mar haddiibo inta wax aqrisa qortana ay tahay 37.8 boqolkii qof ee kaste, mana ahan dhalanteed ee waa dhab .

Sideeda bilaaado ratiba ratiga ka danbeeya buu saanqeedkiisa leeyahay, waxaana wanaagsan in loo abuuro dhalinta soomaaliyeed cid ay ku daydaan oo la yaqaan, wadankana aan cagaha ka qaadin si un ay u dareen in waxa ay ceyrsanayaan ayba heli karaan iyagoo dhulkoodii hooyo jooga. Waxaase arrin laga xishooda ah in oday walbe iskuul furtay meesha la furi lahaa ugu yaraan hal mid oo qaaliba ha ahaadee si wacan wax looga barranayo, waayo marka lacagta la

isku keeno waxaa la heli karaa agabki loo baahnaa , haddii dagmadoo dhan ay isku soo koobto hal iskuul oo weyn masalan dugsi sare oo weyn, waxaa sida cad dhigan karta inta dagmadaas joogta, maadama uu yahay hal iskuul waxa bulshadda meeshaas joogta ay awood u yeelan karaan iney bixiyaan kharashaadka macalimiin tayaysan, macalimiintaas oo aan ahayn kuwa maanta macalinimadda sheegta, macalimintaas oo aan ahayn kuwa bilaa taba barka ah, macalimiintaas oo aan ahayn kuwa reer hebel shaqadda lagu siiyo, macaliintaas oo misana aan ahayn kuwa ku shaqeeya waxaysan shahaadada ka heysan. Waxaan taas oo gala jeedaa ninka taariikhda dhigaya waa inuu wataa ugu yaraan shahaada Diplomka oo ah xaga taarikhda ah, sidaas si la mid ah ninka xisaabta, carabiga, sayniska, juqaarifiga ama diinta dhigaya. Haddii kale nin ah "**UNACCADEMIC(**bilaa aqoon ah)" waxaa uu soo saarayaa "nin **UNACCADEMIC** (Bilaa aqoon ah)" ah. Tanina waxay la mid tahay qaacidda kumpiyuutarka ee **GIGO**(Qashin haddaad meel ku maal gashatid, qashin bad helin) ninkase heysta shahaadada ugu sareysa ee la qaato masalan PhD waxuu uu soo saari karaa ugu yaraan nin heysta shahaado hal darajo ka hooseysa ee Master ka. Waxaana taas kuu sii cadeyn kara waxaa jirtay xigmad ingiriisi ah oo tiraahda**"**you are as good as your teacher**"** oo micnaheedu yahay "waxaad u fiicnaan kartaa sida macalinkaada" oo macnawiyan noqonaysa haddii macalinkaadu waxyaqaan sida caadada ah qof wax yaqaan baad noqoneysaa haddii kalena taas badalkeed.

War lagu soo daabacay wargeyska caanka ah ee "theguardian.com" bishii 11 sanaddii 2010, waxaa lagu soo wariyay in marka loo fiirsho wadamadda xagga aqoonta ugu faqiirsan, in Soomaaliya ay gashay kan ugu hooseeya halkaas oo 10 boqolkiiba ilmuhu ay aadaan iskuul, halka Eratariya ay gashay kaalinta labaad. Waxaadna ogsoonaatay iney tahay sababta aan u soo qaadaneyno tusmooyinka kale duwan inaan ku tusno inaysan ahayn waxaad aqrineysid qof fakarkii ee ay tahay waxa dhabta ah oo jira.

Waxanse akhristow isweydiin lahayn dadku haddii ay waxbartaan ineysan noqon iyagu ku tahriibee ay noqdaan kuwa loo tahriibo, maadama dadka waxbarta ay noqdaan kuwa hal-abuur badan oo shaqadubba tafahooda ku jirta. Qofku marka uusan waxbarran waxaa uu dareemayaa qaawanaan u dhigmata tii dharka oo laakiinse qalbiga la xariirta, sidoo kale waxbadanna iskama dhaadhicin karo qofka loo aqriyay buug magacyo gadisan lagu sheegsheegay, sida saynis, caafimaad, cilmiga barashadda kumpiyuutarka iyo aaladaha casriga ah, haddaba qofka noocaas ahi ama noocaas wax loo baray kama duwana kuwa qalbigoodu maranyahay. Sidaas daraadeed waxaa maanta kuu cadaatay dadka-yaga badankooda inuu qalbigu maranyahay aqoon la'aan darted , haddii aqooniyan loo dhisnan lahaana inaan faraheena dhunkan lahayen. **Maadaama aqoon la'aan ay tahay iftiin la'aan, qof meel mugdi ah ah jooga dabcan jidkaa ka habaaba, jidku haduu kaa habaabana inaad bohol geshid wax laga naxo ma ahan bohoshaasna kama duwana jidka mawdku**.Waxaa kale oo haddaba maanta kuu cadatay in aqoon la'aantu ay tahay hooyadda Tahriibka.

1.3.1.2.Wadankase ka waran

Sidaad la socotid waxaan ku guda jirnaa asbaabaha keena tahriibka, waxaana qeybtii hore kaga soo haddalnay in jahligu uu yahay waxa ugu horeeya ee dalaw dadka ka tuura. Haddaba qeybtaan waxaannu uga hadli ama uga jawaabi doona kheyraad la'aanta wadanka ma tahay

waxyaalaha ugu horeeya ee keena in la tahriibo? Xageese aduunka kaga jirnaa marka laga hadlayo xaga kheyraadka cayriin? Mise waxaan nahay dad aan ku shukrin waxa Eebbe u hibeeyay?. Inta aanan falanqeyn dhamaan su'aalahaan waxaannu u baahnaaneyn inaaan dhowr waxyaalood aan midkaste wax ka ogaanno: S**ddex waxyaalood** oo ay ugu horeeyaan: **Dhulka, kheyraadka ceyriin iyo waliba kheyraadka** aan la garowsan. Haddaba waxaa lagama maarmaan ah inaad si habsami u socod ah ula socotid qeybaha kale duwan si uu haddalku kuugu dago.

Dhulka Marka laga hadlo kheyraad waxaad moodaa in dadku ay ka fiiriyaan meelo dhaadheer, hase ahaatee waxaan isku dayi doonaa inaan geeed gaaban iyo mid dheerba u fuulno bal si un ay noogu kale cadaato kheyraadka dhulkeena, waxa uu wadankeenu heystaa dhul gaaraya 637, 657 sq km, haddaba dhul in la helaa waa waxa ugu waaweynaa ee loo dagaalamayay sannadahii qarnigii 20aad. Dhulkaasi waa mid ka kooban inta dhul ka ka koobanayahay.

Waxa la yiraahdo Beer oo marka la kale qeybiyo u kale baxda **wax soo saarka dhirta** iyo **wax soo saaarka xoolaha** oo ay intaas dheertahay labadda wabi ee Jubba iyo Shabeelle, durduradda kale oo iyaguna aan meesha ka maqneyn. Haddaba waxaad moodaa inuu yahay dhulkeennu mid u leh awood inuu taageero labada nooc ee beerta loo qeybiyo midaasna waa waxyaabaha ugu horeeya ee inaga dhigaya Hoddan, hase ahaatee waxaad moodaa in midaas la dayacay dadka badankood waxaa ka dhaadhacsan iney reer magaal noqdeen, hase ahaatee waxaysan fahmin sida reer magaal loo noqdo , oo macnaha in magaalo la dago ma ahan in wixii aad heysatay aad dayacdid ee macnaheedu waa inaad waxaaad heysatay aad wax ku kordhisid ama ku hormarisid. Haddaba reer magaalnimadda aan la fahmin waxay ahayd , haddii magaaladda la soo gallo, waxa badanaaa loo baahanayahay waaa waxa la yiraahdo nidaamka "shirkaddaynta", mana ahan in cirka la fiirsho si wax loo shirkadeeyo ee waxaa loo baahanyahay waa fikrad yar, wixii aan hodanka ku ahayn inaan shirkadeyno masalan soomaaliya waxaa ka soo baxa dhirta geed miroodka ah oo aad u fara weyn, iyo walibo khudradaha kale duwan, waxaa un loo baahanyahay masalan in mooska, qaraha, saytuunka, canbaha iwm oo kale laga soo saaro cabitaano kale duwan, marka anakoona meel fog aadin ayaan waxaan heysan ka soo saari karnaa waxsoosaaro aduunka qeybihiise kale loo gudbin karo anakuna aan ku intifaaci karno.Sidaas si la mid ah xoolaha iyagana siyaabo kale duwan baa looga faa'ideysan karaa, hase ahaatee ilaayo hadda waa arrimo bilow ah waxaan ka hadleyno.

Waxaa kale oo aan meesha ka maqneyn in ay soomaaliya heysato xeebta ugu dheer Afrika oo ah 3,033km taasna ay fursad noo siinayso in qof kaste oo Soomaali ah u ku noolaan karo kaluunka naga soo galla labadda badood ee kale jaanka ah sida: Badweynta Hindiya iyo Badda cas oo marka la isku dara ka dhigaysan weynanka dhan 200nm(halkaas oo uu halkii nm u dhigma 1 bilyan oo mitir).Waxaadse akhristow maskaxda ku heysaa in bini'aadanka noloshiisuba ay isku soo wada duuboo ku salaysantahay ku noolaanshaha dhowr wax: beera qodoshadda, xoolaha iyo dhaqashadooda, kaluumeysiga badda iyo ka faa'ideysiga kheyraadka badda iyo ugu danbeyn in la shirkadeeyo waxyaabaha aan horey uga soo waramnay. Waxa kaliya ee aanan ku guuleysan waxay ahayd afarta qodob oo aan soo sheegnay kaliya mid kamid

ah oo ah nidaamka shirkadeynta. Halkaasna waxaa maanta kaaga cadaatay in dhulkeena kheyraadku ku dhamaystiranyahay.

Kheyraad ceyriin

Dhulka baaxad sooriyo banaan miiran weeyaan , ninka bug ku heystow been taadda weeyaan. Bal iminkana aan jaleecno kheyraadka ceyriin ee ku jira ama laga hello dhulkeena hooyo, iyadoo aan la soo koobi Karrin macaadiinta kale duwan waayo dhagaxa kaliya ayaa waxaa laga heli karaa noocyo tira badan , hase ahaatee waxaannu qeyb un ka taaban doonaa waxyaabaha macaadiinta ah ee aduunku u tartamo maanta siduu ku hantin lahaa, waxyaabahas oo Ilaahay inoogga dhigay sida roobka lagana heli karo wadankeena qeybihiisa kale duwan.

Kolka uu fahmo qofku waxuu heysto , waxay ku fadhiyaan iyo waxa uu ku qabsan karo, waxaa fududaata inuu ku fakaro siduu iyagga un u maaraysan lahaa, si ay taasi u dhacdo waxaan u baahnaaneynaa inaan isku deyno inaan kasoo qaadano toban ka mid ah macdanta kale duwan oo qaar kamid ah aduunyo lagu halaagi karo haddii si khaldan loo adeegsaddo. Haddaba anaga oo soo koobeyna waxay kale yihiin sidatan: **Uranium:** macdanta laga sameeyo qumbulla-durriyaha, **Iron:** macdanta birta, **tin:** macdanta birta nooca tanagyadda laga sameeyo, **gypsum:** oo ah macdanta laga sameeyo shameetooyink i.w.m , **bauxite:** hogga laga soo qoddo Alamuuniyanka, **copper:** maar**, salt:** cusbo ama milix , **gas:** gaaska dabiiciga, waxaa marka ugu danbeysa aan meesha ka maqnayn **Oil:** oo ah saliidda dabiicagi ah. Akhristaha sharafta lahow halkas waxaad ku baratay in ugu yaraan wadankeenu uu leeyahay kheyraadka ceyriin kuwoodda ugu muhiimsan adigoo og inaan kaba hadlin dhagax da kale duwan iyo fooxa ee laga hello buuraheena kale duwan. Waxaan sidaas u sameynay bal in aaad wax ka ogaatid horta waxaan heysano inta aanan falanqeyn.

kheyraadka aan la garwaaqsan

Maadaama aanan ka dhex baxayn kheyraadka kale ee uu wadanku leeyahay, waxaan jeclahay inaan wax un ka baniiniyo **kheyraadka aan la garwaaqsan,** waxaana ugu horeeya in dhulkaas aan ka soo waranay ee leh waxyaabaha kale duwan oo dhul hodan ah lagu yaqaan , baaxadda intaas le'eg leh ee aanana lasoo koobi Karrin kheyraadka ceyriin ee ku aasan, haddana ay ku noolyihiin dad tiradoodu dhantahay 10,428,043 , waxaana si cad kuu bidhaantay in aannu nahay dad tiradoodu aad u yartahay marka loo eego dhamaan wadamadda Afrika iyo walibo si fudud kuwa dariska nala ah maadaama wadanka itoobiya ay tiradda dadka ku nool tahay: 90 milyan halka keenyana ay ku noolyihiin 44 milyan, waxaana uu yahay dhulka guud ee Kenya masalan markaan la barbar dhigno soomaaliya mid ah 581,309 km^2 taas oo kuu cadeynaysa in aana ku dhulweynahay in badan, kana dad yarnahay afar jibaar. Waxaana sidoo kale kuu cad waxay toban sanno ku quutaan inaan ku qoodanayno afartan sanno. Waxaase sidoo kale aan ku soo dari karnaa in kheyraadka aan la garwaaqsan ay ugu horeeyaan inaannu nahan dhamaan Islaam, dhaman Soomaali. Ogsoonowse in qeybtiin ay arrintaan ka doodi doonto. Waxaadse maanka aadan ka saarrin in inaan noqono dhaamaan Muslim, dhul ballaaran leh iyo bulsho kooban ay tahay kheyraadka uu Rabbi (Subxaana waa Tacaalaa) nagu maneystay.

Haddaba Akhristaha sharafta lahow mar haddii aynu ogaanay, waxaan heysano oo kheyraad ah, mar haddii aynu ogaanay inaan dhibi dhulka ka jidhin, mar haddii aynu ogaanay in ilaahay nagu maneystay saddex nooc oo kheyraad kale duwan ah. Waxaa ila haboon inaan ka jawaabno

su'aalihii aan ku bayaaminay bilowgii sheekadda. Waa tan horee **ma kheyraad la'aan baa keentay inaan tahriibno?** Jawaab fudud haddii aan halkaas ka bixino oo aanba filaayo inaad jawaabta heysatid, haddii aad tahay dadka fahma oo aanba ogahay inaad wax fahantid, waxaa kuu cad ineysan jidhin balaayo laga cararo, iyo gaajo dhab ah oo wadankii taala, ee sababtu ay tahay kaliya inaan maskaxdeena ka dhaadhiciney inaysan wadanka waxba oolin markaan goonyaheena fiirinay kaliya, ee aan goloyaasheena fiirin. Haddaba haddaad qumaati u cabirtid wadanka Singapore oo ah mid si sa'id ah nooga dad yar 5milyan, noogana dal yar(760KM2) oo qiyaastii hal gobol oo soomaaliya ku yaal, oo aana laheyn wax kheyraad ah haba yaraaatee, kuna tiirsan dhaqaale ahaan iney wax dhoofiyaan iyo in waxa ay soo dhoofsadeen dib u habeeyaan, dalxiiska iyo waxbarashadda. ineysan tahriibin waligoodna tahriibin, **marka walaal aan ku weydiiyee maxaa keenay in anaga oo si kaste ugu wanaagsan wadankaas aan tahriibno?.** waxaana taas keenaya iyagoo waxbartay misana fakaray, dhulka noocaas ah GDP(wax soo saarka adeega iyo badeecadda) giisu waxaa uu ahaa sanaddii 2012 274.7Bilyan oo doolarka Maraykanka ah halka Soomaaliyana uu ahaa 5 Bilyan. Waxaa si waadax ah u muuqata marka inaan cuqdad nafsi dartiis u tahriibney, waxaa muuqata eraygii aan horey u isticmaalay oo ahaa qaneeco daradda iney halkaas ka muuqato ayna tahay sababta ugu weyn ee aan u tahriibeyno.

kheyraad la'aanta wadanka ma tahay waxyaalaha ugu horeeya ee keena in la tahriibo? Xageese aduunka kaga jirnaa marka laga hadlayo xaga kheyraadka cayriin? Mise waxaan nahay dad aan ku shukrin waxa Eebbe u hibeeyay?.

1.3.1.3.Dhibku ma khadkaa?Waalid ku xanaaq iyo macnaha nolosha masuliyadeeda

Isticmaalka Facebook(oo ah shabakadda lagu wadda sheekaysto) waxaa horey uga cabtay dad kale duwan oo aduunka ku nool marka lagu daro wiilkii Hindiga ahaa oo lahaa Akoonti cusub oo Facebook ah, halkaas oo inan kalena mid isna magac aan jidhin hawadda lagu marayo markii ay sheekaysteen muddo saddex sanno ah ugu danbeyn waxaa la garawsaday in la kulmo, waxay ahayd maalin labba doodaba farxad dheeri ah u ah, reyn reynta waxaa laga dareemayay daamankooda, hasse ahaatee waxay noqotay maalintii ugu xumeed ee noloshoodda taariikh ahaan markii cidii kulantay ay noqdeen wiil iyo gabar walaalo ah. Marka laga tago inaad dareemaysid amni daro, marka laga tago inaad dareemaysid dhaawac xaga maskaxda ah, marka laga tago inaad dareemaysid jabsasho xagga akoonkaadda ah iyo ugu danbeyn dheehasho sawiro ama qoraalo aan araga u rooneyn. Haddaba marka laga soo tago dhibaatoyinka uu guud ahaan ku hayn karo bulsho, **waxa dhibaatadda ugu weyn ahayd midda Soomaalida uu u geystay, waxayna ahayd fududeynta tahriibka**, marka uu qofkii shalay kula joogay berri soo dhigo (Post) sawiro iyo muuqaalo oo uu walibo qofku joogo meelaha ugu bilicda roon ee wadankaas. Waxay taasi ku dhalisay in dhaamaan dhalintii kale ee joogtay ay iyaguna mar un cagaha wax ka dayaan.

Waalid ku xanaaqa : Nabagiinna suuban(**N.N.K.H**) waxaa uu yiri: "**raali ahaanshaha rabigey waa raali ahaanshaha waalidka**": oo macnaheedu tahay Haddii aad rabtid inaad heshid raali ahaanshaha Eebbe waa inaad heshid marka hore kan waalidka, arrintaas dhalin badan baa ku gacan seyrtay **Maxaase dhacay?;** waxay ahayd sababaha keentay in hablo tiro badan iyo wiilal tira badanbo ay ka soo caraaraan guryahooda, maadama ay waalidkood ku kacsanaayeen inay tahriibaan markaas iyagoo ku fakaraya iney dhibkoodda reerkooda ka

fogeynayaan, Bal xaqiiqa eh dhib ka badan key kale soo cararayeen ay dib u geliyaan reerkoodii. Haddaba bal daalaco daliilka dardaarankayg hore:-

Oday ganacsato ah ayaa ku noolaa meesha la yiraahdo doolow waa uu ladnaan maansha Allaah, ganacsigiisana waa uu heystay marse haddii Eebbe waraso siiyay farxadi kama maqneyn, waxuu islaha wiilkaadii waa kan koray, isagaa reerkaba kol dhow gacan qaban doona, waxuu islahaa maanta ayaad war war iyo walbahaarba meel iska dhigtay. Intii Aabe cunigiis u qaban karay waa u qabtay. Odaygii maalin maalmaha ka mid ah waxaa uu damcay inuu bal wiilkiisa hadyad kaga farxiyo oo uu u geeyo, hase ahaatee waxay tala ku waabariisatay markuu waayay, waxuuse is yiri ma fogga oo dariska iyo inta meel oo uu geli karay ka baaarbaaray mise maleh. Waxuu ogaaday markii uu waqti ka soo wareegay in uusan wiilkiisii nabad ku maqneyn ee ama bala asiibtay ama meel uusan jeclayn uu jiro. Waxeyse indhahii cadaadeen markii uu wiilkiisii ka soo wacay Liibiya isag oo gacanta ugu jira nin la yiraahdo Cali Baaba oo aanan ogsooneyn magaca dhabta ah ee loogu yeero. Waxa uu taleefankii dhagta raac-raaciyaba mise waaba codkii wiilkiisii, intuu filan waa dartiis booday oo misana fariistay buu weydiiyay halka uu joogo? Waxaase u cadaatay in uu musiibaddii ilmaha qalan jirtay gacanta ugu jiro. Waxaa loo sheegay inuu diro lacag gaareysa **3,500 USD(doolar).** Sababta keentay midaasna ay tahay iyaddoo waayadaan danbe xawilaad la isku qaaddo oo hadhow biilka ma Gafe uu kugu soo dalacanayo. Hase ahaatee waa uu farxay ileen waa beer wax dhalaye mar haddii wiilkiisii noolyahay, waxuuna cir iyo dhulba u gallay siduu uu lacagtii ku aruurin lahaa, qeyb deymo, qeyb ganacsigaadii xaraash, waxaana dhacday in si guul ah uu lacagtii u diray. Haddaba aqristow haddaad la socotid lacagta Ma Gaffe xawaalad baa loogu diraah cidda la shaqeynaysana waa Soomaali. Waxaa uu filayay in wiilkiisii uu xoriyadiisii dib u helay oo bada haka dhacee meel u taggo wal-walka hayana mar ka daggo. Waxaaase cajaa'ib noqotay in mar labaad isla Liibiya laga soo Waco, oo tolow markaan waa qofma waxuu filayay war un si uga farxiya laakiinse waaba wiilkiisi , waxaana loo sheegay inuu lacag labaad soo diro, lama yaqaan baladda marka labaad lacagta rabta, laakiinse ileen waa beer wax dhalaye wixii kale oo maal aduun meel u yaalay buu soo xaraashay si un wiilkiisu mar un dib ugu hello xoriyadiisa. Waxaase run ah aabahaas ilaayo maanta inaan wiilkiisii la sii deyn, lacagna uma harrin, ilmana ma badbaadsan. Waa labadda dhinacba ka hoog, waxase is weydiinta leh waa: waxa u diiday tala qaadashadda dhalinta samaankaan danbe.

Maxayse tahay waxa ka badan in lagu koriyay, lagu barbaariyay, wax lagu baray, qof lagaa dhigay, hadhicin ha jabin lagu yidhih, tallooyinkii aad nolosha ugu guuleysan lahaydna lagu siiyay?? Ma waxay tahay inaad reerkaadda ugu abaal gudid inaad cagaha wax ka deydo?, Ma waxay ahayd inaad naftaad tahlukeyso?Ma waxaase la rabay inaad noloshaadda wixii laguu taray wax ku sii dartid oo aad is gacan qabatid markaad kortid? Mase waxaa la rabay inaad u abaal gudid reerkaadda si wanaagsan?Is weydiiyoo wiilkii dhibkiisa kale cararayay reerkiisa ma kale cararay dhibkii?Mise midkale buu dusha ka saaray?.

Xageese dhibku ka aloolsanyahay

Waxaa la qiyaasaa sannadkii 2010, in 10.2 boqolkiiba dadka muhaajiriinta ay ka yimaadeen Afrika sida ay sheegtay(UNDP, 2009), waxaa lagu daraan in wadamadda geeska afrika ay ahaayeen kuwa ugu badan oo tahriiba. Waxaase la yaab leh in wadammo anaga naga sii liita oo lagu tilmaamo "the porest of the poor" oo macnaheedu tahay faqiir kii ugu faqiirsanaa, wadamadaas waxaa lagu tilmaamaah SUB-SAHARAN Afrika, waxaaana si fudud oo kale lagu magacaabaa Gobolka aduunka ugu faqiirsan, haddaba waxaa cajaa'ib ah ina aysan haajidhin,

ama Tahriibin sida caadada, Halka anakoo wadamo kheyraad badan leh meeshaan Eebow waa kugu mahad dhihi lahayn aan misana cabaadeyno. Su'aal baa is weydiin mudan; Maxaa keenay in gobolka aduunka ugu faqiirsan aan laga tahriibin? Maxaase keenay inaan anaku tahriibno oo aan sii socono? Haddaba waxaa halkaas kuu muuqaneysa iney jirto qaneeco darro, imaan darro, waxaase muhiim ah inaan fahano qaneeco daradda jirta.

Qofka waxaa wanaagsan in Ilaahay waxa uu siiyo uu ku qanco qaneecadduna waa shey cajaa'ib ah, Haddaba , sidii aad la socoteyba qeybtii hore ee cinwaanka waxaannu kaga soo haddalney kheyradka Soomaaliya iyo waxyaalaha laga heli karo oo aannu hodanka ku nahay ee wadan qeyr ka yaga ah uusan nagula tartami Karrin**."Iimaan Allaa laga dhar gaaye uurka lama buuxsho"** waa haddaladda ugu waaweyn ee bini aadanku ay ka yiraahdeen in qofku waxa uu heysto uu bismileysto,

Sidaas si aan ka fogeyn jiniigaba taariikho iyo sheekooyin ka dhacay ayaa jira oo isla mawduucan la xariira; Hadda ka hor waxaa dhacday in Nin uu arkay inan aad u qurux badan, jalaqsan oo meel aan aad ooga dheerayn laafiyoonaysa, inta uu farxad isla heyn waayay oo kale bad batay ayuu garan waayay haddal meesha uu uga bilaabi lahaa, hase ahaatee waxay tallo ku waa bariisatay markii ay Salaantii ka qaaday. Waxay ahayd farxad iyo reyn reyn tii ugu weyneed noloshiisa oo waxaaba uu ku fakarayay inay inkiri doonto oo aysanba salaantaba ka radin doonin. Waxa cabaar la wada hadlaba meeshii waa laga dhaqaaqay waana la yara mushaaxay, ninkii waxaa uu ka baqay haduu maanta ka dhaqaaqo inanta ineysanba dib danbe isku heli doonin, sidaas daraadeed waxaa uu u soo bandhigtay wixii uu uurkiiso la holcaayay ee nasasho iyo neefba u diiday oo ahayd "Guur", waxeyse oola yaab badneynd markii ay ka aqbashay, haddaba sharuud baa u raacday, waxayna tidhih "Aabahay waa boqorka reerka, waxaanse anigu ahay jin, sidaas daraadeed haddaad wali ku qanacsantahay inaad I guursatid, soo waddo markhaatiyaal, intey meel yara durugsan u tilmaamteyna "halkaas iigu imow tidhih". Haddaba waa ayaa ku baryay ninkii odayga ahaa , ka dibna waxuu qaatay go'aan ah meeshay rabtabo ha kaala dhacdee ka mira dhali hawshaan ugub.

Maalintii danbe ayuu soo tabaabusheystay waxuuna u yeeray rag saaxabadiis ah, hase ahaatee waxaa uu ku xiray sharuud waxuu yiri; nimanyahow intaad ila socotaan wax bisin ah ha qabsanina, Hawraarsan inta la yiri baa hore loo dhaqaaqey, waxayn soo cabeen wadadii ay tilmaamtu ku beegneyd, in yar marka la socdayba waxaa la soo gaaray meeshii tilmaamtu ahayd meel aan ka dheerayn,waxaana ay markiibo u yimaadeen nin ceel maran wadaan ku dhaamaniya, wadaantuna waa ay marantahay meel maranna waa uu ku shubayaa, waxeyse weydiiyeen boqorkii, waxuuse u sheegay inay horey u socdaan iyagoo tii la sii yaaban bey haddana waxay arkeen nin xarig haya oo xariga weyl baa gadaal ka cuneysa, boqorkii beyse weydiiyen, waxuuna u sheegay inay horey u socdaan, cajaa'ib kale. weysi sii socdaan intay Rabbi tawakalleen, meel aan meeshii ka sii durug sanayn ayay haddana ugu yimaadeen nin ood jaraya oo marka uu qaadi waayo midkale inta uu jarro dusha kasii saaraya. Haddaba marka halkaas la marayay ayay saaxiibadiis yarka u sheegeen iney noqonayaan oo aysan u dulqaadan Karrin humaaga indhahooda waxeyna dhaheen "war nin yahow waxaannu caqli gal ma ahee Allaha Alle haduu yahay annaku meesha ay ragaani daganyhiin umma soconee bartaas bar

cidla ah baan ka baxaynaa", hase ahaatee dood iyo wax iska dhaadhicin ka dib , waxay weydiiyeen boqorkii, sidii hore oo kale buuse u sheegay, iyagoo sidii u sii socda ayay haddanna la kowsadeen nin balli weyn ag jooga oo shimbiruhu markey soo ag maraan hadba ka ceyrinaya, balse markii ay soo ag mareen ayuu buraashaddii biyaha ku qabsadday oo yiri "ilma adeerayaalow biyaha isiiya" , hase ahaate waxa maankoodu keeni waayay ninka balliga intaas le'eg jooga oo misana biyaha ku qabsanaya. Haddaba markii ay dhaafeen, ayaa show boqorku waaba daba socdaaye maantoo dhan meysan arkayn , markaasuu is tusay. Waxeyse ku xireen inta aanay arrinta gabadha u gelin in uu uga faaloodo afarta nin oo ay soo arkeen? Waxuuse ugu jawaabay in afartaba ay bini aadanka ka dhacaan. Waxuuna ugu kale macneeyay sidatan:- nink ceelka maran wadaan mar ku shubaya marna ka shubaya inuu yahay "Nin naag ma dhaleys ah qabba", ninkase xariga hayase oo weyshu gadaal ka cuneysana inuu yahay "nin naag qaba oo ilmahana uusan isagu dhalin , iyaduna ay wareegto ku keentay" sidaasna xoolihiisii iyo maalkiisii ay meel cidla ah ugu hoobanayaa, Ninkase ooda is dul saar saaraya "waa nin dilaa ah oo qof dilay, ka dibna ileen waaa dhiig ya cabe mid kalena waa dilin" waana sababta diinteena suuban ay ugu xugmineyso dil qofka qof dilla. Waana tii midaas mid la mid ah horey loo yiri macsi low mar kaliyaa u dhiman siduu is leeyahaye, qac ka sii buu is dhihin oo berina toobad keen, ugu danbeyna wey la sii fogaataa.

Middase afaraad oo ah ninka isagoo baligga heysta ku qabsanaya ragga buraashad biya ah, waa nin Ilaahay waxa uu siiyay uu ka indha saabay, oo aan arkayn nimcadda iyo barwaaqadda uu gacanta ku heysto markaas. Sidaasna waxaan ooga soo wadanay dadka iyagu tahriibaya ineysan midaas waxba ka duweyn, waayo inta kheyraad oo aan kor ku soo sheegay dhamaan iyaga oo haysta meesha ay haakah dhihi lahaayeen ayay u kabo gashteen iney hayaamaan, boor , silic, rafaad , dhimasho, nolol xumo iyo magac xumaba raadsadaan.waaanaduse waxay wax tartaa cidda qalbiga furan, dadka jecel iney wax ku cibra qaataan, sidaas daraadeed waxaan filayaa akhristaha sharafta lahow inaad tahay adigu dadka waanadda qaata, ama iyaguba dadka waaniya, waxaan kale oo aan filayaa ineysan caad kaa saarenyn inaysan jidhin sabab sax ah oo sheegaysa kheyraad la'aanta dhulkeena, waxaa sidoo kale si kal iyo lab ah kuugu cad in dhibka manta tahriibka keenayaa uu yahay kan ku xusan cutubka labaad.....

CUTUBKA-LABAAD

2. Lama-Dagaanka iyo Tayuubkii Laashka:

Ma doonayo inaan ka hadlo Addis Ababa iyo qaxooti guri ku xirashadda. Mana doonayo inaan ka hadlo khatarta u dhaxeysa laba daran mid dooro(askarta itoobiyaanku ha ku xirto, ama jidkii-Tallo xummo afka saar) .Mana doonayo inaan ka hadlo jidkii huunriga iyo dhanqalanka, jidkii dhimasho bilowgeed, jidka jabitaanka gaariga, jidka xera boholeedka, jidka bani'aadanka bahalka noqday. Mana doonayo inaan ka hadlo Kafra iyo waxa Soomaalida kale heysta iyo sida loogu noolaaddo guryaha Ajdabiya,

marka lagu daro doontii aad naakhuudaha ka noqon lahayd. Waxaanse rabaa inaan ka hadlo sida ina rag ugu jabay jidka tala xummo, Waxaan rabaa inaan ka hadlo qiyaaska xaraaradda dhiiga. Waxaan rabaa inaan soo faago boholo laga baqi jirey, waxa guntoodda hoose laga helana ka sal gaaro. Waxaa kale oo aan doonayaa inaan bayaanka ka qaado in Aakhirana loo salaad la'yahay aduunkana loo kaba la'yahay. Iyo walibo inaan idin xasuusiyo in miro kaa fog kharaar ku tilmaan keedu ay muhiim tahay.

Sida xaqiiqda ah dad la'aani wax kuma yeeshee dad xumaa ku disha waxaad moodaa inaan taariikhda iyo murtidaba aannu ka indha saabanahay, waxaase aan la iska indha tirri karin dadkii jidkaas maray iney qaarkood iminka ay mudluum oynayaan maalin iyo leyle, muskase soomay jiireen sida shey mubaashi ehe, kamayse soo mujiibeen runtaan miiska u dhigayee, ma maciisho kii wadankiisa ceeb ugu maciinaayo, xaajadaase ka maroorsanta ninkii mawqifkaa galle e , Maansha Allee wadanku wa ma hurtadeeniiye, balse waxaa la yaab ka leh waxa macdanta iyo xishoodkiyo sharafta naga meyray?

Jidka tala xumo mar waa qoys lumis, mar waa qaaraan aruuris, mar waa qiro dhac, mar waaa adigoo quud doon ah halagu qurdu-dumsado, mar waa qarsoon, marna waa qoomameyn iyo qiima dhac.

Waxaan rabaa inaan cibaaro jidkan tahriibka, si aad waadax oogu fahanto waxaadna u baahan doontaa, inaad qu' yar ula socoto qeybaha hoose:-

2.3. Xagee la sii marraa?. Maxaase ugu yar oo dhumiyaa?

"*Waqtigu waa muhiim*"Qisooyinka waxaan u waddi doonaa si habsami u socod ah, anakoo ka bilaabayna dhibaatadda ugu yar ee ku soo wajihi karta, dabadeedna ku xijin doonaa kuwa amakaaga badan. Waxaa laga yaabaa inaan ka orodno wixii aan haysanay hase ahaatee, dhibka ugu yar ee aan kale kulmi karno, jidka-Mawdka waa adigo mar labad dib u hantiya wixii aad horey u lahaan jirtay, su'aashuse waa sheekadaan sidee u dhacday?

Magacaygu waa Xasan Cabdalla Siidow, waxaan rabaa inaan idiin kaga sheekeeyo wixii aan anigu dhaayahayga saaray,waxaan rabaa inaan idiin soo gudbiyo waxkaste oo aan usoo joogay, waxaan rabaa inaan wax idinkaga sheeko sidaan u soo dhanqalmay, waxaan sidaas si lamid ah idiin soo gudbinaya aniga iyo jidka wixii nakale qabsaday ugu danbeyna waxaan ciirsi baday:-

Waxaan joogay meel aad wada garanaysaan waa Muqdisho, ninba makaankiisa wax ku heysaye anna ganacsi baan ku haystay, waxaan ahaa nin ladan si fiicanna uu ugu kale socdo, inkaste oo ay jirtay dhibaato iskana qasnayd magaaladdu haddana qasba qas waa dhaamaaye mid aad garanaysid ninka wadda waad iska ilaalin kartaa marse haddiiba aad dagaanka tahay inta lagugu xadgudbo way yartahay, **waxaase is weydiin leh malagu ma meel buu dadka ugu haraa?** Dabayshii dhalinta waday baa anna isoo qaaday, waxaan ka bulsiiyay Burco maalmaan joogay hase ahaatee waxaa ii soo baxay inaanan ku hakan karrin, ka dibna waxaan imid Hargeysa indha-indheeyayna markii iyadana wax iiga muuqan waayeen waan ka gujiyay waxaan imid Djibouti, waxba kumaanan sii nagaan tilaabadii ugu horeysayna waxay ahayd

inaan la xariiro niman mukhalisiin ah(dadka dadka tahriibiya) oo jooga gobolka Obakh ee Djibouti, nimankaas oo ku wadaya ilaayo xeebta Yaman, habeen bar baa nalasoo dhaqaajiyay anakoo ah 60 qof kadibna waxaan badda soo sabaynaba ilaayo muddo 4 saac ah waxaan imaanay Yeman xeebteeda , waa mugdi indha-fara ka gelis ah ka dibna waxaa noogu xigtay anakoo qaafilsan markii nala yiri daata, waa yaab iyo yaabbe sidii nalagula balamay sidaas miyay tolow ahayd? Marse haddii aan ku tagnay xeebtii nabad waxaa noogu xigtay markii ay nala wareegeen niman kale oo yemani ah, waa kale gadasho cusube: waa nala soo waday waxaana nala geeyay tuulo meel baadiya ah ku taal oo ay dadka ku xareystaan. Dadku waxay isugu jireen kuwa naga soo horreeyay oo Itoobiyaan iyo soomaaliba leh, kadibna Taleefanadda qaata ayaa noogu xigtay oo ninkii rabba in la fasaxo waa inuu garaacaa(wacaa) reerkiisii waana inuu miiska soo saaraa lacag 800 doolarka Maraykanka ah, haduuba uu doonayo inuu nolol ku baxo, hase ahaatee aniga meesha la igu qabsadday oo show lacagtaba la iga rabbo maba ahan meeshii lacagta la iska qaadan jidhay, ka dibna dadkii mid bixiya iyo midaan bixin bey u kale go'een. Waan is dhajiyay waxaanna u sheegay wax lacag ah inaan heyn lacagna aanan siineyn hadday cirka biya ka keenaaan,waxay marna I dilaan mar I canaantaan marna igu qeyliyaan , ileen aamuskuna marbuu kaalma yahaye intaas baan oogu maciiney. Wixii la i heystabo waxay dareemeen mid wax ka soo socdaan inaanan ahayn, waagaas mooryaanta jidka gasha aad umeysan tababarnayn maadama ay ahayd goor aysan aad u xoogeysneyn **waa sanaddii 2009.**

Laamiga iyo anigga keebaa reyn doona: marse haddii wax la iga waayay , iyagoo wali ii fara-qamuumyeysan ayay misana iska kay soo daayeen, inta indhaha la iga soo xiray baa la i geeyay meel cidla ciirsila ah. Su'aalabbo maalinbey muhiim noqdaane xagee waqooyi ah? ama koonfur? waa maalintaan is weydiiyay. Waxaan maqlay in Qaramadda midoobay (UN) la isku dhiibo kuwaas baa siiya soomalidda meel ay dagaan iyo waxay cunaanba. Hase ahaatee mar haddii aanan aqoon anigoo laamiga "liilalaw" da ku haya ayaa askari i qabatay, waxaase xigay wareysi iyo imtixaanid, waxuuse ku biya-shubtay in la i siiyo waxaan bal markaas cuno, kolse hadday tilmaan isiiyeen laamiga qaniin baa iigu xigtay. Balse waxba waxbey dhaamaane markaan tii jiho ahayd gacantaan ku soo dhigay. Jeebkayga waxaa ku jirtay 40 doolar oo xil iyo xoolaba aan ka heystay oo kasoo hartay ganacsigeygii aan soo xaraashay.**Caddan** aad baa iigu xigtaye bas baan soo raacay maadama ay iyaddu ahayd meesha Soomaalidu ku badantahay hawlaha tahriibkana lagu fududeeyo. Bas kireysigii baa iigu xigay waxuu wadada ku sii socdaba mar haddii aan baasha gashtay inaan ballo aan ka soo dhamaaday. Ileen **Nuqdaduna** dhib weeyaan waa kaantaroolkee markii la soo gaaray koontaroolka ileen meeshu ma dhawee buu yiri ka dag gaariga oo waa la i xirin ama su'aalo badan baa la i weydiin , marka dag oo markaan koontaroolka(keelaaga) dhaafo ayaan kugu sugayaa wadada meel aan sidaasbo u sii durugsanayn , marse haddii aan cagaha dhulka dhigey boorsadeydii oo tuuryo ah oo wajiga iiga dhacday iyo xuftii gaariga baanba ka war helay.**Iska soo lugee ileen koontaroolkii laftirkiisii ma dhawee.** Jaa!! jihaddaan ogaaday, ileense askartii aad ka carareysay marbaad ciirsi moodaaye waxaan soo luudaba waxaan u tagay askartii Nuqdada joogtay, marse haddii ay garteen inaan Soomaali ahay, waxaa lama filaan igu noqotay markii ay cunana isiiyeen, gaari Caddan ahna igu dareen.

Cadan iyo Soomaalida calooshu weynaatay: Anigu aakhiro iyo aduun midaan joogo makale garanayo nolosha oo dhan baa ila ah daan daan, meel alaala meel aan aado ma garanayo, meel

aan seexdo iyo meel aan wax ka cunno toono ugu yaraan dadbaa ku soo tashta oo dad meesha jooga teleefanadooda keydsadda sirtaasna waa ay i dhaaftay, yaaanse u gacan galay? Waxaa jirta soomaali meesha ku cidiyaystay oo aan shaqo kaleba lahayn iney ka beec mushtaraan soo galootiga ma ahane, cid kula haddasha iyagaa ugu horeeya, wey ku wadayaan meel aad dagto bey ku siinayaan waxaad cunto iyo inaad markii ugu horeysay qubeysatid, waase ku dalacashee hadhow waa inaad raacdaa taladooda oo ah iney kuwadaan oo tahriibka kuu fududeeyaan oo waliba kuu geeyaan niman Sacuudi ah oo iyagu waxay ku leeyihiin gunno(Commission), haddii aad diidid taasna waa Biilka bixi. Laakiinse maadama anigu aan dhibka horey u soo qaatay , wey ii cadayd inta uu dhibku sii le'ekaan karo inaan Sacuudiga gallo ama aan Yurubba ka sii gallo. Inkastoo aan ka walaacsana hase ahaatee Danni waa seetee meel kale oo loo noqdaan jidhin. Hawshuse waa is daba taal Soomaalidaas ama waxay ku keenaysaa siday ku sii wado Yemaniyaal ama Sacuudi, hase ahaatee cirifka kale ee Sacuudi Carabiya waxaa kula wareegaya niman Sacuudi ah oo iyagu safarka kuu dhameystiraya. Waxaase dhacday in **10%** dadku ay galaan inta kalena meel u dhaxeysa Sacuudiga iyo Yemen lagu daadsho ama askarta Sacuudigu ku qabato oo inta lagu xiro dabadeedna la talxiilo ama Yementuba ku qabato oo aad dib safarkaadii mar labaad u soo bilowdid adigoon jirna kugu ool lacagna kuu harrin.

Sidee loo tagaa? Hal asbuuc baa magaaladda la iga qarrinayay oo ninkii soomaaliga ahaa u xareysnaa ileen mar haddii aan magaaladda u baxo wax un baa ii suura gelin e. waxaa la isugu kaaya keenay anakoo 6 qof ah meel, ka dibna lix saac oo habeenimo baan ka gujinay; haddaba waxaad ogaataa in niman badan oo soomaali ah ay lix lixdaas sidaas oo kale iyo kabadanba u soo wadaan. Habeen iyo maalin taraag qarda jeex ah, waxaa ugu danbeyn nala geeyay tuulo la yiraahdo **Shariifiya** oo ku taala cirifka Yemen, waxaana la isugu kaaya keenay anakoo ah ilaayo 200(laba boqol) oo qof, waxaase dadkii loo kale qeybiyay ilaayo lix muhaaribiin, oo maadama ay tiraddu badantahay. Marse haddii intayadii la ina geeyay meel gaar ah, gurri deyrskiis halkaas iska seexda dhaxantubo hana garaacdee, waxaaase ka sii darnaa anakoo nala siiyo bariis Jay ah haddii uu kugu istaagana biyaha cad baad iska dajin, dhinacyaddana waardiyaal baa nalaga dhigay ninka u shaqeeya. Waxaanse aniga is helnay niman aan ehel nahay oo iyagu iga soo horreeyay hal habeen oo laakiinse la heysta alamaaga.

Diirka ka qaadkii wajigii labaad: marse haddaan helno waxaan cunno haba yaraatee, laba cishana aan ku barriney nabad ileen waxbey ahayd, waxayse arrinu xumaatay markii aan ogaanay in wiilasha muharibiintu hablaha Soomaalida habeenadii ku xigay midba mar ay la baxaan oo xoog lagu kaxeysto, inanta waxaa lagu dhihin ina keen haddiise ay is dhajiso feer iyo laad inta laga badsho ayaa rab ama ha rabine la wadanayaa. Oo xagee la geeyaa? Waxa tuuladda ku heeraarsan meelo beero beero ah halkaas oo ay ugu dhexyaalaan guryo yaryar oo looba dhistay in bilcaanta Soomalida beerka loogala baxo. Waxeyse iigu darneyd habeen habeenadii murugadda badneyd ka mid ah markii ay inan Soomaali ah oo aad u qurux badneyd, ahayd hablihii markay baalkaadda maraan boqolka geela laga bixin jidhay, ahayd gabar mustaqbal doon ah oo hamigeedu sareeyo, lagu yiri caawana waa adiga, halkaas oo ay ka dhiidhiday hase ahaatee dhag jalaq looma siin waa lagu dhagay, waxayse feer iyo laad ugu bareertay ninkii inuu kiciyo isku daya-yay hase ahaatee, nafey nin ku doonay ku waa, inantu waxba lama harrine awoodaa u run sheegtay, marse haddii la arkay iney tahay mid awood is baday ciidankii baa loo soo badshay. mar ay iska fujiso mar ay mid dhag ka qaniinto, mar fara-

laab iyo jirjir lagala daalo feerka iyo tantoomadda lagu hoobiyo, mar ay is dhahdo darbigaba taf marse laguha loo bixiyo , raggii Soomaalida oo dhana waa daawanayaan hase ahaatee lud horaa laqanya kicisee nin nimankii ka mid ah baa istaagay oo ileen wax dhiig le lama waayee oo nimankii mid ka mid ah feer iyo laad ku boobay , marse hadday arkeen in xaaladu faraha ka bixi rabto ayay shan ku dhufteen wiilkii isagoo baralaata ahna dhulka ayuu ku soo laba dhacay sidii qof joog dheer laga soo ganay, anigu meel aan marayo markaas ma garanayo waan dawaqay oo wax dhacayaba ma garanayo. Hase ahaatee inantii mar haddii laga itaal roonaaday waa la watay. Waxaase dhagahayga ku soo dhaca qeyladeedii iyo cabaadkeedii, way dagaashay oo is dufaacday waxbase kuma gaarrin, wey dagaalantay oo rag u babac dhigtay hase ahaatee booska ayaanan ahayn mid taageeraya ileen ciiduna mar bey kaa hiilisaaye ugu danbeyn tabar iyo taag kalebbo mar haddii ay wayday iney iska ilmeyso ooy cabaad cuskato wax dhaama waa la waayay. Raggiina taag dhige oo nin baa laga sheegay haddaan aamusana ariga sida laga deyn maayo haddii kalena waa Afsalax ku dhag oo haddaad aamustana habalaha sida laga deyn maayo oo habeenkaste waa mid sii qeylinaysa , haddad dagaashid waa xabad feeraha lagaaga dhufto si arxan darro ah. Waxaana taas kaaga daran haddii lagu dillo oo warkaagaba la maqlayo wax dhan bey ahaan lahayd.

Lacag bixin cusub: dhibka haba jiree haduu dhamaanayo wax bey ahaan lahayd haduu ahaan lahaa mid aan meel walba fara-gashan waxbey ahaan lahayde, ee markii xaniinyaha nalaga saaray ka dib waxaa nala amray inaan bixino lacag ah **750** doolar marba haddii aad dooneysid in Sacuudiga lagu geeyo ama aad xoriyaadaada heshid , haddii kale bartaadaas fadhi bariiska yaabiska ah ee halka goor maalintii la cunayo iyo banaan seexashadda xoriyad la'aantu dheertahay, iskaga noolow. Waxaa lacagta lagu shubayaa Sacuudiga nin Soomaali ah oo ay reeraha dadkooda la heysto la xariirayaan ninkaas oo lagu magacaabo **Cabdalle Macsaro**. Halkaas oo markaad bixisid lacagta kuwan ku haya qeybtoodda loo dirayo nimanka Sacuudiga ah ee gaariyaal Jiib u ekaha ah watana ay kaa qaadayaan xudduda Sacuudiga. Hase ahaatee taasiba waa wax dhanne waxaa dhacda dadka 80% ineysan gudbin, siyaabo kale duwan ama in Sacuudiga askartiisu ku xirato, ama in nimankaannu ay ku khiyaanaan oo ay inta ay lacagta qaataan ka dibna xudduda kugu tuuraan iyadoona aysan jidhin cid kuuba imaanaysa. Hase ahaatee iyagu waa niman caqli badan oo adoo jooga wali Yemen oo u jira Sacuudiga 3 Saac ayay kuu dhiibayaan teleefanka si aad oola haddashid reerkiinii , ka dibna dadku waxay dhahayaan waxaan joognaa Sacuudiga sidaas baana lacagta looga shubanayaa, waxaana xitaa dhacda inaysan ba kaba bixin Yeman oo meel cidla inta looga taggo ay ama dibba iskaga soo noqdaan ama ciidamadda sucuudiga ah ee xudduda ay qabtaan. Waxaadse ogaataa in marka hore bil ay ku heysanayaan nimanka hore. Anagase markii nala soo kaxeeyay oo nala geeyay xudduda maadama aan la socday qorshaha waxaan u sheegay dadkii ehelka ahaa inaan wali joogno Yeman aysanna lacagta dirin maadama nimankaani ay khiyaano wataan, muran ka dib waa la igu raacay iyaga iyo nimankii labadda ahaa ee aan ehelka ahaynbo.

Faqii iyo dhaxashiisii : Marse haddii dib naloogu soo celiyay barxadayadii, ayaa iyadoo la hurdo oo fiikhda iyo fookhda la hayo aan maqlay faq maadama aan anigu Luuqadda Carabiga ah yara aqaanay, ma seexan Karrin oo waxaan ahaa nin murugo dugaashatay. Maadama ay saddex qoloba lacag naga sugeyso ninkii markii hore ku keenay, kan Yemaniga ah iyo kan Sacuudiga, kii Soomaaliga ahaa ayaa la faqaya ninkiii Carabka ahaa markaasuu leeyahay

"*nimankaan saddexda ah lacag ma soo wadaan sidaas daraadeed aan xirno*" oo duqa tuuladda oo isna la shaqeeya nimankaan aan dhahno xir si markaas danbi aysan lahayn dusha looga saaro, oo ay ugu danbeyn ay waajib noqoto in reerahood lacagtii iyo mid ka badan ay soo diraan ileen haddii kale tiirkaa la geynayaa oo si sharci ku sheeg ah ayay u dhimanayaan ama xabsiyadda waaweyn ee wadankaa la geyn looguna taggi maayo, oo xitaa dadkaaadii inaad ku jirtid aysan war ka heyn I.W.M.

Soo rogaal celintii: kolka ay nimankaasi waramayaan waa abaarihii todobaddi(kowdii) habeenimo, marse haddii ay xaroodeen talaa igu waa bariisatay oo waxaan ogaaday haduuba waagu baryo meesha naloo wado iney tahay mid aanan ka soo sawaaqsan doonin ashadul-cimgrigeen. Sidaas daradeed nimankii aan ehelka ahayn baan hoos kale faqay waxaan u sheegay inaan laba daran mid doorano, in nimanaakaas maadama ay hadda is dhigteen maadama ay muddo bil ah meesha nagu hayeen ayna aaminsanyihiin iney na baqasho geliyeen aysan waqti badan ku dhumineyn iney na ilaaliyaan mar haduu ganjeelku xiranyahay, ee aan ka boodno darbiga, ama aan sugno waxa waagu markuu baryo aan la waabariisan doono. Marse haddii abaarihii Sideedii(labadii) danbe ay gaartay nimankii qolyahoodii bey galleen waase la dooday , oo waxaa yimid haddaan boodno ma Sacuudigaan galnaa mise dib baan u noqonaa, waxaanse tallo ku soo jeedshay in Sacuudiga aysan waxba nooga horeyn oo markiibo nala xiraayo talxiilna na sugaayo, tallo waa gorfeyne ugu danbeyn taladaydii baa la qaatay ka dib markaan u sheegay inaan qiyaas ahaan garanayo meeshii dhul jidhay luuqadana aan aqaan, intaan labada dhinacba iska fiiriney ayaan mar qura saddexdayadiiba wadda boodnay, cagahana wax ka deynay , maaanan dareemi karrin in nala daba socdo iyo in nala dareemay toona maadama ay sharqantayadu naga badneyd hase ahaatee, gadaalba ma dhugatay maad tiraahdid? Waxaan orodnaa waxaan ka soo dhamaanay oo aan ku soo dhawaanay magaalo la yiraahdo **Xaras** oo 7km jirta, marse haddaan soo gaaarney waxaa jirtay beero ka yara durugsan oo ay dadka qaarkiis guryo yar yar iskaga leeyihiin maadama uu wadanku nabad yahay. Waxaan u tagnay oday degan meel gees ah , markaan isku sheegnay iyo walibo taariikhdayada ka dib waa uu na rumeystay waxaa uu nasiiyay hoy, Khubus iyo walibo Faysuun iyo ugu danbeyn hal-hal caagad oo shablaan biya ah. waxuuna noo sheegay qaabka aan u dhaafi lahayn koontaroolka, waxuu noo sheegay inaan buurahaas dhinacyadooda marno ugu danbeyna halkaas ka sii wadanno safarkeenii. Waa subax waxay waxaas oo dhan dhacayaan, halkii baan ka sii wadanay anbaqaadkeenii waxaad ogaataa inaan u socono Cadan halkaas oo Soomaali badan joogto. Wuxuu odaygu noogu daray hadday na qabtaan askarta Xaras iney naga shakin doonaan maadaama aan rafaadsanahay nalana moodi karo askarta Xuutiyiinta ah oo ka dagaalanta inta u dhaxeysa Yemanta iyo Sacuudiga, oo nin walbe leh halkaas oo aanan kasoo sawaaqsan doonin.

Waan soo dhawaanay: waxaan qarda jeex soconaba ileen qarda jeex labba ma ahee waa dhul aadan garanayn, shimbirti buubtaba waxaan is dhahnaa waa askar, marse haddaan tilmaantii heysanay waxaan soconabo gabal gallo, mar aan meel iskaga nasano, mar haddiiba ay biyihii dhamaadeen waa un calyadaada dib u liq. Ogow meeshaan u socona waa **Xudeyda** oo markaas ah magaaladda noogu sokeysa ahna magaalo aad u weyn. Marse aan naf la caari nahay ayay noo muuqatay, magaaladii , hase ahaatee maadama uu kaantaroolka ugu sokeeya ahaa kii Saddexaad ee wadanka markaasna amaanka aad loo sugay ayna adkeyd in nala sii

daayo,waxaan maskaxdeena ka maqneyn taladii uu odaygu nasiiyay oo ahayd hareeraha mara, dhinacaas oo kale buur ka muuqata ayaan isku beegnay, waxaan soconaba ugu danbeyn iyadoo naftu nagu daba yartahay waxaan soo dhaafnay koontaroolkii balse lama gelli karo magaaladda oo waa goor danbe, waxaannu seexanay sidaas daraadeed boos goonyaha magaaladda ku yaal halkaas oo aan ku sugnay kaaha waaga maadaama dhafarta socodka iyo dhibaataba iskugu kaaya darsantay.

Balaarka Xudeyda: waa meel aan cidna kuu joogin, marse haddaan dhex marayno dadbaan waraysanay waxaan weydiiney hadday garanayaan wax Soomaali ah hase ahaatee kamaanan maqal afkooda sidaas daraadeed ugu danbeyn waxan weydiiney iney nooshageen wadada magaaladda looga baxo. Waxaana nala yiri wadada aad saarantihiin hasii deynina, qofna lifti kuma siin karo iyaduna tiradii bey ka badatay oo waa magaalo ay ku yaalaan shirkado aad u tira badan balaarkana ka qeyb qaaadanaya maadama ay goonyaha ku yaaalaan, qofkana waxaa la dhihin yaad wadaa I.W.M, laamigii baanse ciirsi ka dhiganay waxaan socod bilow hal (todobada) saac oo subaxnimo ilaayo 12(6) makhribnimo waxaan soo gaarnay Koontaroolka. Waa maalintaan bartay **"ileen dib u noqoshadduna waa dhib"**, hase ahaatee Koontaroolkaan lama dhaafi Karrin meel kaste ciidan baa yaacaya teeda kale magaaladii maadama ay dhinac kaste kaa jirto dhinac kastana askar baa kaa jirta. Mar baadse naxdin goysaaye toos baan u soo abaarnay askartii Nuqdada joogtay.

Safarkii oo idlaaday iyo Hurdadii Geerishka: Marse haddaysan jidhin meel loo noqdaa oo aannu askartii abaarnay waxaan kale kulanay yaabkooda ayay lahaayeen.Wey nasoo dhaweeyeen ka dib markaannu u waranay, cashadoodii bey qeyb naga siiyeen, wax kalese nooma awoodin oo in gaari caddan ah ay naga bixiyaan ma dhici karrin maadama laftirkooduba ay danyaraayeen.Haddaba waxaan gasiiman lahayn markaannu gasiimanay, oo dhuuntii qalalnayd qoynay, markii aan biyaha ka daba geynay ka dib, Tilmaantiina ay noogu dareen baan sidayadii wadadii ku soo dhacnay, waxaannu wali u soconaa **Cadan** ee la soco. Marse haddaan soconey muddo saddex saac ah tuulo yar oo aan hadda magaceedii xasuusan maadama aan anakoo dhanba diyow ahayn xiisa saas u bandanna aysanba kolkaas igu heyn baan gaarnay. Shaqaba waxaan ka bilownaa inaan qof un Soomaali ah raadino maanse ku guuleysan. Waxaanse farxad dareenay markii nin safareey ah uu yiri anaa idin sii qaadaya, laakiinse xaduudaha gudaha ma aysan dhib badneyn oo xitaa baaritaan saas ah ma jidhin. Balse ninku waxuu ku ekaa magaalo la yiraahdo **Musalas** oo 52km u jirta Cadan, meeshuuse ku ekaa ka dib markuu nasoo dhaafiyay tuulooyin badan oo aan soo galnay magaaladii Musalas ahayd.Wuu na dajiyay mahadcelin ka dib sidayadii baan Soomaali raadis u galnay.Waxaanse raadis badan ka dib helnay hal wiil oo Soomaali ah oo Makaanik ahaa waxaa la odhan jidhay Maxamed Cabdulaahi.Abaal lama iloobee wiiilkii markaan u tagnay garaashkayagii baan iska seexanay markaan waxna cunnay waxna cabnay. Subbaxdiina inta uu na kiciyay waxna na siiyay ayuu nagu daray gaari ah meeshaan u soconay ee **Cadan** ahayd.Waxaana halkaas kaaga muuqata in Soomaalidu ay dhaqan u tahay, wax dhiigooda galayna ay tahay in ay is caawiyaan marka laga reebo dad yar oo dhiig doorsoomay.Waxaa kale oo iyana kuu muuqatay in dadku guud ahaan ay wanaagsanyihiin laakiinse ay jiraan dad kooban oo dhabqiya wanaaga xumaantana sare-u-mariya.Waxaana u baahanahay inaan dadka noocaas ah aan gacan bir ah ku qabano.

Aniguse markii aan Cadan tagay, waxaana kale kulmay wax nin soo galooti ah magaalo kale kulmi jidhay, intaas ka dibna dadaal badan iyo sannaddo waqti ah markaan geliyay waxaan dib u bilaabay ganacsigaan Muqdisho ku lahaan jidhay mid u yara dhow, waagii danbana waxaan ku soo laabtay Itoobiya. Waxaana halkaas kaaga muuqata walaal in **waxa ugu yar ee aad ku dhumin kartid Tahriib ay tahay ay tahay waqti** oo waxaad dhowr sanno ka hor lahayd aad dib u heshid intaas oo ay kuu dheertay, hanjab, tacadiyo, daal , rafaad, tacab badan iyo usoo joogid taariikhyo indhaha laga qarsaddo.

2.4. Xaawo iyo wadiiqadda maxaa kale qabsaday(case)

Marwaa qoys lumis: waxaa laga yaaba intaad socdaalka ku jirtid inaad ku weydid kuwa aadka kuugu dhawaa oo aad muraara dilaac awgii inaad nooshahay iyo inaad dhimatay aad kale garan weydo. Marna **waa qaaraan aruuris oo**: waxaaba laga yaabaa si un aad u tahriibtid inaad dadka kuu dhowdhow iyo waliba asxaabtaadda aad lacago ku qortid mid walbe si aaad wadiiqada-silic diryo aad ugu martid. Mar kalena waa a**digoo quud dooonaya halagu qurdu-dumsaddo**: waana Xaawo iyo wadiiqadii waxa kale qabsaday. Haddaba sheekadaani waa mid aad u daran, waa mid ay wali ku taal dhafooradda Xaawo oo ah inanta qisaddu ku dhacday.

Wiil iyo inan baa is jeclaaday, marse waalidkii haduu isku diiday waxaa la qaatay in la is meher xaddo. Arrintii markii lagu ogaaday farahaa la iskaga qaaday oo waxaa la yiri meeshaad rabtaan iskale dhaca. Inantu gurri waa ku nooleyd waxbarashadeedana waa ay heli kartay sidaas oo kalena wiilkuna waa la mid. Waxeysa maqleen waa la tahriibaa? Oo xagee la tagaa? Boosaaso baa la tagaa-yoo ka dib Yemen ka dibna Sacuudiga inkastoo ay wadda dheertahay haddana khatarta maysan dareensanyn, waxaa iyaga ka sii roonaa kuwii maqlay Turkey baa la tagaa oo intii ay Gariiga u sii socdeen doontii la qalibantay halkaasna sidaas ugu alaystay. Marse haddii Boosaaso la tagay waxay u qalab qaateen siday doon u raaci lahaayeen, doontiina waa la koray halkaas oo ay afka saartay Yeman.Marse Haddii badweyn doon la buuxdhaafiyay lala koro waxa dhica kara waa wax iska cadde, doontii baa ciirciirtay waxayna noqotay laba midkood iney degto iyo in dadka qeyb la daadiyo. Halkaas ayuu argagaxi ugu horreeyay ka bilowday, waxaana kaaga daran sida arxan daradda ah ee dadka looga ganayay doonta kolka madaxa looga qabto bastoolad oo ay noqoto laba daran mid dooro.

Haddaba qolloba marbaa xeeradooda biya ugu galayeene waxaa la soo gaaray markii Xaawo iyo ninkeedii, waxaadse sidaas xisaabta ugu darsataa in inantu uur leedahay.Waxana ninkeedii loo sheegay inuu boodo, haduuse diiday maxaa dhacay? Tantoomadda iyo haraati carbeedka la is weydaarsaday ka dib **isagoo dhaawac ah oo naftuba ku daba yartahay ayaa laga tuuray doonta**. Waxay ahayd habeen aad u xumaa, habeen aad ugu darnaa inanta, waxay ahayd naxdin iyo anfariir mar haddii iyadoo arkaysa qofkii ay dunidda ugu jeclayd ee reerkeedaba ka dooratay horteeda lagu qur gooyay, waa cataabtay, oo waa ay oyday si daran, waxay ilmaddu ka dhahay tif tif tif, waxaase kaaga darneyd caloolyowga ay qabtay marka lagu daro ilmada mida gudaha ugu dhacaysay uurkeeda, waxaaba taas ka sii darnaa qalbigeedii markuu jabay oo nabar lagama kacaan ah uu haleelay.Waxaysa samayn kartaa baaba iska yaraa, waad garan kartaa adiguba dhibka ay leedahay gabar xaamila ah oo iyadoo arkaysa ninkeedi qudha laga jaray. Ileen jabku waa meertee mar wax badan la socday ayaa wareegii ku yimid inantii oo la yiri: najaasoo waaba naag uur lehe maanba tuurno maadama ay doontii biyihii si

fiican u soo galeen, lamaba sii sugine xoogaa ka dib bad weyntay ku hafanaysay. Waxaase jidhay wiil la socday markii hore, oo ogaa in ninkeeda la dilay, markaana u dulqaadan waayay in isagoo daqiiqaddo danbaba ha noqotee badbaadin kara uusan faraha ka laaban Geesinimo waa u dhalashee, wuu iska daba tuuray sida tayuub ceel lagu gannay. Ruuxii tiisii gashaa dhintee ileen meesha lagu tuuray maba ka durug sanayn xeebta, waxa uu soo garbiyaba waxay indhihii kale qaaday inantii iyado goor galab ah xeeb jiifta. Cabaarse hadday indhihii kale qaaday oo ay aragtay in ay wali nooshahay wiilkiina uu nafba dhigay oo uu agteeda meel ah gorfoonyahay. Goor meeshii la guurguuranayo ayaa ciidamadda ilaaliya xeebta(Coast Guard) u yimaadeen kadibna waxaa la geeyay Yeman. Maxaase la qabtaa magaalada iska dhex wareeg, cid wax ku siisa ma lahan, iyadii maskaxdeedu si wacan uma shaqeynayso, oo waxaa isku darsantay iyadoo qof dumar ah oo qalbi jilicsan, iyadoo jabkii la ogaa soo martay iyo ninkeedi oo mar walba u sawirma.Sidaas daraadeedna waxay noqotay "Dismoral" mid qalbi-jabsan. Meelaheedaas bey iska wareegtaa, mar meel bay wax ka soo cuntaa , mar la caayo mar ay iska oydo, waxay ku jirtay xaalad damaagsan.

Dhaliduna ma dhibbaa? : Qorsheynta qoyska waa shey wanaagsan, iyadoo Eebbe noo qoray waxaan cunni lahay, goortaa dhiman lahayn, haddaan janno galayno iyo haddii aan naar gali lahaynbo, misana dadaalku waa muhiim haddaad la yaabantahay inay muhiimtahay in ilmaha wixii ay ku noolaan lahaayeen loo diyaarsho inta aysan dhalan ka hor, oo waalid wax awoodda adigoo ah aad reer yeelatid amaba dhashid, waxaad sidoo kale la yaabtaa adigoo og meeshaad galli lahayd(janno ama cadaab) haddana sababta aad u cibaadaysatid? Maad iska dayside cibaadada ileen halkaad gelli lahayd horey baaba loo qoraye? Baryihii hore raaxeyba ku jirtaye maadama ay waxay cunto iska helaysay, meelahaas jardiimada ahna iska seexanaysay laakiinse hadda waa ay dhashay. Marse haddii la dhalo, ileen waa hooyee waxaa ku jira qalbi naxariis badane, waxaa dhacday iney is tidhih u xamaal ilmahaada wax uu cunana bal u raadi, waxay gaadhay inantii iney mar shaaqiyad noqoto mar la dillo, mar la silciyo iyo mar lagu xad gudbanna ay soo aragtay ileen waa ruux wax u dooda aan heysane, markalena dayacanne. Marse haddii ay wax ku weyday taasna ay Tuugsato, ugu danbeyna ay daris la noqoto ka ganacsiga jirka si un ilmaheeda yarka ay bogga dhulka uga qaado. Dhibkuse ma ayaduu ku ekaa, waxay noloshaas cariirga ah ku jirtaba waxaa dhacday maalin maalmaha ka mid ah iney is tidhih u qaraab tag ilmaha, waxaana dhacday markay soo noqotay filan waa iyo faruuryo qaniin marba hadday aragtay cunigeedii oo wiilbuuna ahaa oo markaas lagu xadgudbay, haduuba gabar ahan lahaa waxbay ahaan lahayde.

Ciriiri cusub iyo ceebtii oo korortay: waxaa maalintaas dhacay wixii ka danbeeyay dadkii ay bilaabeen iney ku caayaan iyadda wiilkeeda, oo ay suuqii ka mari weydo mar haddii ilmihii la socdo oo misana la ceynayo waa hooyee way ka dhiidhinaysaa, halkasna dagaal joogta ah ka geli jirtay.Marse haddii dhulkii ciriiri noqday waxay garatay in magaaladii ay ka tagto oo markaas ahayd **Casmara** maadama ay u cuntami weyday qiimana u yeelan weyday. Magaalo kale ha tagto ma xumee iyadana wax laga qabto ma lahayn iyo cid u maciinta toona sidaas daraadeedna waxay bilowday inay ganacsiyo xil leh bilowdo. **Maxaase is badalay?** Iyadoo habeen habeenadda ka mid ah taagan golaheedii oo shaqo tag ah ayaa nin u yimid, gabadhu waxay ahayd mid aad u qurux badan, laf Ilaahay siiyay, cadaana u raacday oo hablaha kale markay la taagantahay laga soo sooco, iyadoo buqcadii taagan, wareysi ka dib waxuu u sheegay

inuu siinayo fursadda waxuuna ku yiri sidatan**"waan ku guursan, ilmahaadana anaa korinaya ee I raac"**. Waxse ay ceebtii ka mayrato oo uu ninkii guri dagsaday, lana wada noolaaday, ilma cusubna uu meeshii yimid. Ayaa reerkiisii cadaadis ku keeneen, waxayna ku kalifeen inuu naagta furo, maba uusan nix-nixine horey buu amarkii ka fuliyay ilmihiina waa kale haray iyadii iyo wiilkeediina albaabkuu ka soo xirtay, waxaa uu oola dhaqmay sidii alaab uu waaguu rabayna soo gatay, waagii danbena ka xiisa dhacay(waana hubaal inankaste oo waxbadso is tiraahda in waxbeel ku dhici doono, mid walbe oo gurigooda/hoygeeda ka carartana baylahda lagu kale goosan doonee, ma uusan siin wixii ay xaq u lahayd gabar marka la guursaddo ama marka la furo adigoo og ninka sidaas samaynaya inuu Muslim sheeganayay inanta uu sidaas ku samaynaya ahayd Muslimad la dulmiyay). Dumarku waa balee haddii ay waqti badan nooleed waxbey meel dhigatay, ka dibna dib uguma noqon hawlihii ay owal si ay u noolaato ay samayn jirtay.

Maalta maxaa ka dhacay? Gabadhii waxay qorshe dajisaba waxay ka dhacday xeradda qaxootiga ee **Maalta** , dabadeedna inan iyada ku garanaysa Yeman ayay isku dhaceen ka dib markii ay wiilkeedii iyo iyadaba aflagaadaysay,waxayse mudankeeda marsiisay markay si wanaagsan gacmaha uga bogatay. Oo jabba waa ka danbeeyee mar haddii ay qof la dagaashay waa la **xiray.** Inkstoo jab iyo dhibaato ay hooy u ahayd inanta haddana markaste waxay ahayd tu ninkii arkaa uu damaaci ka gallo, waxaana dhacday markii la xiray ka dib in lagu kale-feentay xabsigii maadama ay heysteen cawaandi aan lahayn beer naxa. Waa la iska sooo daayay meelahaas bey ka yara dacweysay UNta(Qaramadda midoobay) I.W.M ah dhagse jalaq looma siin, oo waxaa la yiri waa naagtii waalneyd ee dadka la dagaali jirtay. Haddaanse weelkaadu buuxin weedhaadu i taal yaraa, waxyeeladdu ku qaban ogaa , sidaas baana ku dhacday markii mar labaad haddana la xirey oo markaan xabsi kaliya ma ahan inta darooga lagu duray uu ninkii meesha heystay iska isticmaali jidhay inta uu gurigiisa u kaxeystay. Gabadhii sidii bey ku uureysatay, iyadoo xaaladeeda maskaxeed aysan wacneyn ayaa dad la qaadayay oo markaas SWEDAN la geynayay lagu daray.

Xageese ku danbeysay: Hadday tagtay SWEDAN oo ahaa meeshii ay ku rinyoon jirtay maxaa dhacay? Wiillkeedii oo ay intaas ku dhimanaysay intaas hadba meel kale dhacaysay dartiis u tuugsatay, dartiis boholo kale duwan ugu dhacday, dartiis loo xiray marna loo jir dilay, ayaa inta uu dacweeyay yiri war naagtaan waa waalantahay lama noolaan karo, kadibna sidaas dowladdu kula wareegtay, waxaana ku soo harray kii ninka cadaanka ah uu ka dhalay oo wacalka ahaa. Marse haddii ay halkaas gaadhay waxay go'aansatay iney qabsato garyaqaan, ka dibna markii dhacdadii dib loo baaray ka dib, waxay jaanis u heshay in ilmaheedii lacago dheeri ah lagu siiyo, keedii horena aan dib loogu keenin, Hay'adaha caalamiga ahna ay magdhow siiyaan.

Waa su'aal fudude, mar haddii saddex ilmood ee ninkii carabka ahaa ay u dhashay laga qaatay? Mid wacal ah ku dhashay, Keediina ugu danbeyn ka tagay, mar haddii sharafteedii iyo cisadeedii dhimatay, mar hadday gaartay heer nolosha yaa kaa wadda ay is dhahdo, mar haddi sannado nolosheeda ka mid silic diryo tuugsi iyo qaraabasho ku soo lumisay, mar haddii ay dhumisay waqtigeeda oo ah waxa ugu muhiimsan ee nolosha qof kaste oo bini'aadan ah, Mar hadii Aakhiro iyo Adduun seeg ku dhacay. Maxay macno samaynaysaa inay SWEDAN tagtay? Maxayse macno samaynaysaa iney cayr (Welfare) qaadato? Maxayse macno samaynaysaa mar

haddii saddex ilmood ay dhashay meel ay joogaan aysan garanayn? Ma silic u dhiman baa jirra? Ileen ceeb/silic looma dhinto!! Mase waxaan nolosha ka lumin baa jira?.

2.5. Xasan iyo Warfaa xageee ku danbeeeyeen(case)

Marna waa qarsoon: mar waa qarsoon oo waxaa laga yaabaa halkii aad ku roonayd ee ehelkaadda ama dadkaaadu joogeen intaad ka tagtid oo aad cidla ciirsila tagtid , missana inaad ciirsi baddo wax ku soo celiya, waxaa laga yaabaa inaad owal xiiseynaysay yaa ku geeya meeshii magaca dheerayd, hadhowna aad habeen iyo maalin ku seexatid si aad ugu noqotid meeshii kula magac gaabneyd markii hore. In la qarsoomaa macnaheedu ma ahan oo kaliya in lagu waayo ama aad jaan iyo cirib meel aad dhigtay la sheegi karrin, balse macnayaasheeda waxaa ka mid noqon kara inaad dhimatid oo xaqiiqa-ee waad qarsoontay, waxaa kale oo iyadana ugu daran haddana adoo nool inaad qarsoontid oo meel aad ciirsatana weydo carra cidlaha aad iska mardaaduftid. Aad damacdid inaad carartid oo aad cagaha wax ka daydid haddana sidii balow laguu yeerinayo aad ku soo noqotid meeshii maalma ka hor aad ka soo jaqaafisay: haddaba sheekadaan waxaan ooga hadli doonaa qisa midaan la mid ah oo rag walaala ah ku dhacday.

Ilaahow maxaa I soo waday?Waxaa la joogay Geddo waa gobol aad u wanaagsan mar labaadna cimilo fiican, waxaase intaas oo dhan dheer in wabigi weyn ee Jubba maro, mar xoola dhaqatadiisu ay tahay mid fara weyn, waxay ahaayeen laba wiil oo walaala oo la kale dhaho Xasan iyo Faraax, waxaa weynaa Xasan waxay markay doonaan u damaashaad tagi jireen qeybaha kale duwan ee gobolka , mar ay beerahaas iska dhex mushaaxaan, mar ay baadiyaha caana u doontaan, iyo waliba mar ay magaaladooda marna dhex mushaaxaan , marna wax ka dhigtaan, waxaa lagu gabagabeyn karay inaysan jidhin wax ka maqnaa.

Waxay wadada soo cabaanba, waxay yimaadeen Addis Ababa waa caasimada Itoobiyee, waxbaba kumeysan sii nagaan oo tilaabadda ku xigtay waxay ahayd inay u tabaabusheystaan jidka mawdka iyadoo ay jireen niman mukhalasiin ah oo iyagu, kaa gudbinaya xadka, waxaadse ogaataa sida ay iskugu xiranyihiin hadda in waagaas aan la iskugu xirneyn inkaste oo waa kaste dhibkiisa lahaa, waayadaan danbana inta jidka kaala sii baxaysa ay badantahay. Waxay tageen Suudaan wax la sii socdaba, wax badanba iyaddana kama soo raagin iney tagaan Suudaan. Hase ahaatee balaaayo waa tan danbeysee, jidkii baas baa la qaaday oo abaarrihii Libya ku beegan. Waxbase yaanan sheekadda kaaga soo kale boodine, ma taqaanaa in la soo ambabaxo laftirkeedu inay wax weyn tahay?.

Waxaa la isugu yeeray dadkii habeen saqdhexe, iyagoo markii hore lagu diiwaan geliyay si dhuumasha, dhuumashaalow ah. Waxaase lagu soo qaaday gaari sida caadada ah waxaa la is geeyaa Khartuum banaankeedda, oo ah meel aad u kulul huunrigga dabeysha uu yahay mid maqaarka kaala baxaya, halkaas ayay saddex caana maal dhoobnaayeen. Sababta loo dhoobo halkaasna waa in la isku soo wadda uruuriyo dadka kale duwan oo iyagu doonaya iney wada tahriibaan.

Ninkaste qisadu meel ugu culuse, waxay xaaladdii dulqaad joogtaba, gaarigii waa dhaqaaqay isagoo usoo amba qaatay dhanka Liibya. Haba sii socdo kuleyl qalalan ileen waa lamadegaanne (saxaarihiiye), waa meel haddii u kaaga jabbo gaarigu aysan jidhin barri iyo baad toona, waa

meel haddaad ku xanuusatid aad naf kale samirteen, waana meel ninkii maraa malaayiin sanno aysan madaxiisa ka go'ayn. Haddaba mar la socday oo la marayo meel cidla ciirsila ah, meel balaayo ah buskiyo habaaskuba indhaha kaa ridayaan, meel aad moodid in bini'aadanba inuu maro aan loogu talagalin, baa yaabka yaabkiise wiilkii yaraa gaarigii ka dhacay maadama dadku ay aad u tira badnaayeeen oo gaarigu uu ahaa mid ciirciiraya siduu dhiiri ku jiro dad tartiis, Waa Warfaa wiilka dhacaye, inankii haba dhacee, Gacan buu ka jabay iyo lug iyaddana ay wax noqdeen, dhiniciisiiina uu dhulku yaalo, waxaase Xasan filayay in walaalkiisa gaariga loo istaajinayo, waxaase maskaxdiisa ka maqneyd in gaariga uu saaranyahay uu ba ahaa nooca mar istaarma oo haddii la istaajiyo galaya ciida amaba aan dhaqaaqi Karrin, sidaas daraadeedna gaarigii lamaba istaajin. Gobonimo waa u dhalashee waxa uu tallo ku goostay inuusan walaalkiis beylahda kaga tagin, wixii dhacayana haba dhaceen uu geeri iyo nololba la qeybsaddo. Tilaabadii xigtay waxay ahayd markuu gaarigii iska soo tuuray isna, isla markiina intuu booday walalkiis duudka ku xambaarsadday, ileen nin dhutinaya gaari ma gaareee halkiisii iska soo socday, waxuuse isku dayayay in shaaga gaariga uusan marna ka leexan, inkastoo ay jirto dabeyl markaba qarrineysa haddana qiyaas iyo caqli la isku daray dartood uu ku fakaray in uu is meel mariyo.

Waxay ahayd maalmo silic iyo dhanqalan badan, haffada hawadda kulul, indhahoo ku qarsooma godna kaasoo jeesta, aragood beeshid mararka qaar, ciidoo lugaha qaadata sida gaari dhiiri galay, waxuuse haadaa-dhaco, waxaasi socod lama dhahee waa naf la caariye laba maalmood iyo labadoodii habeen maruu sii socday ayuu ugu danbeyn waxuu ugu tagay meel, gaarigii oo jabbay maadaama kulaylka owgiis iyo gaarigoo duq ah ay taayiraddu iska qarxayaan. Waxuu ahaa iftiin farxad marba haduu dhibkii kaligiis uu qabay ka soo baxay, akhristaha sharafta lahow waxaad ogaataa iyadoo dhibku haduu kali ama kulli ahaan idiin heysto markaste ay dhib tahay, haddana marar waxaad gaareysaa noloshaada aad doorbidid midka wadar ahaan idiin heysta. Sidaas si lamid ah Xasan waa farxay, waxaana waajib ku ahayd qofkaste oo mar xaaladdiisa mara inuu farxo, waxay ahayd maalin uu ka nastay qof uu dhabarkiisa ku waday marna la kacaa kufayay marna uu islahaa naso , marna uu islahaa meel lagu nasto ma joogtide is dhib, marna uu lahaa maba ka tagtaa haba la yaabee!!.

Safarkuse kale kulule waxay socdaanba, hadba meel galaan marna ka baxaan, mar la is dhaho dhimateen ashahaata, mar kale oo la is dhaho kaadida cabba mar haddii ay dadka qaarkiis nafta ku daba yaraatay. 9 Berri ka dib waxaa la gaaray xadka Libya, hase ahaatee arrin midii hore ka duwan baa faraha lala gallay oo sidaad ogsoontahay waagaas ma gaffe ma jidhin, wadanka Liibiyana waa uu dhisnaa, waxaana isla markiiba helay ciidamadii Liibiyaanka ee xudduuda ilaalinayay, waxase ay filayeen waxay ahayd in la daaweeyo, la nafaqeeyo, ka dibna bal danbiyadooda lagu qaado, hase ahaatee waxbadan oo rajooyinkoodii ka mid ah maysan helin, sidaas daradeed maba ay sii fogeyn ayaamo ka dib marka xabsiga lagu tuuray. Qolaba dhibku sibuu u heystay laakiinse Xasan iyo Warfaa iyaga dhibka si ka duwan buu u heystay waayo dhibka dhibbaa u dheeraa. Waxayse ku jiraan xabsigii oo bilba bil u dhiibto, waxaa suura gal noqotay in la sii daayo. Fikirkase ku soo dhacay waxa uu ahaa maxaad sugeysaan aada **Tiriboli** oo ah caasimadda maanta ee dalka Liibiya.

Marse haddii la soo dhaafay saxaarihii aad ogeyd, waa la shukriyay, ka dibna waxaa loo janjeersaday xagaas iyo dooma fuul, sida caadiga ah waxaa jira doomo ka sameysan bac iyo

kuwa ka sameysan shaag(taayir) la buufiyay, waxaana dadku isku dayaaan iney kooxo kooxo isku sameysteen, waxadse kale oo aad ogsoonaataa ineysan doontaasu naakhuudayaal tababarran aysan lahayne ee aad adigu ka noqoneysid naakhuude. Waxaase hortaalla bad ay aad u adagtahay in nolol looga gudbaa adigoo aanan isticmaaleyn doon rasmi ah, waxaa hortaalla bad mawjadeedu aad u sareysa oo hadday rabto hal mar dhinac ba kuu tuureysa.

Waxayse ugu danbeyn galeen Talyaaniga, xoogaaba haddii la nasiyay haddiiba la siiyay nolol ka roon tii jidka, haddiiba meel ay dagaan la siiyay iyo waxay jadiinka mariyaan, waxaa ku xigtay in dib looga matajiyo oo tolow maxaa la sameeyay: waxaa laga qaaday farro, waxayna ku waabariisteen iyagoo ah sidii Alleelo wareegsan iyo Askari dhex bood booddaya, ka dib markii farahii laga qaaday. Waxayna galeen nolol aad murugo u leh, arramideeduna wadnaha ku jareyso, marba haddii la yiri Yurubta kalena ma aadi kartaan oo ileen farrahaada isla markiiba soo baxaya xitaa haddaad dhuumasho ku gashid. Sidaas ayaana noloshoodii ku danbeysay, inkaste oo la fududeysan karro qaabka ay iyagu ku yimaadeen, waxba waxbey ugu sii daranyahiine xitaa hadday heli lahaayeen jaaniska ay ku noqon lahaayeen wax dhan bay ahaan lahayd ,waxayna noqotay inay ku baroortaan **“Ilaahoow maxaa iso waday?”.**

2.6. Markii aan taag hayay tallo ma heyn.....

Marna waa qoomameyn iyo qiima dhac : mar waa qoomameyno iyo qirra dhac oo waxaa taas kuu cadeyn karra inta orrod jidhay kufidna waa jirtay, waana arrinta daqiiqaddo badashay; maluug si kale u ekaa , marka dhanka wanaaga ah laga fiirsho haddii aad rabtid inaad gashid hawl , hawshaas oo leh faa’idooyin aad u sareeya, hase ahaatee tacab badan iyo dhib badan ka sokeeyo, waxaa aan is weydiinta lahayn waa in aad labba midkood noqotid inaad ku guulleysatid ama ku guul dareysatid, haddaba kufiddi laba ma ahane waxaasi niyad jab baa la yidhaahdaaye bal u fiirso. Gabar(inan) baan iska raacnay garoowe mar aan Soomaaliya ka imaanayay, ka dibna waxaannu soo raacnay gaari gaarigaas oo ingeyr ka heystay Hargeysa, sidaas daraadeed waxaaba la socday saddex-afar qof. Oo gaarigu shidaal ahaan un u wato, balse waxaa nala socotay gabar, maananse garowsan iney tahriibeyso waayo suura gal ma ahayn inaan ogaano, waan is wareysanay sidii dhalinyaradda caadada u ahayd , haasaawe iyo haddal meel fog la iskaga ridayo iyo mararka qaarkood xaraabeysi.

Waxay xitaa nooga sheekaysay in hooyadeed ay tahay sarkaal ka tirsan Hay’adda Caafimaadka Aduunka (WHO) aabaheedna uu ahaa masuul sarre oo dowladda ka tirsan. Gabadhii maalintii

oo dhan waan soo wada soconay labbadii nin ee gaariga watay ayay is fahmeen waxayna ahaayeen kuwa iyagu kax-kaxeeya oo markaas xitaa cunadeeda qaabila, ileen naftu waxay jeceshahay ilaashataaye. Waxay ahayd ilaayo 19 jir ah markaan qiyaaso, waxay ahayd mid labeentu ay dhabanadeeda ka muuqato, aanana laga dareemi Karrin in ay habeen qadday, waxay ahayd inan ninkii ay garab istaagtaa uu gacaltooyo jaceyl goconayo, waxay ahayd bilcaan quruxdeeda lagu masaalo hablihii qurusheed qoomkii fardowseed. Yaanan waxba war kugu daaline waxaannu soo galnay ugu danbeyn magaaladda Hargeysa. Marse haddii la dagay is weydiintu waa waxa dhacaye?, anaku Huteel ayaa nala geeyay maadama aanan magaalada waxba ka aqoon, inkaste oo uu ahaa meel nin weyni ku nasan karro, hase ahaatee gabadhii fursad ka fiican bey heshay oo inamaddii gaariga watay baa ku yidhih anagaaba ku geynayna Huteel roon . oo markaas aan ka ag fogeyn kaan anaku dagnay. Dad-qal looma gurguurtee waxaa dhacday in inantii ay warkaas aad oogu riyaaqday isna tidhih Quruxi waa isha qiimana waa ayaankaadee, marba haddii aad heshay Inamo kuu fududeynaya hawlahaadda oo dhan, labadada gacmood midba mar baa la barkadaaye , maadba jid markaadana dhigatid, tan kalena(nimankan ku caawinaya xoolahay ku siinayaana) ku sii meel gaartid.

Nin indha la' mid kale oo indha la' oon waxba arkaynin Ileen oodda kama leexiyoo ilin ma aadsiiyee, waxay ahaayeen nimankii inanta hadba meel u dhaqaajinayay, marba kan isku day , markana kaas dhahaayay, in waxa ugu weyn ee ay doonayeen ay ahayd siday ku hanan lahaayeen qalbiga bilcaanta yar, waxayna taas u suura gashay maalintii ay shaahii hore ka ogalaatay. Waxay ahayd inan yar oo ha dhicin ha jabin lagu hayay maysan dareensaneen khatarta iyo khiyaamadda ku dhaheen ama ka horeysa kuna heeraarsan jidka Talla Xumo, jidkaas oo aan markale oogu yeero Wadiiqadii Mawdka.Waxaa ka maqnayd in ay jiraan bahalo suuqa yaacaya oo hablaha yaryar beerka kale baxa, hadday jiif ku waayaan soo jeedka hawshoodda ku qabsadda.

Waan iska seexanay mar haddii aan taraag dheer soo galnay, marse haduu waagii baryay waxaannu is dhahnay bal dhankaas iyo inantii meeshay naga jirtay u sii jaqaafsadda maadama an isku meel u soconay, si un aan safarka iskula sii darsano mar haddii aan is dabeecad fahanay. Hase ahaatee waxaannu la kulanay waxay ahayd kaaf iyo kale dheeri, waxaan ka soo tagnay gabar faraxsan, waxaana u tagnay gabar ilmadu ay daamankeedda qulquleyso, waxaan ka soo tagnay gabar rajo leh, waxaana u tagnay gabar rajo dhigtay, waxaan ka tagnay gabar qurux badan oo taagan, waxaanse u tagnay gabar nololba aan rajo ka lahayn, waxaan u tagnay gabar mooraal jabtay caysh aduunna inay cunto aan xiisa u heyn. Intaas oo dhan waxay dhacday ka dib markii ay labadii nin inantii mar haddii ay Huteel ay garanayaan geysteen, ay sidii ay doonayeen ka yeeleen. Kolay anaku sida wax u dhaceen maanan fahmi karrin waayo ilinteedda ayaa saa'id ahayd qofka su'aal weydiiyaa markaas waxaaba uu ahaa mid inkaaran, hase ahaatee waxaan gadaal ka ogaanay in inanta labadii nin ay fara-xumeeyeen, kufsadeen, mustaqbalkii, yidiiiladdii ay islahayd yurub la tag iyadoona dalkiiba soo dhaafin ay dib iskugu noqdeen.Waxayna ugu danbeyn ku afmeeratay sheekadii in inantii ileen Danni waa Seetee, magaaladeedii dib ugu noqoto.Marba haduusan jidhin qalbigii iyo waliba rabitaankii.Waxaadse qarsatid waa ku qarsadaanne iney go'aanadda noocaas ah qaadato maxaa ku kalifay? Maxayse ahayd waxa dheeriga ah oo ay raadineysay? Gabarse ma gurigeeda meel aan ahayn bay sharaf ku leedahay? Mase isu dhigmaan waxay raadineysay iyo waxay la kulantay?Markale ma isku dhigmeen waxay raadineysay iyo waxay lumisay?Waxaad moodaa aqristaha sharafta lahow ineysan muhiimad ballaaran keenayn inaan kaaga jawaabo su'aalahaas, waxaan aaminsanahay sida ugu saxsan inaad ooga jawaabi kartid, waxaa kale oo aan aaminsanahay inaysan khatarta tahriibku ka bilaabin xududaha Itoobiya,Sudan iyo Liibiya

ama Soomaaliya iyo Yemen ilaayo Sacuudiga, ee khatartu ay ka bilaabmato maalinta go'aankaas aad qaadatid, sidaas si la mid ah aad adiga iyo jidku waxaad kale heshaan leedihiin.

Walaalkeyga/shayda Islaamka ahow, ma waadan xasuusan aayaadka Eebbe(S.W) ee uu inoogu sheegayo sidatan: "**waxaan idiin keenay kitaab, kitaabkaas oo dhexdiisa ay ku sugantahay sharaftiina, ee miyiinan caqli lahayn?"**.Marse haddii aad sharaftii Eebbe ku siiyay aad ku gacan seyrto, doonatid dhib kaa maqan. Haddii aad kitaabkaada ku dhowrsatid waxa uu ku leeyahayna raacdid ma sharafbaa kaa xumaan lahayd? Haddaadse garab martay in Eebana sharaftaas ku garab mariyo ma la yaab baa? Waxaan maqli jidhay "Faruurow maxaa Berbera ku geeyay?" Suu yiri "Faduul", waa Sidaase dibnaheeda ayaan ka fasirtay waxay ugu danbeyn ku cataabsay **"markii aan taag hayay tallo ma heyn, haatan oon talla hayana taag ma hayo".**

2.7. Waxa aadan ka ogeyn....

Dalalka Afrikadda Koonfurreed

Waxaa jira waddama loo tahriibo oo haddana aan dadka ulla muuqan tahriib, oo aad moodid dhamaan bulshaddu qaafil ka yihiin, wadamadaasna wali loo tahriibo, tahayna in la fahmo in ay dhibaataddooda leeyahay in jidkaas soomaali badan oo lab iyo dhadigba leh toodii ku gashay. Waxay sidaas si la mid ah ahayd iyadana abaarihii sanaddii 2012 markii aan maqalnay dardar xagga u tahriibidda wadamadda Afrikadda Koonfurreed. Iyadda oo aysan suura gal ahayn inaan dhib walbe tusmeeyno haddana bal aan wax yar idiin kaga sheego in sannad walba ay jiraan dhalin tira badan oo xeebaha Musaambiig(Mozmbique) ku qulqulaya kuwaas oo iyana raja ka leh iney galaan wadanka Koonfur Afrika ee erayga qalaad lagu yiraahdo(South Africa), mar ay gabar jabka u joogtay ka waramaysay waxay sheegtay in dooni lagu saaro dad tiro badan, ka dib hadba qollo laga tuuro oo doonyaha qaarkood waxyar ka nabad gallaan.

Mar uu mid ka mid ah **dhibanaayasha** ka sheekaynayay sida loola dhaqmo isagoo u waramaya idaacadda **Ergo** waxaa uu yiri: "*waxay na yiraahdeen waxaannu idin tusinaynaa wadada dooni yar oo ay wateen ayay wabiga xagiisa kale nagaga tallaabiyeen,laba wiil iyo gabar oo saddexduba isku qoys ahaa kana mid ahaa Soomaalidii aan isla soconay ayay ula baxeen dhinaca bannaanka, wiilashii wey garaaceen,gabadhiina siday ugu faystaynayeen ayay dileen markii dambe*"

"*Xilli habeen ah ayaan soo gaarnay xeebaha waddanka Mozambique waxa dib noo celiyay ciidamada illaalada xeebaha ee dalka Mozambique, kadibna mar kale ayaan soo laabanay waxaan soo marnay meel cidla ah jidka ayaa waxaa noo galay 5 nin oo hubeysan waxaannu ahayn shan gabdhood oo Soomaali ah baaritaan ka dib aniga iyo*

gabar kale waan baxsanay duurka ayaana sidii ku galnay saddexdii gabdhood ee kalena waxaa loo geystay tacadiyo ka dhan ah bini'aadantinimada" .**Inantii ayaa** intaasi ku dartay in ay hawd ku jireen saddex maalmood waxaan gaarnay xerada qaxootiga ee **Balma**, ayay tirri waxaa halkaasi nagu soo dhaweeyay hay,adda qaxootiga aduunka ee UNHCR, gabdhihii la kufsadayna waxaa taqtar ku yaaala magaalada **Numpula** geeyay Soomaalida joogta Mozambique

Xubintii muhiim ahaydey kaalay

Intii aan badaha haab haabaayay, taariikhooyinka kale duwan ee dhaca aan hadba mid ikhtiraacayay, ha ku dhacaan dadka ila joogaa markaas ama kuwa iga dheer, waxaa ii soo baxday qiso aad cajaa'ib u ahayd, marse aan lagu farxin , waa **documentary**(bandhigid dhacdo) la sameeyay oo ka turjumay wareysi dhab ahna la sameynaya cidkaste oo ay muhiimtahay si loo hello xog la isku halayn karo , waxaa uu ku baxayay Afka-Ingiriisiga ah ,hase ahaatee gadaal ayaa ayaa waxaa Af-Soomaaliyeeyay **Daldoon.com** oo kaga faalood barnaamij ay oola magac dareen **Waqti**. sida aannu horey idiinkaga balanqaadney ma naqon doono Buuggaan mid hal meel diiradda saara, waxa ugu muhiimsan ee uu yahay haddafkayaguna waa inaan kuu tusmeyno kuna tusno xaqiiqda jirta, ma kaa dhigayno mid naxa, ee waxaan ku tusaynaa wax kaa naxiya, ma kaa dhigayno mid wax la fahansiiyo, waxaanse ku tuseynaah fursadii aad wax ku fahmi lahayd, ugu danbeyna kaama dhigeyno mid falkaas ka waan tooba, waxaanse ku tusineynaa tusaalayaal cibra qaadasho kuugu filan. Haddaba bal cibaaradaanna illa daya.

Waan socon weynaye aan orrodno baa igula yaab badneyd haddal aan maqlo, waxaana soo xasuusta markii aan arkay sahankii hore oo kala jabay halaag iyo hoog ku dhacay, sahankaas oo socod ku dhaafi waayay soohdintii xirneyd ee ballo u galka, oo misana sahanka labaad uu isku dayayo inuu orrodba ku dhaafo waxa sahankii hore socod ku dhaafi waayay. Waxaa halkaas iiga muuqatay saddexdii nin ee maska iskaga tilaabsaday; saddexdaas saddex ka yara duwan oo iyana iskaga tilaabsadday jilbis laakiinse waxay saddexdaas hore kaga roonaayeen ninkaste ninka kale waa u digay, oo misana indha adayg iyo madax adkaan oo macangaggu ugu horeeyo ay sidii waagaan ciyaalka ahayn intey indha-la'i-dhaga-la'I ciyaaraan uuna mid walbe isla jilbiskii looga digayay bartuu yaalay cagta saaray, ragaas oo aan ninna ka soo noqon mid uu waayihisa iyo waqtigiisu wax ka dhimanaa mooyee. Haddaba waxaan ooga hadli doonaa qeybaheeda danbe rag taariikhdaas mid la mid ah soo martay oo misanna aan dhag jalaq u siin iyo halka ay ku danbeeyeen.

Waxaan is weydiin lahayn in lama degaanka Suudaan uu yahay meel aad u xun, waxaa kale oo aan iyana is weydiin lahayn in nin maray wadiiqadaas uusan amaaneyn. waa meel aad u xun waxaana kuugu filan inuu daranyahay magaceeddu oo ah Lamadegaan(baad iyo biyo toona lahayn), hagardaamadda waxaaba kasii daran haba dhib badnaatee haddii dhib inta loo samro wanaag ka danbeynayo uu ahaan lahaa wax un bey ahaan lahayd, balse waa hubaal in ilmadu bala-laq kaa aroneyso, oo aad gowsaha qaniineysaa mar haddii aad farraha la gashid baababka noocaas ah. Ilmadunna marbey ciirsi noqotaaye waxaa laga yaabaa inaad iskaga cabaadid: ninkii dhiiranaan jidhay waqtigaa dhantaallee, mar haddii aad itaalkaa, dhudhin iyo lixaadkii wax ku dheefi weydo , waxaaba laga yaabaa in daalkii, dhanqalankii, garaacii iyo waliba dilkii

aad dhahdid" *yaa Eebow mar un dib kuugu celiya*" markaad maqashid in tashi loogu jiro feenasha jirkaadda. **Haddaba arrinni see u dhacday? Markii la weydiiyay Dhakhaatiirta hawshaan gashay midkood, waxa dhaca; waxa uu ku sifeeyay in xubnaha aadanaha lala baxo marka la joogo Liibiya.**

"*Haa, haa oo Haa wey ka darantahay xitaa adoonsi kana qaraar , haddiid aad qof ugu sheekayso markiibo waxaa uu ku oranayaa waad kaftamaysaa oo malaha run ma sheegaysid, Haa waa run oo anigu waxaan leeyahay waqtigan hadda dadka qaar iyo cid kaleba sidaas samaysay. Waa arrin aad u xun oo qof walbe la yaabayo laakiin xasaasi waxaan u hayaa cadeyn*



*Sawiro muujinaya in arrin kani dhacay oo dad lagala baxay xubanahoodii, taas oo ay muujineyso in uurku jirtoodda la jeexay oo dib loo tolay***"**. Sidase kuu muuqata waxaa waxuushnima iyo fal la nacladdana ah in qof bini aadan ah oo nool lagala baxo qeybaha kale duwan ee jirkiisa ugu muhiimsan ee Eebbe ku hibeystay qof walbe, qofna maan kiisa ma galayso in la kale qeybsaddo sidii habar dugaag mararka qaarkoodna la iskuba dagaalamo, lagu baayactamo xitaa mararka qaarkood isagoo nool waana waxyaabaha qof bini'aadan ah ugu adag ee inta ay naf ku jirto uu xamili karo.



Sida caadiga ah waligeed lama waayo caado qaate, kaas oo ah khaa'in ka furtay dalkis, dadkiisa iyo walibo diintiisa, waxaana sidaas si la mid ah jira caada qaatayaal sidii kuwii aan siyaasadda ku naqaanay oo dhakhaatiir isku sheeg, dhakhaatiirtaas oo wax u soo baratay inay umad masaakin ah kala baxaan xubnaha jirkoodda, dhakhaatiirtaas oo sidaa si lamid ah wax u soo baratay inay gumaadan ummad dowlad u dooda, garsoorayaal caalami ah iyo waliba cid ka danqata aan lahayn, umaddaas oo ay baylah ka arkoodeen. Yaan waxba war kugu daalline waxaa kale oo uu dhakhtarku cadeeyay meelaha ay ka imaanayaan dhakhaatiirta kale duwan ee iyagu ah kuwa uu ku tilmaamay kotorobaan inay yihiin iyo walibo qaabka ay u soo galaan.



Dhakhtarka ayaa dooranaya xubnaha uu u baahanyahay(badanaa xubnaha lagala baxo waa kalyaha, beerka iyo waliba xubanaha kale ee muhiimka ah), ka dib markay qaataan waxkaste

oo ay doonayaan maxaa dhaca?, Marse hadday ka faaruqaan maydka waxay ku xooraan lama degaanka.

Waa dhakhtar ku takhasusay baarista maydka iyo dilka, waa dhakhtar **Faqri Saalax** oo ahaa madaxii hore ee waaxda baaridda dilka iyo maydka, waxaana uu leeyahay khibrad dheer oo ku saabsan iibgeynta xubnaha jirka. waxaa uu yiri tolmaha ku yaala jirka sawiradda aan sitay waxay muujinayaan, in dadkaan lagala baxay xubanahoodii oo ay ka dibna sidaas ku dhinteen. Waxaa kale oo uu sheegay in ay muujinayaa tolmaha jirka iyo qoloftuba in inta badan la qalay oo loo jeeday in xubnaha uur ku jirta ee jirka gudahiisa lagala baxo ay ahayd ujeedadu, halka qofkaan sawirkaan sarre laga talloy waa halka marka la gaarayo beerka iyo kelyaha. Taasna waxay keenaysaa inuu qofku saacaddo dibadeed geeridu ku soo xaadirto. Way ku suuxinayaan dabeedna ku qalayaan, Maafiyadu waxba kama gelin haddii aad dhimatid iyo haddaad noolaatidba midna, sababaha ay kuu siinayaa suuxisadda waa in ay ka hortagaan inaad dagaalantid/oydid si ay iskaga ilaaliyaan in waxyeelo gaarto xubnaha iwm.



Waxaa aan shaki ku jidhin haddii aad sheekooyinkan kala duwan aad dhagta u raaricineysay in saacadaas aad yaab iyo dhafoorra qabsi aad ku jirtid, waxaase taas ka sii daran in dadka mararka qaarkood toos loo gumaaddo, oo nafeey nin ku doonay kuwaaye marka shanta fagax la dhaho, oo aad is dhahdid bal carar ileen qof nool ma tihidde oonkii iyo daalkii ku hayay dartood iyaguna waa cadow e, ee aad cagba gedin weydo, waa waxyaalaha ugu naxdinta badan ee tahriibayaal badan oo soomaali ah lagu laayay, inkalena lagu leyn rabo , in hadda soo socotanna hadeysan cagta meel dhigin lagu leyn doono.Waxay noqotay ganacsi lagu rabixo sida ugu dhaqsiyaha badan, ganacsi cirka isku shareeray kaas oo aan kaaga baahneyn lacag badan inaad geliso, ganacsigaas oo xaqiiq ahaan noqon lahaa kan ugu adag ee la sameeyo oo misana noqday kan ugu fudud ee baryahaan danbe la sameeyo.W**aa ragga xaduuda liibiya jooga waxa sidaas wax u galayee.**halkaas oo ay marayso xabadda kalidda ah in kabadan 20,000 oo Doolarka Maraykanka ah, halka beer iyo wadnahuna ay yihiin kuwo iyagu intaas ka

sii qaalisan. Qofkii bahaladdaan ay gacan ku helaan waxaa u danbeynaysa sidaatan:



Saalax waa khabiir ku takhsasusay shaqooyinka iibinta daraagiska waana oday qabiileed xukuma qabiil ka mid ah qabiiladda iyagu dadka kale baxa xubnaha oo ka beec mushtarah, waxaa fursad loo helay in la wareysto ka dib marka uu soo liqay **sided sanno** oo xabis ah, waxaana la weydiyay waa maxay ujeedada, iyo sababta dadkaan loo furfuranayo sida qalabka iyo waxuu ka ogyahay?



Waxaana uu yiri: " *Dadkaan Afrikaanka ah ee aad arkayso iyagaan dad jira aan ahayn, waxay meel walbe la wareegayaan in wax Allaala wixii ay heli karaan iibiyaan, marka haddaad maqashaan in beerka iyo kalyaha lagala baxo iyaga ayaa iibiya si ay lacag u helaan. Annaku waannu qabanaa weyna jirtaa dad aannu heyno, waanse celinaa oo dalalkood ayaan ku celinaa , ammuurahaan waa wax jira waa wax caadi ah dee, wax saa u weyn ma ahan, ma ahan aduunku iney u arkaan, kuwa waxaa jira wax galla oo deyma galla, kuwaasna intey eheladoodu lacagta ka soo bixinayaan maa ahan iney iyagu lacagta heystaan, waannu heynaa. Markaa arrimahaani ma ahan kuwa jira marka xaqiiqda laga hadlo*".

Dad la la'yahay

Waxay ahaayeen laba wiil iyo saddex gabdhood maalintii go'aankii tallo-xumo ay soo qaateen, waxay joogeen meel nabad ah, nabadbaana naas la nuugo leh, mar haddii bowdkaad joogtid aad ku nabad qabtid, waxaad halkaas ku dajisana aad heysatid, hoy aad gashana aadba heysatid, waxaad raadisaa waa dheeri. Laakiinse waxay ilowsanaayeen in wax badso wax beel leedahay. Waxay ku sugnaayeen magaalo la yiraahdo Burco oo u ah caasimad gobolka Togdheer, waxay ahaayeen ardo wax barrata, reerahooduna iskaba ladnaayeen naashnaash koodana hela, hase ahaatee waa tii la yiri marka malag dhawaaqaayo midaani dhaga malahee, bal sidee wax u dhaceen?

Tabar iyo taag wixii la heli karay baa la soo qaatay oo jiscin ahaa, iyadoo meelo ad adag lagu qarsaday wixii lacag Doolar ahayd, iyadoo badanaaba buumaha/nigiska/ama Cali falaaxa hoostiisa lagu tosho, si xitaa haddaad buurqaafna aad ka dhacdid uusan jin iyo insaba u arag, hase ahaatee waxay filayeen baa koobnaa. Waxaa dhacday iney Itoobiya yimaadeen, waxaase ka maqneyd khibraddo tira badan oo marka la tahriibayo la raaco, waxay ahaayen iyagu kuwa is wadda maadama hablaha middood ay taqaanay afka Axmaariga ee looga hadlo Itoobiya inteeda badan, waxayse wax soo qarda jeexaan, waxay musiibada afka la galeen markii ay tageen xuduuda itoobiya iyo Suudan, waxayse anbadeen markii ay afka saareen tii u dhaxeysay itoobiya iyo Eratariya inkaste oo ay isku khilaafsanayeen in wadadu khaldantahay hase ahaatee wixii kuu qorran kun saneey kaa weynyihiine waxaa lagu qabtay Xuduuda Eratariya, kadib markay liqeen afar bilood oo xabsi ah, waa la sii daayay , dabadeedna wey soo dhaqaajiyeen iyagoo ku fakaraya iney ka talaabaan xadka Suudaan hase ahaatee maadama dagaalo uu ka dhaxeeyay labada dal waa Itoobiya iyo Eratariyee, waxaa dhacday in intey jidka ku sii jireen ay labadii wiil kii roonaa la kacday miino oo ah nooca lagu aaso dhulka. Yaabka yaabkiise wiilkii waxaa u kale go'ay laba gobal, wax lagu sameeyo waa la garan waayay labbo qaar oo kala go'an misana kii hore oo misana naftii wali ku jirto kuuna ishaaraya inaadan ka tegin, hase ahaatee Danni waa seetee waxay tala ku goosteeen inay ka dhaqaajiyaan.

In badan ma moogneyn marka iyana musiibo taas la mid ah ay ku dhacday ka dib markay u gacan galleen qollo cawaandi oo Suudaanta dagan. Waxayse sameeyeen tii ugala yaabka badneyd markii ay wiilkii iyo gabar gabdhaha ka mid ahayd ay hal meel ku xirreen. Waa su'aal is weydiin lehee labbadii gabdhood oo kale xagee lala aaday. Waxaa lagu sameeyay tacadiyadii ugu darnaa ee ka dhanka ahaa bini'aadantinimadda ka dib markii labbadii hablood la soo fara xumeeyay ka dibna laga soo jaray naasaha. Waxaase wiilkii iyo inantii xabsigga ku jidhay waagu ku baryay markii lala soo geliyay labadii hablood ee aad ka u nuurayay ahaa curdan, ahaa gashaantiyo laga dhiibo geel boqol midu ka maqnayn , ka dib markii lagaba jaray waxyaabaha ugu qaalisan ee dumarku ragga kaga duwanyihiin iyadoo ay intaas u dheerayd in si kaste loo fara xumeeyay. Waxyar baa ka soo wareegtay markii labadii hablood midood oo xamili weyday dhibaatadda aduunyadda ay naftu ka haaday. Waxaa halkaas ku soo haray wiilkii iyo labadii gabdhood ee kale. Marse haddii galinba ,galin u dhiibay, maalinba maalin, Fursaddi iskuma kaa sheegtee wiilkii waxuu arkay ineysan tallo ahayn inuu sugo maalintii isna la qalan lahaa mar haddii hablahaan lagu sii jeedo ay dhamaadaan. Waxaana u banaanaatay fursad galab casar ah oo isagoo qoryo loo diray wax lagu dubto, iyadoo goonyaha ay ka waardiyeynayan labba nin. Marse haduu ayaama badan si daacad ah shaqada laga rabbay u qabtay xaabadana soo guray in badan waxa uu ku fakaray galab galbihii ka mid ah inuu fakado , waxeyse u suura gashay markuu sugay galbo badan, waxayna ahayd iyagoo labadii nin wax isku qabsadeen, ka dibna halkaas ay fursaddi uga soo baxday oo uu cagaha wax ka dayay. Waxaa uu gaaray Khartuum oo ah magaaladda madaxda Suudaan rafaad iyo taariikh dheer kadib.

Waxaadse ogaataa akhristaha sharafta lahow in marar badan ay dhacdo in dadku ay wadiiqada dacdaradda ku guuleystaan maritaankeeda, waxaadse maanka ku heysaa inta ay qasaaraan iney badantahay, inta ay noloshooda waayaan iney badantahay, inta ay qiimahoodii, cisadoodi,sharaftoodii, qoyskoodii iyo qaayahoodii intay waayaan, in ay badantahay. Haddaba

balaayo, balaaayaa ka daranne labadii hablood ee cawaandidu qabsatay waa ku gal, iney qasheen, iney madiidin u yihiin, iney ilma cawaandi ah dhal-dhalleen oo kuwa iyagga xooga ku heysta aan ka duwaneyn, dhamaan waa suura gal. waxaadse ogaataa inaan laga heyn wax war ah jaan iyo cirib meel ay dhigeen midna. Tanina ay ka mid tahay Jidka Tahluko dhibaatooyinka aan laga soo sawaaqsan Karrin ee laga dhaxlo taas oo uusan dareemi Karrin qofka xorta ah. Dadkase caqliga u saaxiibka waa kuwa waana qaata.

Maxaa kasii daran oo dhaca (inantii wiilka saqiirka ah wadatay)

Maalin maalmaha ka mid waxaan arkay nin saaxiib key ah oo murugeysan. Waxaan la yaabay ileen wixii ku dhibaa dhafoorkaadey ka muuqdaane, maxaa ku dhacay?. Marse haddii aan dareemin in reerku uusan bad qabin, waxaan is idhih xog mooge xaajo waa dilaayo, bal u daji oo war jiraabo cakaaruu imaane, bal horta is raaca oo ragna waa shaah dumarna waa sheekee, mar ku soo dhufta.

Waxaa uu iiga sheekeeyay qiso aad u yaab leh, qiso ninkii la hordhigaa uu qamuumyoodee, markaasna shakhsiyan aan dareemay murugo aad u foolxun, ma ahayn aniga kaliya waxay ka yaabisay laakiinse waxay ahayd qiso qof walbe oo Soomaali ah , dhiig Soomaaliyeedna leh marka loo sheego uu ka xajiimoodo. Inantu waxay ahayd reer Burco, waxayna u dhacday sidatan.

Waxuu yiri: wey na kale sooceen markii aan soo gaarnay xaruuntii Ma Gaffe, xaruuntaas oo sahal lagu dhaafin, waa xaruun naxariistii qalbiga laga gooyay, waa xaruun lagu sii gumaaddo dad soo gubtay, waa aan ooyee albaabka ii xiree, waxaa dhacday sidatan: waxaa naloo qeybiyay saddex kooxood , dadkii aan ku wadda soconay: **dad nolol ka simray aan rajana lahayn**, **dad dabiib iyo daawo lagu soo celin karo** iyo **dad tabartoodii iyo tamaamkoodii uu wali joogo,** waxaase dhacday in fiqraddii koobaad la wadda laayay xubnahoodiina lagala baxay sidaasna ay ku aleysteen, waxaa kale oo dhacday in hablihii ladnaa gaar loo aruurshay si ay curdankooda uga soo meel gaaraan Ma Gafe iyo raggiisii, hablihii intii kale oo xanuusanaydna lageeyay meel kale oo ragga iyo dadka aan damaaciga loo heyn la geeyo. Waxaa ka war bixinaya wiil isagu dhibka ka badbaaday, waxaa dhacday in inan hablihii kale ku jirtay oo aad u jalaqsanayd Ilaahayna laf ugu deeqay in maalin kaste laga cabaadsiiyo mar la sii waddo iyo mar la soo waddo. Raganimo waa u dhalashee wiil wiilashii ka mid ahaa ayaa arrintan ka xumaaday, waxuuna u sheegay nimankii sidatan: "*Nimanyahow waxaad tihiin dad Muslim ah, gabadhuna waa gabar muslimad ah, waxaad ku heysataan waa wax xaaraan ah, walaalayaalow maad iska deysaan, maad Ilaahay ka baqdaan iyo maalinta yowmal qiyaame, maad xushmeysan dumarka ileen idinkaba waa kuwa idinla dhashaye*", waxaase dhacday taariikh ka gashay dunidda baal mugdi, waxaa dhacday taariikh lagu halaagay siday diintu nagu tidhihi umaddihii xumaa ee Eebbe caasiyay qeybtood, waxaaa dhacday taariikh ninkii la ag dhigaa uu ilmadda qubbee, yaanan waxba war kugu daaline waxaa dhacday in wiilkii meshii lagu naageystay. Waxaadna ogaataa in dadkaan dadka jidka u gala aysan ahayn nin iyo labba toona ee ay yihiin qabiilo dagan xadkan ku dheerararan Suudaan iyo Liibiya.

Reer ba'oow yaa ku leh? Waxaa halkaas ka muuqata in hablaheenii haadu ay hawd cidla ah ku cuntay, raggiina maskaxdii iyo sharaftiiba laga dilay, waxkaste oo inna rag ka xanaaqi jidhay waayadii horena dhab naloogu geystey misana waxaan noqonay ummad bilaa dhiig ah oo aan dareensaneen xasaasiyadda waxa dhacaya, Qalbigii gubtaan waana kaa maqale waxay ila tahay in qofkaste oo soomaali indhoole iyo dhagooleba ay fajac iyo amakaag dhabanadda qabsanayaan yeeqyeeqsiga waxa dhacaya iyo in magacayagii naftayadii, diintayadii, damiirkayagii intaba lagu tuntay. Haddaba waxaad ogaataa Akhristow ineysan tanni ahayn sheekadii ugu horeysay ee dhacda kuna saabsan tacadidayadda bini'aadantinimadda ka dhanka ah kuwoodii ugu xumaa ee abid dhaca in haddana Soomaalida loo geysto haba yaraadeen ama ha badnaato tiradda la kulantay jabkee. Waana waxyaalaha iigu waaweyn ee igu kalifey inaan qorro buug aan kula baroordiiqayo dhamaan Soomaalida inta ka badbaadday dhibkaas inta ku dhacday, inta nabadda ku soo toosta iyo waliba marka lagu darro inta qurba nacaska joogta.

2.8. Yaa fududeeya

Maxaase lalin sida leyr badweyn ah? maxaa mowjadda lagda?Maxaa ku beylihiya? Maxaa keenaa inaad ballo u bareertid? Mase ogyihiin dadku dhibkaan?Maxaase wali dhiiri galiya? Waa su'aalo aan dhawaanahaan ay ciddi isweydiin, waa su'aalo laga seexday in la iskuba mashquuliyo. Maadama aan horey uga soo haddalnay wadiiqooyinka kale duwan ee Tahlaku waxaan qeybtaan wax yar ka cara-baabeynaa waxyaabaha sida weyn u fududeeya tahriibka, marka laga soo taggo dhalinta yaryar ee ka qaraabata iney dadka u soo gacan geliyaan marka Addis Ababa la yimaado, ama kuwa Boosaaso dhooban oo habeen walbe doon rara, dhalintaas oo kuli Soomaali ah kana dhaadhicinaya inuu jidku sahlanyahay**;**waase kaaf iyo kale dheeriye ka dibna ku wareejisa niman mukhalasiin oo Soomaali iyaguna u badan kuwaas oo kuu sheegaya kolka aad baxaysid kadib markay ku soo wacaan(garaacaan), ka dibna ku xareeya dhalinta guryo, halkaasoo habeenba mid laga guuro mar haddii laga shakiyo iney dowlada Itoobiya ugaarsaneyso. Asbuucyo Addis Ababa laga jooga ka dibna kugu ridiya wadadii dhibka u saaxiibka ahayd. Haddana waxaa jira arrimo intaas ka badan oo fududeeya tahriibka.

Waxaa jira arrin dhamaan dadka oo dhan ay wada moogyihiin, waxa kalena ma ahee waa inaan la fahmin khatarta Facebook(shabakad sheekaysiga), ma ahan inaan diidanahay in la isticmaalo shabakadan , hase ahaatee marka laga tago in dhibka ugu badan ee ay reebto uu yahay cudurka la qabsigga Facebook(Facebook Addiction), ama dareemitaanka amaan darro mar haddii marka loo baahdo xogtaadda la heli karo, oo ay raacdo dheehashadda waxyaalaha diinteena suuban ay inaga nahisay, ugu danbeyna in laba dhici karo oo la jabsan karo Akoonkaada oo waliba la xirri karo. Hase ahaatee waxaa anaga noo dheer gudbinta fariimaha marna wanaagsan marna xumaantooda wata, oo haddii masalan saaxiibkaa aad isla seexan jirteen uu muddo ka dib facebookga sidaas u soo dhigo sawiro walibo isagoo joogo meelaha wadankaas ugu wanaagsan iyadoo aan ognahay in wadan walbe meel burbursan iyo meel dhisanba leeyahay. Waxaase sidoo kale jirta in dadka tahriibay 9 boqolkiiba kuwa helay aqbalaad qaxooti ay qabtaan shaqooyinkii ay ka faani jireen markay Soomaaliya joogaan, Hadii uu kuu soo sawirri lahaa isagoo laami xaaqaya, ma cidbaa aadi lahay? Ama isagoo gurri tirtiraya, anakoo misana ogsoon in daaraha dhaadheer ee qofku isku soo sawirayo inuusan

lahayn, hadana. Miyaysan midaas saameyn ku yeelaneyn inankaas? Miyaysan se saameyn ku yeelanayn dadkii iyagu markaas ahaa asxaabtiisii? Amaba kuwa garanayay?

Xaqiiq la iskama qarshaan ah waxaa ah in fannaanadda Soomaalidu ay qeyb balaadhan ka yihiin soo waditaanka dhalinta Soomaaliyeed mar haddiiba ay u jeexayaan wadadii siinayaana hami, kaas oo ku kalifa adba maad halkaas hebel/heblaba ka soo heestay tagtid, waxay ku mushquuleen iney buurahaas fuulaan, dhalintoodana hiyi kiciyaan, heesana ka qaadan noocyada danbe iyagoo meelaha ugu casriyaysan ee wadankaas muuqaalo ku duubaya, mase diidani in ay ku jiraan wali kuwa iyagu jecel iney danta dadkooda iyo dalkoodaba ka shaqeeyaan.

Waxaa la yiri saddex waligaa hala ciloobin xitaa hadday kula ciloobaan: waa **tan koobaade**: caruurtaada ha la ciloobin oo haddaad la xifaala tantid waxaad arkin adigoo jirkaadii qeyb xaganaya, **tan labaade:** Maalkaadda hala ciloobin: oo masalan haduu geellu inta uu kugu tiro bato ku dhibo caku ha dhihin, ileen Eebihii kusiiyay baa joogee, waa intaas oo habaarkaas laguu qabtaa oo meel uu jaan iyo cidhib dhigay waydaaye, **waa tan saddexaade:** dadkaada hala ciloobin, oo xitaa hadday ku deyriyaan haddana waa tolkaa oo wax kuu dhaama ma lahan. Oo markaasaa waxaan ka naxaa dadka iyagu dibadda ka yimaada, oo marba hadday dalka ku soo noqdaan is walaaqa misana yiraahda "*Afrika cakuye dhib badanaa*", intase ay ku faanayaan dal aysan u dhalan maxaa u diiday iney kooda amaanaa?.Mase iloobeen magaca loogu qorro sharciyada ama looba yaqaanno; Somali-American, Somali-Ethiopian, Somali-British, Somali-Kenyan, Somali-Swedish I.W.M

Waxaanse ka sii naxaa dadkii Soomaalida hormuudka u noqon lahaa sida tartamayaashii Soomaalida ahaa ee burburkii ka dib in dhamaanba ay iska dhiibeen wadamo shisheeyo kolkey tartankoodii dhamaaday iyagoo walibo isha caalamku saarantahay, qaarna ayba wadiiqadii Tallo xumo ku alleysteen, waxaanse ka sii uur xumaadaa mar haddaysan jidhin dowlad ka danqata, waxaan ka sii xumaadaa iney naf la caari ahaayeen, sidaas daraadeedna ayba ahayd waxa kaliya oo ay sameen kareen, inkastoo uu u furnaa jaaniska iney dalkoodii dib ugu soo noqdaan oo gaajaba ha u dhintaane taarikh laga reebo.

Ninkase kaa ordee kaa abaal dhacee, adoonsiga la gaaray soo ma ogga?Waxaase igala sii daran waalidka iyo dhamaan ehellada iyagu kol hadday tageen qurbaha si nabad , halkey ilmahoodii waxbarasho tayaysan ay u maalgelin lahaayeen gudaha wadanka taas oo lagu waaro, mar haddii ay tabartii hayaan, halkase iyagu Tahriibka sharciyeysan ugu yaboohayaan, waxaase igala sii daran markay dhahaan ilmaa nalaga qaatay ama ilmaa dhaqankii bedalay, oo maxaa uu bedalli waayay beeyo aan Islaami ahayn waxaan islaami ahayn bey keentaaye, waxaase igala sii yaab badan in iyagoo wali Yurub iyo Mareykan jooga ay nihiyaan wadada maritaankeeda. Halka ay hilmaamsanyihiin aayadda Eebbe(S.W**)"Ma waxaad faraysaan dadka wanaaga ood halmaamnsantihiin naftiina, idinkoo aqrinaya kitaabka miyeydaan wax ka sayn. Juz:1, Surah:Al-Baqarah Ayah:44".** Xaqiiqa e waxaan aaminsanahay iney tahay midaani tan ugu weyn ee keenta tahriibka, waxaan aaminsahay inuuba tahriibka Soomaalidu halkaas ka bilowday, inta midaani jirtana ay dad badani wali wadadaas laga deyriyay ku qulquli doonaan.

Cutubka Saddexaad

3. Haddaba maxaa laga helaa Xeeradda salkeeda

Aaway Janaddii? Ma waxay ilowsanaayeen kobtey u socdaanba in tuugsigu ka jirey? Ma waxay ilowsanaayeen kobtey u socdeenba in lagu dhinto mar haddii taadu gasho? Haddayse shaqo-la'aan ka cararayeen ma waxay iloobeen in halka ay u socdaan ay tahay meelaha ugu adag ee dadku shaqo wanaagsan sey ku helaan ay adagtahay, mar haddiiba la helayo wiil/gabar cadaan ah oo shaqeysanaya oo aan looba baahnayn Afrikaan madow oo markii horeba wadanka qaxooti ku soo galay? Ma waxayse kula tahay sharaf aad iska qaaday iney gaallo garaab kuu bideyso?.Dhamaan waa su'aalaha aan sida wanaagsan looga jawaabin ee iyagoo yacyacood ah inta la liqey haddana la yiri baleey beyr, oo misana badda la gallay oo qofba mar is yiri quus. Iyada oo aan ognahay inaan qiyaasi karrin dhammaan tirada Soomaalida Yurub ku baahsan, hase ahaatee waxaan qaafil laga noqon karrin iney aad u kordhayaan tiradda Soomaalida ku qulqulaysa wadamaas. Marka xisaabta la furfuro waxaa la sheegaa in Ingiriiska ay ku noolyihiin: 108,000 qof; Sweden: 43,966(sanaddii 2012) qof, Natherlands: 34,631(sanaddii2013); Norway:19,656(sanaddii 2007);Denmark:16,5550(2008); iyo walibo Finland:14,045(2011). Halka Soomaalida ku nool wadanka Maraykana waxaa la sheegaa iney ahaayeen sannadahan (1986-2012) ilaayo: 94,978 shaqsi. Soomaalidii ugu horeysayn waxay Maraykanka galeen sannaddii 1940, sannaddii 2004 kaliya waxaa la sheegaa in 25,000 oo Soomaali ah ku noolaayeen gobolka Minnesota ee Maraykanka. Iyagoo dabadeedna ukale galbaday gobolladda kala duwan ee wadanka sida Atlanta, Georgia,

Columbus, Ohio, Seattle, New York, Kansas City, San Diego iyo kuwa kale oo badan

3.3. Maxaa lagala kulamay

Adigaa is lumiyoo isu loogay cadawgoo limintaadii siiyee, waa adiganse liitee leexadu ku sidatee hadba laan cuskanayee. Liibaanteeda duunyada ruuxba leysan maayee, maxaa luray naftaadii?Marse haddii aannu soo indha-indheynay Tahriibka ka hor iyo walibo inta hawsha lagu guda jiro, bal aannu markaana eegno masiirka Tahriibka iyo halka uu ku danbeeyo, meeshay doontii dadka kula kuftay, meesha janada lagu sheegayay iyo waxa laga soo dhaxlay.

Hase ahaatee su'aasha weyni waa maxaa kala qabsaday iyagii iyo halkey ku danbeeyeen? Iyadoonna loo aaba yeelayn meeshay tageen mar haddii ay tahay Galbeedka guud ahaan, hase ahaatee aan ka dharagsanahay in xujooyin kale duwan ay kala kulmaan wadamada kala duwan, marka aan halkaan ku soo koobno waxyaabaha guud ee ummadda Soomaalida isla markiibo hortaagan lagana rabbo iney ka gudbaan markay dhul shisheeye gaaraan, isla markaasna aysan ka soo sawaaqsanayn mar hadii aysan ka gudbin.

Waa dhibka ugu horeeyee **waa wadan aadan aqoon**, waxaana kaaga sii daran dal aadan lahayn waa dareen ku joog. Haddabo adooba taas la sii yaaban waa ileen wadan cusubbe **sidiii dadka la isku fahmi lahaa baa la rabaa** isagoo wadankaste oo la tagaa luuqadiisa u gaartahay taas oo aysan dadku kusoo xisaabtamin, waqtiyo tira dheerna ay ku qaadato barashadeedu.Waligiinse ma aragteeen qof aan Soomaali ahayn oo misana Af-Soomaali bartay? Waligiis ha dhuun-dhuunto waa kii la soo saarro, sidaas si la mid ah horta meelaha qaarkood in lagu yasaa dhacdoo midabkaa ku jaribaya, mar kalena lahjaddaada baa kufashileysa haddaadba isku ekaysiin lahayd dadka meesha daga.

Dhibbi waa tan danbaysee sidii loo fahmi lahaa baa la rabaa, marba haddii dadku ay leeyihiin dhaqan ka duwan kaagii, mar hadday kaa diin yihiin, kaa dan yihin, kaana fikir duwanyihiiin, taasoo ka dhigeysa inaad waligiin kala boodsanaataan haddii kalena adigu aad xeradooda gashid, taas oo haddaad samaysid aad diintaadii ka baxaysid ama wax un aad ku xad gudbeysid. Dhaqankii kala duwanaa oo markalena keenaya iney ilmihii kaa beylahaan, diintaadiina lagugu qabsaddo oo mararka qaarkood caabudkaba Eebe(S.W) war lagaa geliyo. Waa dhaqankii iyo dhibkiisiiye ilmihii aad ka soo qaxisay shanta qaaradood si un ay mar wanaaggii aad ku taamaysay u helaan ama mustaqbalka ay heli lahaayeen hadday dowlad Soomaaliyeed jiri lahayd oo mar kale ciida hoobtay ka dib markii ay galleen wax lagu magacaabo "**gangs**" ama daroogo iyo balla ka jaanba bartaan. Maadaama wadanka la yimaaday uusan badanaa lahayn hal dhaqan oo bulsho kala gadisan ku nooshahay waxaa dadka dhib ku noqota sidii ay u ilaalin lahaayeen dhaqamadaas kala duwan. Iyada oo inta badan dhacdo in dhaqankaadii iyo kooddu iska hor-imaadaan. Mid yar oo weedh ah hadaan meesha ka cadeeyo, wadanka Maraykanka iyo wadama badan oo galbeedka ah waxaa la ansixiyay wax la yiraahdo isguursiga dadka isku jinisiga ah (same sex marriage) , taas oo sharaf dhac

bini'aadantinimadana ku ah, diinteena suuban kazoo horjeeda. Waxaa marka dhacdu in hadaad nin tahay nin kale uuba isku dayo inuu wax kaa dayo, markaad feer iyo laad ka badisana adiga hadhow maxkamadu danbiga kugu xukuntu, maadama uu wuxuu kaala hadlay wadankaas ay sharci ka yihiin. Hablihiina kaba daran oo waxaa dhacaysa ama inay qadkaba ka baxaan, tii isdhahda dhowrso in maalin walbo lagu xadgudbo, mar la caayo, mar la fara-xumeeyo, mar shaqooyinka loo diido, mar kufsi iyo dilba loo gaysto, intaas oo dhan loogu sameeyo maadama ay muslim tahay oo qurra'.

Furitaanka qowskuse ma bataa?. Waa arrin meelo badan horey looga hadlay sidoo kale, waxaa dhacda, haddii halkaas la taggo badanaa in odaygii iyo Islaantii is fahmi kari waayaan ,mar haddii Islaantii loo sheego iney ninka la awood tahay, waxaana dhacda "**Single-Mother(hooyado kaliya oo ilmihii korisa)**" ka dibna odaygii gurigii laga raacdeeyo, iyo walibo raggii oo mar haddii la siinayo caydh/**Wel-fare(lacagta dowladdu dadka siiso aan shaqeysan**) aanba jaanba gedin, inkastoo aysan dadku isku wada mid ahayn. Waxaa intaas kuu dheer inantii tagta qurbaha iyo ninkeedii Afrika joogay iney badanaa is waayaan marba haddaan u joogay saaxiibaday nin ka mid ah in xaaskiisii ay dhooftay iyadoo isaguna uusan raali kaga ahayn, markalena tidhih lacagtii amaahda ee aan ku dhoofay adigaa lagaa rabaa, ee marka laba mid kala doorro: ama lacagti soo bixi aan ku dhoofay ama aan sidaasbo ku kala tagno. Taasna waxay kuu cadeynaysaa in qoys burburku in uusan ku koobnayn labada isla joogta **Galbeedkee,** ee uu sidoo kale aan u joogay dad badan oo is furray ka dib markii ay kala dhoofeen.

3.4. Midhihii guntiga ku jidhay oo la daadsahay

Sidaan kor ku soo xusnay waxaannu indha-indhaynay waxa lala kulmay iyo janadii aduunka ee dadka quluubtiisa ku jirtay. Haddabo qeybtaan aan ku eegno waxay ku danbeeyeen dadkii jooga laga kari waayay. Haddaba si'aan u qaadaa dhigno waxaannu u baahan doonaa inaannu qeyb qeyb u kale furfurno sida kitaabkiina aan kala bayaanino sida wax ku danbeeyeen (dadkii soo tahriibay iyo ilmahoodiibo). Dadka cirifyadda duunyadda ku nool waxay wax ku fahmaan tusmeynta. Ninse haddaad kabbo ka tollonaysid kabihiisa kolka hore la eegaaye, bal si aan u garano horumar iyo barwaaqaday ku danbeeyeen, aan marka hore bal fiirino hormarka ilmahoodu ku danbeeyeen waa qolyaha ka qaxay dhulkoodii ama tahriibaye. Maadama aan isla garanayno in dadku markay meeshii muddo daganaadaan ay tarmayaan, amaba markii horeba ay dad isqaba ahaayeen, amaba kasii fiicanoo ay caruurba wateen.

Halkey caruurtoodii ku danbeeyeen

Inkaste oo bini'aadankaste ee Eebbe uumay ay leeyihiin awooddahooda u khaaska ah, haddana marka laga soo taggo midaas, ayaa waxaa dhacda in badanaa ilmaha dadka soo qaxay ay la ildaranyihiin ku dhex noolaanshaha ummadaha kale ee ay dhex dageen, maadaama aysan

aqoon u lahayn luuqadda wadankaas, aysan jidhin machadyo taageeraya iyo walibo taageero aad u yar oo ay ka helaan xagga qoyskoodda. Taasna waxaa keenaya maadama dhaqan ahaan aysan Soomaalidu u lahayn inay ilmaha daba socdaan (*masalan inay iskuulka iyagu geeyaan, kana soo celiyaan, dugsi qur'aanka u raacaan, misana kazoo celiyaan, sida caalamka kale*) badanaa taas oo ay sahlayso in bulsho wanaagsan ay ku dhex noolyihiin, halkaas oo ilmihii wax xun samaynaya cidkaste ka celiso maadama aan dhaqan wanaagga u dhalanay. Sidaasna waxaa dhacda in ilmihii uu waalidka ka dheereeyo, uu waalidkiis u arko kuwa iyagu gaabis ah oo dunida kasoo daahay, kadibna uu umoodo dhaqanka saxda kan bulshada uu la noolyahay, sidaasna uu kitaab xoor, dhaqan xoor, dad xoor iyo duunyo xoorba u noqdo.

Aqoon la'aanta waaladiinta

Warbixin ayaa sheegaysa in qoysaska soo galootiga ah(qaxootiga) ay ilmahoodu aad uga hooseeyaan kuwa iyagu Maraykanka dhaladka ah, waxaana loo aaneeyaa in dhamaan ilmaha Maraykanka joogga ee aan waalidkood dugsi sare ka qalin jebin ay yihiin 12% hooyooyinka iyo 12% aabayaasha ah, halka ilmaha qaxootiga waalidkood ay leeyihiin 23% hooyin ah iyo 40%aabayaal aan dhamaysan dugsiga sare. Ogow waxaa laga hadlayaa waa ilmaha Maraykanka ay waalidkoodu ku dhasheen iyo kuwa aan waalidkood ku dhalan Maraykanka, iyagoo ilmayaashaas la is barbardhigayo, waalidiintooda soo dhameeyay Dugsi Sarre ee hooyooyin iyo Aabayaal ah. Haddaba hadday kuu cadaatay in aqoonta waalidiinta ilmaha dibadda ku nool ee Soomaalida ka mid tahay ilmaha waalidiintoodu ku dhalatay banaanka Maraykanka in aqoontoodu hooseyso, taasna waxay keenaysaa in waalidiintii aysanba la socon waxa ay ilmahoodu ku mashquulsanyihiin ama waxbarashadooda aysan horey u kicin Karrin caawina karrin, sidaas daraadeed aan sanaddiihii ugu danbeeyay u soo joognay in Soomaali badan ilmahooda la dilay iyagoo arrimo "gangs(*tuugo daroogooyinka ka shaqeysan kara*)" ku hawlanaa, dhowr marna Telefashinadda Soomaalida laga sheegay in waalidiin badan ay ilmahoodii waayeen, mar haddii aysan awood u lahayn inay hogaamiyaan oo iyaga laftirkoodu ay ku daac-daranyihiin wadankii ay markaas ku noolaayeen (waa galbeedkee).

Gunooyin bilaa faa'ido ah

Haddaba haddaannu aragnay ilmihii meeshay ku danbeeyeen, bal iminkana halka ay ku danbeeyeen dadkii waaweynaa qudhoodu!. Haddaanse rabno inaan fahano halka ay soomaalidu joogaan waxaannu u baahanaynaa inaannu ka haddalno; waxyaabaha dhaqaalaha aduunku uu ku kala tiirsanyahay ama halka ay kala marayaan. Waxaana la sheegaa saddex wax midkood sidey ukale danbeeyaana bey ukale fiicanyihiin.1aad: **beeraha**(agriculture): waxana la isku yidhaahdaan , xoolaha iyo walibo beeraha la qoto, waana heerka aduunyadda saddexaad oo dhammi ay u badantahay maadama ay noloshooduba intaas ku tiirsantahay, maalinta roobka la waayana ay la cabaadaan. Inta badan wadama aan horumarin oo dhan xaaladan ayay ku suganyihiin. 2aad: **Warshaddayn**(Manufucturing): Nidaamkan shirkaddaha ah waxaa u badan dhamaan wadamada uu dhaqaalahoodu korayo, kuwaas oo isku dayaya wixii beeraha kasoo go'ayay inay siyaabo badan uga manaafacaadsadaan, halka tufaaxa mar sidiisii loo cuni karo, marna caagaddo biyo ah laga dhigi karo, markalena kareemadda qaarkood lagu samayn karo. 3aad: **Adeega**(Service): kuwaani waa wadamadda tagay oo waaba laga tagay in laga hadlo warshaddayn I.W.M. oo waxaaba loo kala tartamayaa sida loo kale adeeg fiicanyahay, wadankastana maalaayiin shaqo baa laga sameeyay adeegaas dartiis, iyagooba aana u baahananyn iney ka shaqeeyaan qeybta heerka hoose ee shaqadda "**blue-color**", sidaas daraadeedna si shaqaale loo helo wax xamaala i.w.m ah looga yeero wadamadda aan anaku ugu horeyno. Dhibkuse Sooomaalidda sidee u haystaa?

Maadama 30kii sanno ee ugu danbeysay ay wadamadda ay Maraykanku ugu horeeyaan ay ka guureen nidaamka **Warshaddaynta** una guureen nidaamka **Adeega,** diiradana saaraya tiknoolojiyadda iyo xirirka. Haddaba is bedelkaan ayaa waxaa uu keenay inuu aad ukala fogeeyo tiradda u dhaxeeya gunooyinka dadka aqoonta sarre leh iyo dadka iyagu aanba lahayn. Sidaas daraadedna dadka Soomaalida i.w.m ah ay is arkeen iyagoo joogaa halka ugu hooseysa ee gunooyinka la bixiyo, taasoo keenaysa iney ku noolaadaan Af-iyo-Gacan maadama ayba lacagtoodu soo dhaafi Karrin: kiradii, cunnadii iyo hadday ugu bataan xoogaa ay wadankii u soo diraan dhulkii hooyo. Sidaas daraadeedna aysan waligood hormarayn maadama aysanba waxba keydsan Karrin. Ogsoonow inay jiri karaan dad iyagu wax maareeya oo waxbartay qiima roonna ku shaqeeya waxna keydsan kara, laakiinse waa farra ku tiris inta badan.

Daahyadda luuqadda

luuqaddu waa sheyga ugu dhibta badan ee dadka waaweyn ee Soomaliddu ay is arkaan iyagoo wadankii sannadda ku nool misana aan ku hadlin luuqadii wadankii ay ku noolaayeeen, taasna waxaa ugu wacan iyagoo hal meel dagga oo aanba u baahan dadka kale oo ay la kaftamaan ama la hadlaan ama wax ka gataan maadama hal xaafad ay badanaa ku soo uruuraan, shaac macaano iyo gambar-gaabyana ay ka dhigtaan saldhigyo Soomaaliya looga arrimiyo markalana shaaha lagu cabbo. Laakiinse taasi iyadoo faai'dadeeda leh haddana malagu jidhayaa? Jawaabtuna waa fudeyd adoo bas raacayaa lagu qabsan ama gurigiiba haddii laguu yimaado dowladda ugu yaraan sidaad oola hadli lahayd baa la rabaa, ama isbitaalka markaad u socotid, ama hawla qaas ah aad fushanaysid, waxaana dhacda iney qoysaska qaarkood ay bixiyaan lacago dheeri si ay turjumaan u helaan. Ama mararka qaarkood wax lacag yar ooga bixi lahayd inay ku bixiyaan mid badan.

Midab takoor mise midab kale sooc?

Ha yaraato ama ha badnaato, waa xaqiiq qofkaste oo ku noolaaday qurbaha Galbeedka(yurub iyo Ameerika) amaba qurba nacaska (Afrikada deriska ah) iney la kulmaan midab takoor. Waxaana dhacda mararka qaarkood ama in lagugu midab takoorro sidaad u egtahay ama dhaqankadda oo aan loo maqsuudin, sidaas daraadeedna diinteena suuban ay noqoto wax laga faano, oo ayba dhacday midab takoorid darteed in badanaa gabdhaha da'da yar ee Soomaalida ay dhaqankoodii xooreen iyagoo markaas daba–gaabyo waxaan oogu yeeray isku wada taagay, waana xaqiiq shaahutu la soo yiri**.** waxaana laga yaaabaa inuu qofi damco inuu wax dhigto sida iskuul i.w.m, haddana marka dhibaatooyin kale gadissan ay soo hujuumaan uuba waxbarashaddii uu niyadda fiican u hayay misanna faraha kaleba baxo.Sidaas daraadeedna dadka qurbaha ku nool ay ukala baxeen labbo kaliya, qeyb iimaankoodu adkaa oo isaga adkaysata dhibkaas, laakiinse dan iyo heela toona aan ka gallin, iyo qeyb iyaguu markii isbedelay oo is yidhih maxaaba idinka dhibka idinkugu wacan maad qaadataan dhaqanka galbeedka (sidaasna intay reer galbeed ka farxinayeen ayaa cadhadii Ilaahay ku dhacday, oo waxayba hilmaameen wixii oogu weynaa ee loo abuuray jin/insi oo ah in ay Eebe wadada saxda ah ku caabudaan, sidaasna ay Diintoodii iyo Soomaalinimadiiba dhumiyeen).

Saboolnimmad iyo khatarta ay banaaanka u yaalan

Tuugsadduhu ileen meel walbe waa dhoobanyahay, ileen biyo sacabbadaadaa looga dhargaa, ileen guri aadan lahayn dhaxanta kaama celiyee aaway barwaaqaddii la soo doontay? Ma diidanin in wadamaddu ay yihiin kuwa hormarsan, laakiinse ma aday kuu hormarsanyihiin? Gaajadiise Afkrika aad ooga soo carartay hadday halkaasba kugu heyso, maxaad macno u samaysay safarkaadii? Haddaad biibito Yurub aad ka furatid, tii Soomaaliyaa ka macaamiil

badneyde maxaa ku soo waalay?. Markaan ka haddalno wadanka Maraykan oo qura 49% waalidiinta dadka qaxootiga ah, waxay ku noolyihiin xaalada saboolnimo/faqrnimo, marka loo fiirsho qoysaska iyagu ku dhashay Marakyknaka. Sidaas daraadeedna waxaa halkaas kaaga muuqda inuu qofku qaxo ineysan macno badan aysan keenayn, haddii aad dooneysay inaad nolol fiican aad ku noolaatid ee muhiimaddu inaad fahantid waxaad heysatid iyaganna wax ku qabsatid.

Faqiirnimadda: waxaa lagu qeexaa, helitaan la'aan caafimaad, aqoonta, cunno iyo waliba kheyraadka kala duwan, taasina waxay keenaysaa iney ilmahu talaabo aan wanaagsanayn qaadaan si ay u helaan waxyaabaha ilmaha kale ay helaan, waxay kale oo ay keenaysaa hooyo kaligeed ilmaha korisa mar haddii iyadda iyo odaygii ay biilka maalinkaste lagu murmayo.

Waxay nagu qaadanaysaa buug kale haddaan rabno inaan ka haddalno dhibaatoyiinka la dhaxlo, marka wadamadda shisheeye siiba(kuwa Galbeedka) la tago, haddana waxaad moodaa iney muhiimtahay iney hadda qof walbe u cadahay waxyaabaha hortaagan badanaa dadka qurbahaas tagay. Waxaa kale oo kuu cad in haddiiba aad heysatid waxaad cuntid, cabtid, xiratid, iyo walibo hooy aad seexatid, waxaad raadisaaba ay tahay dheeri. Dhimanashana ay ba tahay inaad meesha ka saartid, mar haddii diinteenu inoo cadeysay in qofka isagoo uurka hooyadii ku jidha la qorro, goortuu dhiman lahaa, meeshuu ku dhiman lahaa iyo walibo waxuu ku noolaan lahaa, sidaas daraadeedna aad dhimanaysid meelkaste oo aad tagtid, walibo aad ku dhimanaysid waqtigii laguugu tala galay iyo goobtii. Waxaana taas kuu cadeyn ah in dadka qaarkood iyagoo joogo wadamo aad u fogfog misana Soomaaliyadii ay ka qaxeen amaan darro owgeed dib ugu soo noqdan misana ku dhintaan amaba taas bedalkeeda.Sidaas darteed ajashu aysan dhamaan, ifkana ka tegin oo ay tahay sida anagga.

Waxaan rabaa si aan u fahano khatarta galbeed taala inaan u soo qaadano tusaalle ahaan wadanka Maraykanka kaliya iyo bal inaan wax ka ogaano, khatarta dhulkii hooyo taalla iyo tan dibadda taalla midda badan. **40% dadka Mareykanka waa aalkoliistayaal, waxaana la sheegaa in 66.7 Billion oo ah doolarka Maraykanka lagu bixiyo sannad kaste arrimaha aalkolladda la xariira, halka 14 Million dad gaarayana ay yihiin kuwa ku xad gudbay cabitaanka khamrigga. 17, 000 oo qof ayaa dhinta sannadkaste arrinta aalkolladda la xariirta. Waxaa sidoo kale la sheegaa 78 Billion doolarka Mareykanka ah in lagu bixiyo kaliya daroogadda, sidaas daraadeedna 6.2 Milyan ay u dhintaa daroogadda iyo waxyaabaha la xariira. Waana yaab iyo yaabise 7.3 Milyan qof ayaa sidaas daraadeed isticmaala sida xad-dhaafka ah daroogadda aan sharciyaysnayn. Haddaan ka haddalno afduubka Sanaddii 2001 kaliya 840,279 qof ayay sheegeen hey'adda danbi baarista Mareykanka FBI in la waayay oo la af-duubtay ama aan la ogeyn meel ay jaan iyo ciribba dhigeen, waxaana taas kaaga sii cajaa'ib san iney ahaayeen tiridii dad ah ee ugu yareyd ee la waayo ilaayo sanaddii 1992. Danbiyadda xaga wax dhunsiga iyo is daba-maryaynta waxaa la sheegaa in muddo sannad kaliya ah ay dadka cadaanka ah ee wadanka Maraykanka ay dhunsadeen 136 Billion oo doolar, ogow dadka boosaska sarsarre haya kaliya weeye. Mase ogtahay waxyaabaha la yiraahdo Pornography (sawiradda qaawan iyo aflaamta qaawan ee fisqiga ah) iney ka lacag badanyihin marka la isku darro xoolaha ka soo xarooda: kubadda cagta + baasketboolka + Baseball i.w.m ah. Ganacsiga jir ka ganacsiga makula tahay in 1% dumarka Mareykanka jooga ay jirkoodda ka ganacsadaan. Miyaadse maqashay san-cadda cusub iyo ilbaxnimadda cusub waa wax**

lagu magacaabo "jinisiga iskumidka ah oo is guursadda", waxaan sidaas daraadeed lagu sheegay daraasadan in 4 labaatankii kaste oo dumarka Mareykanka jooga ay mar un dhedig kale tijaabsheen noloshooda ka mid ahayd. Amaba ay yihiin kuwa ilaayo hadda ah dumarka u tagga dumarka kale. Waxay galbeedku noo sheegaan iney xuquuqda u doodaan dadka badankiisa ma fahmaan midaas, waxayna ka arkaan idaacadaha reer galbeedka bey runta moodaan, ma ogtahay in ilmaha la dillo iney danbi kabaa'ir ah tahay, mase ogtahay wadanka aduunka ugu ilbaxsan(Mareykanka) in 1,370,000 oo ilma iska soo xaaqid(abortion) ah la sameeyo sannadkaste.

Makulatahay haddiii aad tagtid wadamadaas oo kii ugu fiicnaa aan tusaale u soo qaadanay inaad fidmadaas aad ka badbaadeysid aan soo xusnay? Mase kulatahay in ilmahaaddu ay ka badbaadanyaan haddaadbo adigu ka badbaadid? Mase kulatahay caqligaada in aysan bey'addu adiga iyo ilmahaadaba saamayn ku lahaan Karrin?iyadoo aan ognahay dadka hadda galbeedka jooga ineyba qeybtood dhaqan doorsoomeen. Mase kula tahay marba haddaan ku noolaano meellaha ay ku noolyihin inaan anakuna soo tijaabineyn ilbaxnimadda cusub? Iyadoo maanta dadka qaarkiis ay aad ugu ol-oleeyaan dhaqamadda Galbeedka. Waxaan u soo qaatay daraasaadkaas kala duwan si un aan wax idinkaga tuso khatarta ka jirta wadamadda reer galbeedka oo dadka intooda badan ka aaminsanyihiin ineysanba ciddiba ku gaajoon, kuna dhibaatoon, laguna dillin.

3.5. Maxayse Barteen?

Adduunka kolba marbaa laga qaxaa wadan, waxaa la sheegaa in wadamo kala duwan ay dagaalo sokeeye wadankooda ka dhaceen sidaas daraadeedna, dibaddaha laga siiyay Magan-galyo, waxaa la sheegaa wadamadda aan AFrikaanka ahayn in dadkii halkaas magan-galyadda la siiyay ay aad wax u barteen. Wadamadoodiina aqoon tira badan kula soo noqdeen, halka dadka iyagu Afrikaanka ahaa ee fursaddahaas la siiyay ilaayo hadda aysan diirad saa'id ah waxbarashadda saarrin badankoodda oo haddiiba ay soo noqdeen wadamadoodii aysan wax saas u ballaaran kula soo noqon marka laga reebo dad kooban.

Sidaas si la mid ah haddaan ka haddalno Soomaalida iyo wixii ay soo barteen markii ay dibadda tageen, bal aannu markale tusaale daraasad ku saabsan heerarka waxbarasho ee ay Soomaalidu ku gaareen Guddaha wadanka Ingiriiska, oo ay sameeyeen **Africa Education Trust and London Learning and Skills Council,** guud ahaan88%(boqolkiiba) dadka Soomaalida ah waxay dhigtaan koorsooyinkan ama heerarakan waxbarasho. 24 boqolkiiba waxay dhigtaan ESOL galaasyo ah, 24 boqolkiiba isla dadkaas kore ahna A level, 21 boqolkiibana FE, halka 6boqolkiiba ay dhigtaan Jaamacadda heeerka Dhigree(Bachelor Degree), 4 boqolkiina koorsooyinka bulshadda(Community Courses), iyaddoo 2%kiina ay dhigato shahaadda saddexaad ee Jaamacadda(Master) , ugu danbeyn 1 boqolkiiba ay dhigtaa tababaro xagga xirfaddaha aas-aasiga ah. Ogowna waxaa laga hadlayaa waa dadka waxbarta ee Soomaalida ah oo kaliya.

Waa sida yadiiye markaan u fiirsanno, waxaa halkaas kaaga soo baxeysa in dadka Soomaalida ee waxbarta ay koobanyihiin, hadday waxbartaana aysan u badneyn meeelaha muhiimka sida ku cad korna shahaadooyink Dhigree koobaad ee jaamacadda iyo Dhigriiga labaad ee

jaamacadda dadka dhigta ay aad u koobanyihiin. Inkastoo la sameeyay daraasadan waqti yarra durugsan, haddana xitaa maanta waxa is badallay wey koobanyihiin, dadka dibadda jiranna guud ahaan waa labbo: qolo-ceyr ku nool ah oo aan shaqabo daneyn iyo qolo-shaqeysata oo iyagunna ku mashquulsan xamaalasho, sidaas daraadeed waxaaba meeshii ka baxay dadka waxbarranaya oo noqday kuwo aad u kooaban.

Waxyaabaha keenaya in dadka waxbarta ay yaraadaan waxaa oogu horeeya in maadama dadkii waxbarashadodii hore la yidhih waa , waxba kama jiraan ay ku adkaatay iney saacadaan hoos kasoo bilaabaan amaba xiisa u heli waayaan in waxay toban sanno ka hor dhigteen ay mar labaad dhigtaan. Iyo iyagoo ayaamo markay joogaanba kharashaadkoodu batto unna waaya iney helaan waxbarashaddii ay doonayeen, iyo walibo mar saddexaad maadaama uu qofku shaqeynayo inuuba waqti waayo sidaasna ay keento inuu shaqadda iska daayo haduuba rabbo inuu waxbarto. Taasna dhibaatadda ay leedahay waa haddii aanad shaqeysan sidee u noolaanaysaa inaadba waxbarato daayoo, marka laga taggo in qaarkood ay isaga daayaan waxbarashadda haddaad shaqadaan ka tegtid , mid la mid ah heli maysid.

Sidaas daraadeedna waxay keentay in dadka Soomaalidu ay u badnaadaan kuwo aanan heysan aqoonsiyo caalami ah oo ay ku shaqeysan lahaayeen, **taasina keentay shaqooyinka ay qabtaan**!.

3.6. Shaqooyinkase ay qabtaan

Soomaalida soo qaxday(tahriibtay) ee ku nool dibaddaha, waxaa lagu qiyaasaa iney ugu tiro yaryihiin xaga shaqaaleysiinta marka loo eego dhamaan qaxootiyadda kale ee caalamka ka kala yimid, sidaas daraaded muuqaalo ay daabacadeen xafiiska tira-koobka ee Qaranka(Office for National Statistic); waxaa ay muujiyeen cadad aad u weyn oo dhaqaale ahaan-curyaansan iyo shaqo-la'aan ah marka laga hadlayo Soomaalida. Sannaddi 2008 waxaa la ogaaday in 31.4%(boqolkiiba) oo rag ah iyo 84.2%(boqolkiibo) oo dumar ah in ay dhaqaale ahan curyaansanaayeen. Iyo waliba 41.4%(boqolkiiba) oo rag ah iyo 39.1%(boqolkiiba) oo dumar ah inay bilaa shaqo ahaayeen. **Sidaasna waxaa lagu sheegay cilmi-baaris laga sameeyay wadanka Ingiriiska oo qurra. Waxaana halkaas kaaga muuqata in Soomaalidu aysanba u badneyn dad shaqeysta ee ay ceyrtaas iska gurtaan.** Waase su'aal kale haba shaqeeyaan ma xumee maxay ka shaqeeyaan?Waligaase ma is weydiisay?Dadkaasi markay kasoo noqdaan dibadahana maxay bulshadda u sheegaan? Maxaannuse ka aaminsanahay dadka dibadda ka yimaadda? Ma in lacagtu jeebaddaha ka daadanayso mise wax kale?. Haddaba dhamaan si'aan ooga hagar baxno arimaah oo dhan bal aynu markale waa sideeniiyee, warka daaha ka qaadno.

Machadka Ummadda ee Siyaasadda iyo Cilmi-baarista(Institute for Public Policy and Research) war uu soo saray waxaa lagu sheegay in Soomaalidu ay yihiin kuwo lagu shaqaaleysii sicir aad u hooseeya, maadama ay Soomaalidu markii horeba qorshe shaqo ahaan u soo gelin wadanka ee ay u yimaadeen qorshe nabad-gelyo doon iyo iyago ka soo cararayay dagaalo ay ku sheegeen iney wadankooda ay ka socdaan. Waxayna war bixintu ku dareysaa in dadka magan-galyo doonka ahaan wadanka ku soo galay ay iyagu kaba sii daranyihiin qaxootiga kuwa ku yimid oo ay adagtahay iney shaqo helaan. **Waxaana lagu daraa dadka iyagoo aqoonta leh wadankii ka yimid sida iyagoo shahaadoyinkii jaamacadda wata,**

misana ma helaan shaqooyinka ay doonayeen ee ahaa waxay cilmi ahaanta u soo dhigteen.

Sidaas si la mid ah daraasad ay sameeyeen qolyo la magac baxay Guddiga aqoonta iyo Masuuliyadda Afrika iyo Xirfadda Waxbarashadda Landan(**Africa Education Trust and London Learning and Skills Council),**waxay ku sheegeenin dadka Soomaalida ah ee shaqeeya ay u badanyihiin iney qabtaan hawlahaan: waa kuwa ugu roonne shaqooyinka darajadda labaad(Semi-skillied) iyo shaqooyinka gacmaha(Manual Labbour) boosaska ah inta la siin lahaa boosas u dhigma waxay soo barteen, halka kuwa kalena ay la silic-diryaysan yihiin sidii loo aqoonsan lahaa shahaadooyinkoodii hore ee waxbarasho, halkaas oo 25%(boqolkiiba) Somaalidda waxbaratay ay fursad u heleen iney ka shaqeeyaan boosaskoodii saxda ahaa. Sidaasna waxaa keentay in dadkii Soomaalida ahaa ay qeybtood aysan luuqadda wadankaas si balla ah ugu hadlin ama iyagoo la midib takoorri , waayo inta uu wiil/gabar cadaan ah shaqadda u taagantahay in qof Soomaali ah la siiyo waa habeenkii xalay ahaa oo tagay.

Haddaba maadama aan ka soo haddalnay dadku iney qabtaan shaqooyin kuwaas oo gacmaha laga qabto si kalena shaqo xamaali nimo la xariirta marba hadday tahay waxaan xafiis la fariisanayn, iyadoo shaqo, shaqo tahay haddana maxaa anaga teena buska iyo habaaska sii galiyay oo inaga dhigay kuwa iyagu shaqooyinkaas u badan? Haddaba yaanan ka hor dhicinne shaqooyinkaas waxaa ka mid ah kuwan:

Parkiology : oo ah sida gaariyasha loo baakimo ama baakinka loo geliyo, ogow waa dadka aana wax barran ama kuwa iyagu bartay ee aan fursadii helin shaqooyinkey qabtaane. Waxad kale oo la socotaa laftirkoodu iney tahay boos sarre oo waxaaba lagu oran: "qofkaani aduunka saddexaad buu ka yimid sidaas daraadeed waa inuu machad soo tababaraa muddo qaadanka karta lix bilood" si aad ugu danbeyn shahaado uga soo qaadatid cilmigan cusub ee "*parkiology*".

Shelfiology: waxaa sidoo kale ka mid ah cilmigan isna la yiraahdo "shelfiology" oo ah sida alaabta marfashka loo geliyo, oo iyaddana sida kan horre si la mid ah aad machad tageysid taba-barka markad soo qaadatid ka dibna, aad ka shaqeynaysid inaad shey soo qaadid oo marfish gelisid.

Waxaa la qabtaa shaqooyinkaas iyo walibo kuwa kasii dhib badan oo adoo dhabarku ku jabay aad soo baxaysid sida kuwa diyaaraddaha alaabta saar saarra , ama shirkaddaha wax-soo-saarka ka shaqeeya. Shaqooyinkaas oo aduunka cusub ee maanta aanba bini'aadan looba dhiibin ee ay qabtaan **Robots**(Qalab sida dadka u shaqeeya oo loo dhiibo shaqooyinka caajiska iyo khatarta ah).

Haddaba haddaan si uusan maanku diideyn wax u cabirno, maxaad dooneysay markii hore?Masalan inaad lacag soo tabcatid, Meeqaadse ku shaqeyn kartaa? Kama hadlayno dadka yar ee iyagu lacagaha fiican ku shaqeeya, laakiinse kasoo qaad dadka dhexdhexaadka ah, maadama inaan ka haddalno kuwa ugu lacagta yar ay eex na gelineyso. Waa dhexdhexaadka dadka mushaarkoodu yahay e meeqa kharash baa kugu bixi kara? Maadama uu baska sii raaciisu hal yuuro yahay(Euro:lacagta midowga Yurub), Meeqa lacag ah baad keydsan kartaa? Meeqase lacag ah baad dirtaah? Ileen adaa reerka dibadda u jiree. Haddaba adoo jooga wadankaadii hooyo meeqaa kugu bixi karta? Xaqiiq waa lacag aad u yar, Meeqaadse keydsan kartaa? Markale waa lacagtaadda saddex meelood labbo. Waxaase intaas kuu raaca isla markiibo inaad ganacsiyo maal gashan kartid walibo iyado canshuurta lagaa qaadayo ay aad u

yartahay, mar labaadna dakaddo aad si raqiis ah wax kale soo degi kartid aad heysatid, Ceymis iyo ballo kale oo aad u baahantahayna aysan jidhin.

Inkastoon su'aalaha barkood ka jawaabay ileen Garoowe-ba 3-4 kun oo doolarka Maraykanka ah waa looga shaqeeyaaye, bal adigu u fiirso si dagan uga jawaab dhamaan su'aalahaas. Wixii uu maankaadu ku siiyana raac.

3.7. Waxa Laga Dhaxlay iyo Hormuudyadda Soomaalida.

Waannu garanay in dadkii ay wadamadda reer-galbeedka tageen, waanna ogaanay iney waxbarteen badankoodu iyo inkale, waxaan kale oo aan ogaanay shaqooyinka ugu badan ee ay qabtaan. Bal iminkana aannu eegno waxyaabaha laga dhaxlay? Oo aan oola jeedno ummadda halkaas ku nool iyo Saameyntoodda wanaagsan ama xun ee ay ku leeyihiin Soomaalidii kale ee dhulkii joogtay.

Qeybta la jeclaysto: anaga oo og in dadka Soomaalida ee qurbaha ku nool ay kaalin lama ilaawaan ah kasoo qaateen xiliyadii ay darneyd xaaladuhu, xiliyadii lagu tilmaami jirey qaxii, oo uu qofkaste isku dayay inuu ugu yaraan reerkiisa kasoo badbaadiyo dilka socda mar haduu isaga Eebbe ka badbaadiyay.

Qeybta aan la jeclaysan: Ummadaha kale waxaa la sheegaa iney wadankoodii ay kula soo noqdeen, iyagoo waxbadan soo bartay, ka dibna ay iyagu uba horseedan barwaaqadda iyo baraaraha dhulkooda. Hase ahaatee maadama ummaddayadan joogta wadamadda reer galbeedka, iyagoona soo noqon baa wax laga dhaxlay, waxaana ugu horeysa: iney jeexeen wadadii lagu aadi lahaa wadamadaas, marba hadday xitaa markay soo noqdaana ay hayaan amaantii wadankay ka yimaadeen oo ay ugu horeyso liidida dhulkooda hooyo iyagoo eray kasoo bartay markii ay dhib la kulmaanba TIA (This is Africa) ama tanni waa Afrika. Fikirka galbeedka(*sharax: mid walbe wuxuu yimid isagoo wadankii uu ka yimid arraahdoodii wata, una haysta shareecada Islaamka iyo Nidaamka suuban mid dib u socod ah, waxaa kuwaas ka daran kuwa iyagu wata fakarrada shiicaynta Soomaalida oo ku xiran Iiraan, kuwaas oo iskaga kaaya dhigaya hay'ado iwm*) iyo wadankii oo looga waramo baa intaas raacda: waayo waxaa dhacda mar Allaala dadkaasi markay fasaxyadda ku yimaadaan inkastoo qaarkood roonyhiin haddana iney dhahaan waxaan maxaa saas loo dhahayaa, halkaas anagu markaan joogno sidaas baan dhahnaa isaga oo aan u aabayeelayn xitaa haddii waxa laga hadlayo diinni yahay iyo walibo qaarkood oo iyaga oo dhaqan badalmay imaadda, ciyaalka xaafaduna ay is dhahaan waa sheena cusub oo ay halkaas dhaawac ku yihiin. Waxaaa taas ka sii xun in Soomaali badan oo halkaas jooga aysanba wadankoodda caadiyan u aqoon, hadday maqlaana ay ka maqlaan wararka xun xun ee ka baxa telefishanadda qaarkood, taasna ay keenayso in jiilka danbe ee dhalinta ah ee soo kacaya ay dhibaato noqonaysa in horta laga dhaadhiciyo inay Soomaali-yihiin ama wadankooduba yahay wax jira. Waxaana aan u soo joogay dad waaweyn oo ku haya "*war walaahay baana dagayn Soomaaliya iy shidadeeda*", taasna waxay horseedaysa in la hello boqollaal kale oo iyagunna sidaas dhaha, oo waliba jooga guddaha dalka marba hadday maqleen wararkii dadkii ka horreeyay.

Marka laga soo taggo nama qabato oo ah weedha ka soo yeertay, qolyahaas Waxaa kale oo iyana balla ah, lacagtaan biilka ah oo la isku qoraayo taas oo keentay in dad badan oo wadanka

jooga ma shaqaystayaal ay noqdaan, nabaddana ay dagaal ka doorbidaan marba haday biilkooda helayaan magaaladay tagaanba, qofkuse markuu ku xiranyahay hal meel oo dakhlina kasoo gallo meeshaas waxaa dhacda inuu wanaagsado bay'adiisa iyo dariskiisaba. Taas marka laga soo taggo iney siyaabaha qaarkoodna muhiimtahay loona baahanyahay, laakiise marka aan dadka lala xisaabtamin waxay keenaysaa inuusan qofna shaqeysan, oo qofkastaa ku leeyahay ma gurigii hooyaday iyo Aaabahay baan bariis ka waayay, waxaana iyaga(qolyaha qurbaha jooga) u wanaagsan intii ay biil joogta ah dirri lahaayeen, iney maalgelis u sameeyaan dadka eheladooda ah. Waxaana amaanayaa in dad kooban ay hawshaas bilaabeen maanta.

3.8. Qolyihii hingoobay iyo wax kale qabsaday Galbeed (taariikh ugu yaraan hal qof oo soo noqday)

Iyada oo ay adagtahay inaan cinwaankaste ka taariikheyno, haddana waxaa jira dad badan oo iyagu markii ay halkaas tageen(waa qurbihii galbeedkee) dabadeed kaba soo tagey markii ay ka soo gun gaareen xaqiiqda. Waxaana dhacday in dad badan ay reerrahoodii dalka soo dajiyeen ganacsiyo yaryarna ka samaysteen, kuwa kalena wayba kasoo taggeen siday u dhantahay inta ay farra qabsi kala yimaadeen, ayay balley bayr dhaheen, runtiina midaan waxaad ka dareemi kartaa magaalooyinka waaweyn oo aad arkaysid dad Yurub iyo Ameerika ka yimid oo maalgashiyo kala duwan sameeyay, dagayna dhulkoodii hooyo.

3.9. Yaa Eeda leh

Wixii xunba Xaawaa leh baan maqli jirey waagaan yarraa. Dowladay dadku wadda dhaleeceeyaan oo waa su'aal mudane dowladdu yay tahay?. In la tahriibana maxaa keeynay?. Waa arrimo bulshadda iskaga khaldan in la tahriibana isla shacabka laftirkooddaa keenay, waayo iyagaa gartay inay ku kacaan dowladii ugu danbeysay ee dhisneyd, iyaga ay ahaayeen jamahaddahii kala duwanaa, ka dibna taasoo keentay in dowladdii burburto. Teeda kale haddiiba ay dadku garteen iney dowladii dhexe burburiyaaan wixii ka danbeeyay ma iyadaa masuul ka ahayd? Mise anagaa qabiil qabiil isku gawracnay?. Midda kalena dowladdu waa shacabka, wax dowlad la yiraahdo oo cirka ka yimaadaa ma jiraan, haddii shacabku ay wanaagsanyihiin, ileen cidda maamushana waxay ka imaanayaan isla shacabka. Haddiise qof uu xilka qabto waxaa wanaagsan in la adeeco oo la ixtiraamo lana suggo ilaayo xilkiisu dhamaanayo. Haddiise la garto in la riddo waxaa wanaagsan in si caqli ku dheehanyahay loo cinqilaabo xukuumadiisa sidaas oo laga baaraan daggay, marna ummadda aan u keenin wax ay ka soo sawaaqsan waayaan. Sidaas daraadeedna waa tan diinta Islaamku na fareyso in haddii aan samayneyno camal(shaqo) oo haddii loo baahdo ah in aan burburino wax xun(xukuumaddba ha noqotee), waa in la fiirshaa fidnidda markaas lagu jirro iyo midda ka imaan karta haddii la burburiyo. Haddiise ay soo baxdo in tan ka imaan doonta ay darnaan doonto. Waxaa wanaagsan in farraha lagala baxo oo la Simro, maadama uu isla Samirkana diinta Islaamku ay dhiiri gelinayso. Waxaana ugu danbeysa in dhaqamadeenii xun-xumaa sida isticmaalidda qaadka in khaati bilaahi nalooga taaganyahay wadamadii aannu u dhaxnay oo ay ugu horeeyaan Ingiriisku, halkii aannu waxayagii xaafadaha uga soo taggi lahayn, mar hadeynu qaaraddo soo goynay haba dhib badnaatee, intaan waxbarashadda aas-aasi ka soo bilowna aanba noqon lahayn ummad waxbaratay, ummad waxbaratayna waxay noqotaa ummad wax-qabad badan, ummad qabad bandanna waxay u dilaacdaa in ay waddamadda ay joogaana ka

dhex muuqdaan oo wax ka beddelaan koodiina iyagoo wadda cilmi soconaya ah ay ku soo noqon lahaayeen.

3.10. Qaran burburray

3.10.1. tahriibku uu u saamaynayo dhamaan bulshaddoo dhan

Haddaba mar haddii aan qeybtii hore ee cutubkan uga soo haddalnay: dhibaatooyinka ugu horeeya ee la soo gudboonaadda dadka iyaguu markaas Tahriiba, waxay ku danbeeyaan, waxbarashadooda iyo ugu danbeyn waxyaabihii laga dhexlay, bal aannu aragno iminkana sida uu tahriibku u reebi karo saamayno xun oo aad u dar-daran, marka laga bilaabo: **qofka, qoyska iyo Qaranka dhamaan,** haddii aan wax laga qabana keeni kara waxa cinwaanku inoo sheegayo**.**

Saamaynta xun-xun ee Tahriibka

Inkaste oo aad moodid inaad soo aqrisay qisooyin badan bal midaana aan isla fiirino iyo walibo siddey saameyn oogu yeelatay dadkii laga soo tagay, waana waana aasaarta ugu yar ee ay reebi karto, marka laga taggo inuu qofku wadda baas iyo habaas ah si marayo. Waxaase dhacday magaalada Addis Ababa(ee dalka Itoobiya) in dumar kala duwan iyo odoyaashoodii ay kala tageen arrimo ka dhashay wadadaas lakala qaadayo. Waxaana in badan dhacda in wiil iyo gabarri is bartaan sababtoo ah ama inantaa u socota qurbaha ama inankaa u socdaa, sidaas daraadeedna xidhiidh khiyaamo ku saleysan, markii horena wax xun iyo han aan wanaagsaneyn lagu hareeyay gadaal kama hagaagaane, ay dhacdo in markii inankii ama inantii ay tagto halkiiba guurkii lagu ilaabo, amaba inta la isa soo dhoofiyey ileen mid baa daacad ahee, inuu kii kale mar ba haduu dibadda uu ku taamayay tagey, faraha ka qaaday. Waxaan garanayaa una joogay hablo la qabay oo cagta ku dhuftay wadadaas, ka dibna ay dhacday in qoyskii halkaas ku burburo. Haddiiba xidhiidhkii qoyska ama lamaanayaasha uu noqdo mid ku saleysan Galbeed jaceyl, maxuu noqon doonaa gunaanadkiisu ileen hal xaaraan ah nirig xalaal ah ma dhashee.

Magaaloyinkii oo maran!

Taas marka waxay qofkaste u cadeynaysaa in la sii socdo un oo aysan jidhin wax soo socda, taasna ay keenayso in magaalooyinkii marnaadaan. Magaalloyinku haba marnaadaane maxaa daran: waa awoodii dadka oo kaa baxaysa(Man power), sidaas haddiiba dadkii oo dhan ay wadankii kasii hayaameen, ay magaalooyinkii ku soo harayaan dad iyagu markaas tuulooyinka ka yimid ama baadiyahaba. Oo ay dheertahay in wadamo badan oo shisheeye cadow ah ay nagu hareeraysanyihiin, kuwaas oo iyagu aayar aayar usoo dagaya wadankeena iyagoo qaxooti iska dhigaya iyo wax lamid ah, sidaasna ayba hadhow keenayso in dhulkiiba nalaga boobbo.

Waligeedna kuwii reer magaal noqdaba wey sii tagayaan, kuwa cusubna baadiyaha ama tuulooyinkey ka imaanayaan sidaas daraadeedna aan noqonayno qaran cusub tobankii sanaba oo nolosheena ka mid ah. Sidaas daradeedna ay imaaneyso qaran burbur. Kuwa iyagu qurbahaas aadayna ileen maskax fiyow ma ahee iyagoo xambaarsan fikradiihii shisheeyaha ay wadanka dib ugu soo noqon doonaan, marba kii cusub ee noo yimaadana aan madax ka dhigan doono, xitaaa asagoona siyaasadda wadanka waligiis gelin, ileen sharuucdeennu waa daciife, halkii aan sharciga adkeyn lahayn sida wadamadda dunidda: halkaas oo qaarkood qof aan wadanka ku dhalan uusan qaban Karrin xil, ama qof aanan siyaasadda wadanka ku jidhin 5-10 sanno ee ugu danbeysay. Waxaaana dhici doonta labaatameeyo sanno ka dib iney isku soo sharaxaan xilka madaxtinimadda Soomaaliya kuwo iyagu markaas wadamadda Galbeedka ku dhashay oo si dhamaystiran loogu soo shubay ileen kuwa hadda jooga qeybaa lagu shubaaye oo wali jirkiibaa Soomaali ehee, ileen kuwa hadda jooga baa noqon doona 50 jirro e.

Waxaa laga yaaba ineysan maskaxdaada ku soo dhaceyn aadna leedahay waa saadaalin aan waxba ka jarrin laakiinse aanba midkale oo caddeyn ah meesha ka keenee: Eebbe waxaa uu quraankiisa ku yiri(**S.W**) **"(xusuuso) markuu Eebahaa ka qabtay dadka dhabarkooda fara-coodii uuna marag uga yeelay naftooda, kuna yidhi miyaanan Eebihiin ahayn, y dhaheenna inaad Eebahanno tahay yaan marag kacnay, inaydaan dhihin maalinta qiyaame annagu waan halmaansanayn kan. Ama aydaan dhihin waxaa wax la wadaajiyey(Eebbe) aabayaalkanagii mar hore annagunna waxaan nahay farac ka dambeeyey ee miyaad noo halaagi waxay faleen xumo falayaal. Saasaannu u caddaynaa Aayaadka iyo inay u noqdaan xaqa: Al-Acraaf(172-174)".** Aayaadkani waxay cadeynayan ineysan bini'aadanka marmarsiiyo u harrin oo mar haddii Eebbe bini'aadankii weydiiyay inuu Eebahood yahay iyo inkale, dabadeena ay qireen. Iyo walibo ineysan marmarsiiyo ah labadan midkoodna aysan jiri doono: 1: qaafil noqosho 2: iney aysan ku doodi Karrin in loo cadaabo wixii ay aabayaashood ka dhaxleen. Halkaas ay kuu cadeynayso in ummad kaste ay masiirkeedda masuul ka tahay.

Waxaaan ka soo wadanaa labadda arrimood(dhib) ee kor ku xusan waa labba dhibaato oo ummadda Soomaalida meelkasta oo ay joogaan ku habsatay. Inta ay taaganyihiin Soomaalidu lug iyo laanba isla waayi doonto.
